4. Laga soo billaabo 1dii Janaayo 2016 ilaa 14kii Oktoobar 2017, wadarta khasaaraha soo gaaray dadka rayidka ah ee la diiwaan-geliyay wuxuu ahaa 4,585 (2,078 dhimasho ah iyo 2,507 dhaawac ah). 60 boqolkiiba khasaarahaas waxaa loo aaneeyay Al Shabaab (2,728, oo u kala qaybsan 1,233 dhimasho ah, iyo 1,495 dhaawacyo ah). Halka 13 boqolkiiba loo aaneeyay maleeshiyaad (594), 11 boqolkiiba loo aaneeyay laamaha dowladda (522), afar boqolkiiba loo aaneeyay AMISOM (181), iyadoo 12 boqolkiiba loo aaneeyay kooxo aan heybtooda la garan.⁶ Waxaa intaas sii dheer, 729 oo

5 11 Maajo 2017 Heshiiska Nabadgalyada, faqradda. 10.

6 Qeybta aan go'aanka laga gaarin ciida ay yihiin waxaa ka mid kuwa dhib geystay balse aan aqoonsan, iyadoo qaar kalena la aqoonsaday laakiin ay ka kala tirsanyihiin Ciidamada Difaaca Kenya iyo Liyu Booliska Itoobiya oo iyagu ka mas'uul ah tiro yar oo xadgudbyo ah marka loo eego xadgudubyada kale.

dad rayid ah ayaa afduubyo ay u geysteen Al Shabaab, iyadoo sida la sheegay 403 oo dadkaas ka mid ahaa lasii daayay.

KUWA GEYSTAY KHASAARAH RAYIDKA (DHIMASHO IYO DHAAWAC) INTII U DHAXEYSAY JANAAYO 2016 ILAA 14 OCTOBER 2017



- Sida ay dhigayso xog-ururinta ay Samaysay UNMAS⁷ oo ku ekayd illaa iyo dhammaadkii bishii September 2017, dadka rayidka ah ee ay waxyeellooyinka kasoo gaadheen Walxaha Qarxa waxay ahaayeen 54 boqolkiiba kuwaasi oo ay wadartooda guud noqonayso 2,298 qof (748 dhimasho ah iyo 1,550 dhaawac ah)
- Ku dhawaad kala bar khasaaraha gaaray dadka rayidka ah ayaa loo aaneeyay weeraro dhinacyo badan iyo adeegsiga Gawaari Laga soo Buuxiyay Walxaha Qarxa (49 boqolkiiba), weerar ismiidaamin ah oo la adeegsaday Gawaari Lagasoo Buuxiyay Walxaha Qarxa, Qof Is-miidaamiye ah (25 boqolkiiba), iyo noocyada kale ee Walxaha Qarxa (26 boqolkiiba)⁸. Ka hor weerarkii ka dhacay Muqdisho 14kii Oktoobar 2017, tirada ugu badan ee khasaaraha dadka rayidka ah ayaa dhacay intii lagu jiray bishii Ramadaan ee ku beegneyd bishii Juun 2016 markaas oo ay socdeen hawlaha loogu diyaar garoobayay doorashooyinkii Janaayo 2017, waxayna khasaarooyinkaas badankood ka dheceen Banaadir, Baay iyo Shabeelaha Hoose.⁹

B. Xadgudbyada ka dhanka Xuquuqda Aadamaha ee loo tirinayo Laamaha Dawladda ama Kooxaha Gacansaarka la leh

- Ciidamada Amniga Qaranka iyo kuwa Caalamiga ah
- Ciidamada dowlada ayaa loo aaneynayaa inay geysteen khasaaraha soo gaaray dadka rayidka ah oo dhan 522 (234 dhimasho ah iyo 288 dhaawac ah) , taas oo u dhiganta 11.6 boqolkiiba khasaaraha ay diiwaan gelisay Kooxda Badbaadinta Xuquuqul Insaanka ee UNSOM. Qaybaha Dowladda waxay ka koobnaayeen Ciidanka Xooga Dalka, Booliska Soomaaliyeed, ciidamada amaanka ee Dowlad

7 UNMAS, 2017. Ugu dambeyntii waxaa la booqday 26 Oktoobar 2017, <http://www.mineaction.org/programmes/somalia>.

8 Qarax kaliya oo ka dhashay Walxaha Qarxa ee Macmalka ah iyadoo la isticmaalyo dhowr hab oo sida loo dhigo ah (dhinaca wadada, wadada dhexdeeda, qarsoodi, meel sareeysa, iwm)

9 Weerarkii Octoobar 14keedii 2017 wuxuu si aada kor ugu qaaday tirada khasaaraha rayidka soo gaaray ee loo aaneeyay Al Shabaab.

Goboleedyada (inta badan Puntland iyo Jubbaland), iyo weliba sidoo kale ciidanka nabadsugidda qaranka iyo hay'adaha amniga.

2. Ciidanka Xoogga Dalka ee Soomaaliya

8. Ciidanka Xoogga Dalka wuxuu hoosyimaadaa Wasaarada Gaashaandhiga, wuxuuna ku xaddidanyahay joogitaankoodu Galmudug, HirShabelle iyo Maamulka kumeelgaadhka ah ee Dawlad Goboleedka Koonfur Galbeed (ISWA), Jubbaland, iyo Banaadir¹⁰. Somaliland waxay iskeed u leedahay ciidan nabadgelyo iyo boolis, halka ay qaar kamid ciidamada amniga ee Puntland ay ku socdaan tubtii ay ugu biiri lahaayeen CXD. Kiisaska qaar ee ay hubisay UNSOM ee ku saabsan eedeymo ka-dhan ah CXD ayaa adkaa maadaama aan si joogto ah loo adeegsanaynin lebiska isku-joogga ah ee ciidamada ama aanay jirin wax lagu garan karay¹¹.
9. Ciidamada Xooga Dalka Somaliyaxay ku lug lahaayeen 65 dhacdooyin keenay 145 khasaarayaal rayid oo iskugu jira 85 dhimasho ah iyo 60 qof oo ay soo gaadheen dhaawacyo. Warbixinadda ku saabsan Kufsiga ee lagu eedaynayo Ciidamada Xooga Dalka Soomaaliya ayaa si aada hoos ugu dhacday, waxay ka soo dhaceen 17 kiis oo la sheegay in ay dhaceen sannadkii 2015-kii, iyadoo xili warbixineedkan la soo wariyay sedex kaliya. Waxaana hoos u dhacaasi kufsiga loo tirinayaa inay noqon karto, xog-yaraan, iyo dhimista lagu sameeyay ciidamadii Xooga Dalka ee joogay Bay iyo Bakool (ISWA), oo lagu baddalay ciidamo nabadgalyo oo u dhashay Maamul goboleedkaasi.
10. Dhacdooyinka loo tirinayo CXD ayaa intooda badan ka dhacay Mogadisho (34.1 boqolkiiba), waxaana wadartoodu tahay 51 khasaare oo soo gaaray dad rayid ah, Shabeellaha Hoose (25.6 boqolkiiba), waana 37 khasaare¹². Afartan-iyo-labo khasaare ah waxaa lala xiriirinayaa jid-gooyooyin sharci darro ah iyo lacago baad ah, 25 waxaa lala xiriirinayaa rasaas aan loo aaba yeelin, sidoo kale, 26 ka dhashay iska-hor-imaadyo CXD dhexdooda ah, ama u dhexeeyay CXD iyo ciidamada kale ee amniga, sida nabadsugidda. Sagaal qofood oo rayid ah ayaa la dilay markii ay socdeen hawl-gallo amni oo la sameeyay iyadoo laga shakiyay inay ka tirsan yihiin Al Shabaab, waxaana sideed khasaarooyin ah lala xiriiriyay CXD oo ka qayb qaatay weeraro aargoosi beeled ah. Toban khasaarooyin ah oo loo aaneeyay CXD ayaa ku dhacay xaalado aan kala caddeyn.
11. 65 dhacdo oo ay ku lug lahaayeen CXD, ayaa 13 kamid ah eedeysanayaashii falalkaasi geystay waxaa soo xiray madaxda CXD, halka 52 dhacdo ee kale (oo noqonaya 80 boqolkiiba kiisaskaasi) eedeysanayaashii geystay aan lasoo qaban ama la sheegay inay baxsadeen. UNSOM way u suurto gali wayday inay xaqiijiso in dhamaan kiisaskaasi loo gudbiyay Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida, oo iyadu awood u leh maxkamadaynta xubnaha CXD ah. Kiisaska la ogyahay ee loo gudbiyay Maxkamadda Ciidamada ayaanan ciqaabtooda si joogto ah loo fulin, iyadoo kiisaku isku wada mid

10 Ciidama Xooga ee Somaliya waxay joogaan caasimadda, Muqdisho, iyo siddeed gobol oo ku yaalla Soomaaliya (Shabeelada Hoose, Baay, Bakool, Gedo, Jubbada Hoose, Hiiraan iyo Shabeelada dhexe). Waxa kale oo ay leedahay joogetaan xadidan magaalada Adaado, caasimadda ku meel gaarka ah ee maamulka Galmudug.

11 Shakhsiyaadka ayaa si joogta ah u xiran dharka SNA (gaar ahaan midabka iyo qaababka iyo calanka Soomaaliyeed ee garabka bidix) iyada oo aan ka tirsanayn Ciidanka Xooga Dalka Somalia, sidoo kale askarta CXD had iyo jeer ma xirtaan dirayska loogu talo galay CXD.

12 Tirada dhacdooyinka ee gobol kasta: Muqdisho waxaa ka dhacday 20 dhacdo (gobolka Banaadir) waxaana ka dhashay 29 dhimasho ah iyo 22 dhaawac ah; 19 dhacdana Shabeellaha Hoose, 30 dhimasho ah iyo 7 dhaawac ah; sideed dhacdana Bakool, sagaal dhimasho ah iyo labo dhaawac ah; lix dhacdo HirShabelle, todobo dhimasho ah iyo afar dhaawac ah; shan Hiiraan, shan dhimasho ah; afar dhacdana gobolka Bay, saddex dhimasho ah iyo afar dhaawac ah, labo dhacdana Gedo, labo dhimasho ah iyo saddex dhaawac ah; hal dhacdo oo waxaa jirtay iyaduna ka dhacday Jubbada Hoose ayaa sababtay dhimashada hal qof.

ka ahaayeen xadgudubyada la geystay oo lagu muteysanayay xukuno u dhaxeeya bixinta lacag magdhow ah oo la siiyo qoysaska ilaa ciqaab dil ah.¹³

12. Dagaallo dhexmaray ciidamada amaanka ee dawladda ayaa iyaguna geystay tiro badan oo dhimasho iyo dhaawac iskugu jira, iyo sidoo kale xadgudubyo ka dhan ah xuquuqul insaanka. Dhacdadii ugu weyneyd waxay dhacday bishii Oktoobar 2016, halkaasi oo 25 qofood ay ku dhinteen, 63 kalena ay ku dhaawacmeen dagaalladii Gaalkacyo ku dhexmaray ciidamada Puntland iyo Galmudug, dagaalladaas oo uga sii daray colaad beeleeedyadii horay u jiray, waxaana ku barakacay 180,000 oo qofood. Labada ciidan ayaa sidoo kale mas'uul ka ahaa iska-hor-imaadyo toos ah oo la isku adeegsaday hoobiyeyaal, kana dhacay goobo dadku aad ugu badanyahay iyo meelo dad ay degganyihiin intii uu socday dagaalka.

3. Booliska Somaaliyeed¹⁴

13. Qaab-samayska Amniga Qaran, ee lagu caddeeyay Heshiiskii Amniga (Security Pact) ee 11-kii May, 2017, ayaa lagu qorsheeyay tiro 32,000 oo boolis ah oo hoos imaanaya nidaamka federaalka ah ee arrimaha booliska.¹⁵ Waxaa la rajeynayaa in la asaaso ciidan boolis oo "isku-dhafan" oo ay ku jiraan kuwa hadda qabta hawlaha joogtada ah ee "booliska" iyo kuwa qabta hawlaha ciidanka Daraawiishta (hawlaha waaweyn ee ciidanka booliska ah ee u tababaran sida militariga oo kale) waxaana la hoos-geynayaa nidaam boolis oo ka kooban labo lakab oo is-dul saaran. Dowladdu waxay hadda ka baaraan-degeysaa habkii ciidanka hadda qabta hawlaha booliska loogu biirin lahaa nidaamka cusub ee booliska federaalka ah.
14. Dawlad Goboleed kasta waxay mas'uul ka tahay booliskeeda dowlad goboleed. Ciidanka Booliska Soomaaliyeedna (SPF) wuxuu leeyahay shaqaale/ciidan la geynayo dhamaan Dowlad Goboleedyada iyo Banaadir waxaana saraakiishaas ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ay hoos imaanayaan Wasaaradda Amniga Gudaha ee Dowladda Federaalka. Booliska Somaliland waxay hoos tegayaan Dowladda Somaliland. Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxay ku suganyihiin Banaadir¹⁶, Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed¹⁷, HirShabelle,¹⁸ magaalooyinka Cadaado iyo qaybta koonfureed

13 4tii Agoosto 2016, Maxkamadda millatariga ee Ciidamada Qalabka Sida ayaa ku xukuntay hal xubin oo ka tirsan CXD dil ka dib markuu dilay qof rayid ah oo ku nool gobolka Hiiraan. Kiis kalena, , 4tii Agoosto 2016, maxkamad millatari oo ku taal magaalada Beledweyne, ayaa ku amartay laba askari oo CXD ah in ay bixiyaan magdhow, oo loo yaqaan diya, (50 geel ah midkiiba), oo la siinaayo qoyskii ninka rayid ah ay ka dileen labada askari. 19kii Juun 2017, Maxkamadda millatariga ee Muqdisho waxay ku xukuntay askari CXD ah dil sababtoo ah inuu dilay shaqaale dawladeed 3dii May 2017.

14 Ereyga Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed waxaa lagu isticmaalay heshiisyada siyaasadeed ee 2016/2017 oo ku saabsan Habka Cusub ee Booliska, oo la dabaqay Juun 2016, kaas oo dejiyey qaabka loogu talagalay horumarinta nidaam boolis oo laba-heer dhexdhexaad ah. Booliska Soomaaliyeed hadda waa hay'ad bixisa adeegyo boolis ah oo ku yaalla Banaadir, halka tiro yar oo ka mid ah shaqaalahooda loo diro dawaldaha xubinah ka ah federaalka Somalia . Ereyga "Ciidanka Booliska Soomaaliyeed" ayaa sidoo kale loo adeegsadey macnaha ereyadan, ujeedooyinka ururada booliska ee rasmiga ah ee ka shaqeeya Soomaaliya, waxaana ka mid ah Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Booliska Puntland, iyo hay'adaha dawladeed ee cusub sida BooliskaJubbaland, Booliska Koonfur Galbeed, Booliska Hirshabelle iyo BooliskaGalmudug. Booliska Soomaaliyeed sidoo kale waxaa ka mid ah hay'adaha booliiska ee la filayo in ay qabtaan mas'uuliyadaha booliska ee rasmiga ah ee ka shaqeeya Soomaaliya sida Daraawiishta (Ciidamada Amniga ama Ciidamada Nabadgelyada ee hawlaha booliska ee ku sugan maamul goboleedyada, oo ay ku jiraan maleeshiyo ay aqoonsan yihiin maamul goboleedyada).

15 3dii Disambar 2017, Gollaha Amniga Qaranka ayaa siku raacay in 32,000 ee ciidamada booliska loo kala qoondeeyo sida soo socota: 4,571 ayuu yeelanayaa Maamul Goboleed kasta, 9145 waxay noqonayaan Boolis Federal ah oo ka dhex shaqeeya iyo Maamulka Gobolka Banadir

16 SP wuxuu 17ka degmo ee Muqdisho ku leeyahay saldhigyo boolis oo shaqeeya, inkasta oo aanay ka sinnayn xagga qalabka

17 Maamulka Koonfur Galbeed waxaa ka dhex shaqeeyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyagoo si dhow ula shaqeeyo hay'adaha dhowaan la asaasay sida Booliska sida Gaarka ah u Tababaran ee Koonfur Galbeed (SWSPF) oo markii hore loo yaqaanay (Daraawiish) iyo Booliska Koonfur Galbeed (SWSP). Ciidanka Daraawiishta waxaa loo bedelay (SWSPF) kadib markii lasoo saaray Wareegto Madaxweyne oo soo baxday 29 Maarso 2016. Boolisku wuxuu inta badan ku kobanyahay Baydhaba halkaas oo door muhiim ah ay ka cayaaraan la-dagaallanka Al Shabaab iyo fulinta hawlgallo amni.

18 Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxay joogaan Maamulka HirShabelle oo ay ku sugan yihiin saldhigyada booliska ee Jowhar iyo Beledweyne

ee Gaalkacyo ee dhanka Dowlad Goboleedka Galmudug. Magaalada Dhuusamareeb, magaalo madaxda Galmudug, waxaa maamulayay Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ) tan iyo sanadkii 2009, waxayna bedel u ahaayeen maamul qaran ama mid Dowlad Goboleed. Tiro yar oo ka tirsan Ciidanka Bilayska Soomaaliyeed ayaa jooga Magaalooyinka Kismaayo iyo Dhoobley ee ka tirsan Jubbaland¹⁹, waxaa sidoo kale ay joogaan Dugsiga Tababarka Booliska ee Carmo ee ku yaal Puntland. Iyadoo Ilaalinta sharciya iyo kala dambaynta ay tahay shaqada asaasiga ah ee booliska, waxa hawlagallada lagu soo qab-qabanayo argagixisada, Al Shabaab iyo falal dembiyeedyada kale fuliya NISA ama dhiggooga heer gobol ee ka hawlgala Jubbaland iyo Puntland.

15. Khasaaraha rayidka ee loo aaneeyay Ciidamada Boolisku waxay ka ahaayeen boqolkiiba 20 guud ahaa khasaaraha rayidka ee loo aaneeyay guud ahaan ciidamada amniga ee Somaliya. UNSOM waxay diiwaangalisay 38 dhibane, oo 17 kamid ahi dhinteen, halka ay 21 kalana dhaawacyo soo gaadheen, loona aaneeyay Ciidanka Booliska. Dhacdooyinkaas badankood waxay la xiriireen isku dhacyo hubeysan oo dhex maray Booliska Soomaaliyeed iyo ciidamo kale ee amni, gaar ahaan CXD, waxayna isku-dhacyadaasi ka dheceen Muqdisho, Shabeellaha Hoose, HirShabelle iyo Dowlad Goboleedka Jubbaland.

“ 24-kii Luulyo 2017, afar rag ah oo rayid ah oo lagu eedeeyay inay xidhiidh la lahaayeen Al Shabaab ayaa lagala baxay saldhigga booliska ee Beled Xaawo waxaana toogtay ciidamada Daraawiishta. Mid kamida dhibanayaashaasi wuxuu ahaa qof Soomaaliyeed oo kasoo noqday Itoobiya, wuxuuna xidhnaa todoba bilood, isagoon wax dacwad ah lagu soo oogin; laba kale oo kamid ahaa dhibanayaashaasi waxa lasoo xidhay bishii Maarso 2017, halka qofka afaraadna lasoo xidhay 23-kii Luulyo 2017. Lamana xaqiijin wax xidhiidh ah oo dhibanayaashaasi kala dhexeeyay ururka Alshabaab, waxaana 25-kii Luulyo, Wasiirka Amniga ee Jubbaland uu warbaahinta u sheegay in “mabda’ ahaan” dilalka ay geysteen ay ahayd inay soo maraan maxkamad sharci oo dembiga soo caddeysa. 4-tii Agosto, Maxkamadda Darajada Koowaad ee Ciidamada ee Jubbaland, waxay amartay saddexdii saraakiil ee ka mas’uulka ahaa dilka dadkaasi inay bixiyaan magta dhiigga ee loo yaqaan Diyo, una dhiganta 100 geel ah oo la siiyo qoysaska labo kamid ah dhibanayaasha. Saraakiishaasi waa lasii daayay kadib markii ay ballan qaadeen inay Diyada bixinayaan. ”

16. UNSOM waxay diiwaan gelisay isku-dhacyo dhex maray Booliska Soomaaliyeed iyo ciidamo kale oo amniga qabilsan waxaana ka dhashay [khasaaraha] 23 dhibbane (10 dhimasho ah iyo 13 dhaawac ah), oo shan ka mid ah ay isku-dhac la galeen CXD iyadoo hal qof oo kamid ahna ay isku-dhac la galeen NISA²⁰. Ma jiraan wax baadhitaano ah oo dhacdooyinkaas lagu sameeyay iyo cid loosoo qabtay toona. Todoba kale ayuu iyaguna khasaare kusoo gaadhay markii ay boolisku fureen rasaas

19 Booliska Gobolka ee Jubbaland waxay ka kooban yihiin 600 saraakiil bilays oo tababaran , oo ay ku jiraan 61 haween ah. Tababarka askarinta bilayska waxaa bixiyeey booliska AMISOM inta u dhaxaysa Febraayo 2016 iyo Abriil 2017.

20 Laba ka mid ah kiisaska, isku dhac hubeysan ayaa yimid markey CXD is ku dayeen in ay xoog ku marayaa bar kontorool oo booliska ay ilaalinayeen oo ku kala yaal Muqdisho iyo Jowhar (Shabeellaha Dhexe). Labada dhacdooyin ee kale ayaa ka dhacay degmada Hodan ee magaalada Muqdisho, waxaana ku jira dhacdo ay booliisku isku dayayeen in ay ka saaraan dad dhul qabsaday, halka mid kale oo ka mid ah dhacdooyinkan uu ka dhacay suuqa qaadka. Isku dhaca dhexmaray booliska iyo NISA waxaa uu ku lahaa ilaalda hogaamiye maxali ah oo iyaga ka barbar dagaalamaayey magaalada Jowhar, Shabeellaha Dhexe.

aan loo meel dayin iyagoo kala ceyrinaya dad ku kala sugnaa Muqdisho iyo Jowhar (Shabeellaha Dhexe), waxaana sidoo kale hal qof ay boolisku ku dileen Beled Xaawo, oo ka tirsan gobolka Gedo²¹.

17. Xadgudubyada kale ee ka dhanka ah Xuquuqda Aadamaha ee loo aanaynayo Booliska Somaaliyeed (SP) waxaa kamid ah xadhiga iyo xabsi-ku-haynta sharci-darro ah. UNSOM waxay diiwaan-galisay 5,821 kiis oo boolisku ku guuldarraysteen inay u maraan hab sharciya markii ay fulinayeen hawlgallo ay kusoo xidh-xidhayeen xabsigana ugu hayeen shakhsiyaad muddo ka badan 48 saacadood iyagoo aan wax dacwad ah lagusoo oogin. Taasi oo jabinaysa Dastuurka Federaalka ah Kumeelgaarka ah iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha ee la adeegsan karo. Laga soo bilaabo bishii Maarso 2016, waxaa Puntland kasoo if-baxay hawlgallo ballaadhan oo xarig iyo xabsi u taxaabid loogu geysanayo dad rayid ah oo u badan rag da'doodu ka sarreyso 15 sano waxayna oo lagasoo qabqabanayay barta kontarool ee koonfurta Puntland. Dadkaasi waxaa loosoo xiray xabsigana loogu hayay si sharci darro ah muddo dhowr maalmood ah ilaa dhowr bilood, sababtuna tahay tuhun looga qbo inay ka tirsanyihiin Al Shabaab.²² Boolisku si joogto ah ayuu ugu guul-darreystaa ka-hortagga xadgudubyada ka-dhanka ah xuquuqul insaanka ama inay iyagu gudahooga iskula xisaabtamaan markii ay ka gaabiyaan baadhista iyo sharci hor keenista kuwa faldambiyeedyadaasi loo tirinayo.

“ 7-dii Nofembar 2016, boolisku waxay rasaas nool u adeegsadeen sidii ay u kala ceyrin lahaayeen dad gadoodsan oo isku-dhacay oo taageerayaal u ahaa tartan kubadda cagta ah oo ka dhacay garoonka ciyaaraha Hargeisa ee Somaliland, waxaana ku dhaawacmay 17 qof oo rayid ah. Inkasta oo ay ururadda bulshada rayidka ah, iyo xisbiyada mucaaradka ahi ay soo jeediyeen in lagu sameeyo baadhitaan madaxbannaan qaabka ay boolisku u xakameeyeen rabshadahaasi, haddana ma jirto wax tallaabo ah oo arrintaasi laga qaaday ilaa iyo [hadda oo la joogo] Nofembar 2017.”²³

”

4. Hay'adaha Sirdoonka iyo Amniga

18. Saddex hay'adood oo Sirdoon ayaa si rasmiya uga hawlgala Soomaaliya, kuwaasi oo ay kala duwantahay jaran-jarrooyinkooda maamul iyo awooddooduba, waxaanay hay'adahaasi kala yihiin: NISA, Ciidamada Amniga ee Puntland (PSF)²⁴ iyo Ciidamada Nabadsugidda iyo Sirdoonka Jubbaland (JISA).
19. NISA oo ka hawlgasha Gobollada Banaadir, Hirshabeelle, Galmudug, iyo Koonfur Galbeed, waxaa asaastay Dowladda Federaalka Soomaaliya bishii Janaayo 2013-kii, inkasta oo aan lagu asaasin xeer ama wareegto Madaxweyne, awoodaheeda iyo waajibaadkeeduna aanay si cad u qeexanayn²⁵.

21 8tii Abriil 2017, bilayska ayaa dilay qof rayid ah oo laga sii daayay saldhiga bilayska ee degmada Xaawo ee gobolka Gedo. Bilayska ayaa maxkamad madani ah ku xukuntay isla maalintaas oo aan la helin fursad ay ku codsadaan rafcaan, sida looga baahan yahay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

22 Waxaa lagu dhaqaaqay xarig iyo qab-qabasho saf-mareen ah intii lagu guda jiray hawl-gallada nabadgelyada, guri-guri ayaana loo baaray, dadkana waxaa lagu baaray baraha baaritaanada. Waxay beegsadeen dad looga shakiyay inay ka tirsanaayeen Al Shabaab, intooda bandanna waxay ahaayeen dhalinyaro rag ah oo kusii socday Puntland si ay shaqo u helaan ama ay dibadda u aadaan. Dadka ay xabsiga ku hayeen hay'adaha amniga ayaa badanaa loo diiday inay helaan qareeen u dooda ama ay xiriir la sameeyaan qoysaskooda. Waxana loo diiday xuquuqdaas ay lahaayeen ilaa laga soo daayay dhowr bilood kadib markii lagu waayay waxa cadeymo ah. Xeerka Ka-hortagga Argagixisada ee Puntland waxaa adeegsada booliska iyo ciidamada PSF si ay qiil ugu raadsadaan tacaddiyada ka dhanka ah nidaamka cadaalada ee u ogolaanayo muwaadinka in la horgeeyo maxkamadda 48 saacadood gudohood.

23 Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Somaliland ayaa beenisay in bilaysku mas'uul ka ahaa, isla markaana sababay dhacdada “kubbadda cagta,” eeg lifaaqa.

24 Puntland waxay isticmaashaa ergya “Adeegyada Sirdoonka Puntland (PIS)” iyo “Ciidamada Nabadgalyada ee Puntland (PSF)” oo isbarbar dhigaya marka ay tixraacayaan adeegyadooda sirdoonka.

25 NISA waxay bedeshay Hey'adda Adeegga Ammaanka Qaranka, kaas oo la baabi'iyey 1990-kii.

Sidaas oo ay tahay, NISA oo ah hay'ad amni, waxaa waajib ka saaranyahay oo awoodaheeda xakamaynaya Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah, kaasi oo sheegaya in kuwa u xilsaaan adeegyada amniga ay noqdaan kuwa lala xisaabtami karo, oo u hogaansamaya ku dhaqanka sharciga, isla markaana arrimahooda loo maaraynayo hannaan rayid ah²⁶. Si kastaba ha ahaatee, qaabka ay NISA wax u soo xir-xirto ama ay xabsiga ugu hayso dadka ayaa ah qaab si joogto ah iskaga dhega tiraya qodobadaas iyo qodobo kale oo uu damaanad-qaaday sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, oo ay ku jiraan xaqa qofku u leeyahay in uu helo qareen iyo in goyskiisu ay booqan karaan, iyo xaqa ah in si degdeg ah lagu horgeeyo hay'adaha garsoorka.²⁷ Waxaa walaac gaara ah in hogaamiyeyaal siyaasadeed, dad u ololeeya arrimaha bulshada, joornaalisteyaal iyo milkiileyaan xarumo warbaahin ay soo xirto NISA kadibna geliso xabsi iyadoo aan wax dembi ah lagusoo oogin, waxayna ku heysaa xarunta Godka Jilacow ee Muqdisho, halkaas oo sidoo kale lagu xiro dad lagu tuhunsanyahay inay xiriir la leeyihiin Al Shabaab, iyadoo si joogto ah loogu xadgudbo xaqii ay dadkaasi u lahaayeen marinta hab sharci, oo ay ku jiraan helitaanka kor-joogteynta garsoor ama helitaanka qareen matala.

20. Xilli warbixineedkan, UNSOM waxay diiwaan-gelisay 63 kiis, oo xadgudub xuquuqda aadnaha ah oo loo aanaynayo NISA. Xadgudubyadaasi ayaa iskugu jira, dilal bilaa garsoor ah, jidh-dil, xadhig iyo xabsi-ku-hayn aan sharciga loo marin, iyo iyadoo la xakameeyay xorriyadda aragti-cabbirista, iyo xorriyadda ururo-yeelashada iyo isku-imaanshaha (kulan-qabashada). Xadgudubyadaasi waxaa ka mid ah kuwo sababay khasaaroyin (toddo dhimasho ah iyo saddex dhaawac ah), waxaana intooda badan lala xiriiriyay khilaaf iyo dhacdooyin loo adeegsaday awood xad-dhaaf ah iyo rasaas aan loo aaba yeelin oo lagu furay goobo dadweyne. Waxaa lasoo xiray oo kaliya hal qof oo loo aaneeyay fal dembiyeeyada.
21. Xilli warbixineedka, UNSOM waxay diiwaan-galisay xarig iyo xabsi-ku-hayn sharci darro ah oo NISA kula kacday 53 rag ah oo rayid ah iyo 11 joornaalistic oo midi tahay gabar lagu tuhmay inay tahay Al Shabaab. Dhamaantood waa lasoo xidhay ama xabsi ayaa lagu hayay iyadoo aanay jirin ogolaansho maxkamadeed oo laga haysto maxkamad awood u leh. NISA si joogto ah ayay waqti dheer u heysaa maxaabiista, iyadoo mararka qaar aan marsiin waddo sharci ah, mararka qaarna ku wareejisa maxkamad ciidan oo ku dhex-taal dhismayaasha NISA, taas oo aan saamaxaynin in la helo kor-joogtayn madaxbanaa. Sidaas darteed, wariyaha lagusoo eedeeyay xiriir la yeelashada Al Shabaab ayaa muddo 15 bilood ah ku jiray xabsiga NISA iyadoo aan wax dacwad ah lagusoo oogin. Waxaa jira labo kiis oo UNSOM ay heshay [warbixin] eedeyn oo ku saabsan jir-dil oo dhacday intii ay socdeen su'aalo weydiinta. Qiraalka khasabka ah ee lagu khasbay maxaabiista ayaa loo adeegsaday inay yihiin caddeymaha ugu muhiimsan ee maxkamaddu adeegsatay, taas oo xadgudub ku ah sharciga caalamiga ah ee mamnuucaya adeegsiga caddeymo lagu keenay jir-dil.
22. Waxa jira saddex kiis oo NISA ay kusoo bandhigtay afar rag ah oo la-tuhunsanayaal ah ayna kusoo bandhigtay telefishinka qaranka iyadoo ku tilmaantay inay yihiin Al Shabaab. Markaa kadib waxaa lagu soo oogay dambi, dil ayaa lagu xukumay waana la toogtay. Saddex kamid ah lixda xarumo warbaahineed ee lagu xiray Muqdisho sanadkii 2016, ayaa saddex kamid ah waxaa albaabada u

26 Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, Qodobka. 126 (1). Heshiiska Nabadgelyada ee 2017 ayaa qiray in adeegga sirdoonku uu ka mid yahay Qorshaha Qaranka ee Nabadgelyada Qaranka laakiin wax faahfaahin ah lama bixin.

27 Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga ah iyo tan Siyaasadeed, Qodobadiisa 9aad iyo 14aad iyo Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka, Qodobkiisa 35 (6)

laabay NISA iyadoo aan heysanin amar maxkamadeed, NISA ayaa waxay taas qiil uga dhigtay inay muhiim ahayd sababo la xiriira amniga qaranka.

23. Ciidamada Amniga ee Puntland ee loo yaqaan Adeegga Sirdoonka ee Puntland, ayaa u hawl-gala sida waax la-dagaallanta argagixisada.²⁸ Waxay ka koobanyihiin 500 illaa 600 askari oo la fahamsanyahay in Mareykanku tababaro, waxaana waajibkooda kamid ah hawlaha la-dagaallanka argagixisada (inta badan xog-ururin, iyo hawlgallo ciidam). Ciidamada Amniga ee Puntland waxay fulinta hawlgalladooda u maraan Xeerka La-dagaallanka Argagixisada ee Puntland, kaas oo aan qeexayn qaab-dhismeedka hay'adeed ee Ciidamada Amniga ee Puntland ama hawlaha ay qaabilsanyihiin, waxaana taliyohoodu si toos ah warbixinnada u siiyaa Madaxweynaha Puntland. La-xisaabtanka Ciidamada Amniga ee Puntland waxaa caqabad ku sii noqonaya xaqiiqada jirta ee ah inay dembi-baarista kiisaskooda ay iyagu sameeyaan, oo ay fuliyaan hawl-gallo amni²⁹ oo ay dad kusoo qab-qabtaan, isla iyaguna ay maamulaan xabsiyada ku yaal Boosaaso iyadoo aanay jirin la-socod madax banana oo wax ku ool ah.
24. Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Jubbaland (JISA) waxay qayb ka tahay ciidamada amniga ee lagu dhisay Dastuurka³⁰ Jubbaland, inkasta oo waajibaadkooda iyo hawlaha ay u xilsaaranyihiin aanay qeexneyn³¹. JISA waxay hoos tagaan Wasaaradda Amniga ee Jubbaland. Marka uu meesha ka maqanyahay ciidan boolis ah oo shaqeynaya, ayay fuliyaan hawlaha fulinta sharciga laakiin waxay ku koobanyihiin degmada Kismaayo, gobolka Jubbada Hoose. Sida laamaha kale ee Dowladda, ayaa JISA waxay si weyn ugu xad-gudubtaa xuquuqul insaanka ee ay ka geysato magaalada Kismaayo gudeheeda.
25. Intii u dhaxaysay Janaayo 2016 illaa 14-kii Oktoobar 2017, UNSOM waxay diiwaan-galisay 12 qof oo rayid ah khasaare loo geystay, iyadoo falalkaasina loo aaneeyay JISA. Waxaana la dilay lix qof oo ka mid ahaa dadkaas oo kala ahaa (saddex haween ah, oo ay ku jirtay gabar lix sano jir ah iyo seddex rag ah), waxaana la dhaawacay lix qofood (oo kala ah labo haween ah iyo afar rag ah). Waxaa lagu warbixiyay in shan ka mid ahaa dhibanayaashaas ay u hogaansami waayeen amar lagu joojinayay, halka saddex kale loo dilay ama loo dhaawacay sababo la xiriira muran dhuleed oo ay qayb ka ahaayeen saraakiil ka tirsan JISA; labo waxaa qabsaday rasaastii la is weydaarsanayay ee u dhexeysay saraakiisha JISA; labana waxa loo adeegsaday awood dheeraad ah.³² Saraakiishii ka tirsanaa JISA ee falalkaasi loo aaneeyay inay ku keceen, ayaa loo soo xiray sideed dhacdo oo kamid ahaa dhacdooyinkaas, mid kamid ahna waxaa maxkamadda ciidamadu ay ku xukuntay dil toogasho ah waxaana la toogtay 20kii Janaayo 2017. Xilli warbixineedkan, waxay UNSOM xaqiijisay

28 Waxay xarun ku leeyihiin Boosaaso, Garoowe iyo Gaalkacayo.

29 PSF iyo ciddmaada Daraawiishta waxay fuliyeen hawlgalo wadajir ah oo ka dhana Al Shabaab, gaar ahaan Buuraha Galgala, 2016 iyo 2017.

30 Qodobka 91aad ee dastuurka Jubaland: Ciidamada ammaanka Jubaland waxaa ka mid ah Ciidanka Booliska ee maxabista, Ciidamada Sirdoonka, Ciidamada Daraawiishta, iyo ilallada Xeebta.

31 Qodobka 91aad (2) ee Dastuurka Jubbaland wuxuu u xilsaaray Golaha Jubbaland in ay sameeyaan "sharciga qaab dhismeedka iyo shaqada iyo waajibaadka Ciidamada Jubbaland". Sharcigan lama dhaqan gelin weli, kaalinta JISA weli wali lama yaqaan.

32 Mid ka mid ah ayaa waxaa ku dhacay xabad habow ah oo uu soo ridayn askari ka tirsan JISA si uu u baneeyo gawaarida oo isku xirmay wado magaalada Kismaayo, mid kalena waa la dhaawacay markii sarkaalka JISA ahi uu rasaas ku furay guriga dhibbanaha.

in ay jiraan 73 qof oo rayid ah oo ay soo qabteen ciidamada JISA , ayna ku jiraan la-tuhunsanayaal aan qaangaadh ahayn oo lagu tuhunsan yahay xiriir kala dhexeeyay Al Shabaab.

5. Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya

26. Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya³³ (AMISOM) waxa dhisay Golaha Amaanka iyo Nabadda ee Midowga Afrika bishii Janaayo 2017, waxayna ogolaansho lagu siiyay Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigisu yahay 1744 (2007).³⁴ Waxay ka koobanyihiin ciidamo ka kala socda dalalka Burundi, Djibouti, Itoobiya, Kenya iyo Uganda, iyo ciidamo boolis ah oo iyaguna ka kala socda Ghana, Kenya, Nigeria, Sierra Leone iyo Uganda.³⁵
27. Waxa kale oo jira ciidamo Itoobiyaan iyo kuwo Kenyan ah oo aan hoos iman Taliska Guud ee AMISOM, kuwaas oo goonidooda uga hawlgala Soomaaliya. Caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan in la diiwaan geliyo lana ogaado cidda iska leh eedda xadgudubyada ay geystaan AMISOM ayaa ah inay adagtahay in la kala aqoonsado ciidamada ka-tirsan AMISOM iyo kuwa aan ka tirsanayn, marka ciidan ka wada socda hal dal, haddana ka amar qaadanayo labo talis oo kala duwan. Inta badan, ciidamo ka tirsan AMISOM iyo kuwo aan ka tirsanayn ayaa wada deggan hal xero, waxayna fuliyaan hawlgallo ciidan oo wadajir ah³⁶.
28. Laga soo bilaabo Janaayo 2016 ilaa October 2017, 178 khasaare oo soo gaaray dad rayidka ah³⁷ (95 dhimasho ah iyo 83 dhaawac ah) ayaa loo aaneeyay AMISOM.³⁸ Guutada Uganda, oo ah guutada ugu ballaaran ciidamada AMISOM una dhiganta 28 boqolkiiba tirada guud ee ciidamada, ayaa sida la sheegay waxay mas'uul ka ahaayeen 34.81 boqolkiiba khasaaraha (38 dhimasho ah iyo 25 dhaawac ah), waxaa ku soo xiga guutada Itoobiyaanka (25 dhimasho ah iyo 15 dhaawac ah, labo kufsi ah, iyo mid isku-day kufsi ah), guutada Burundi (14 dhimasho ah iyo 11 dhaawac ah), guutada Kenya (afar dhimasho ah iyo shan dhaawac ah) iyo guutada Djibouti (hal dhimasho ah iyo 10 dhaawac ah). Soddon kiis oo kale oo khasaare ah ayaa loo tiiriyay AMISOM iyadoo aan la garan guuto si gaar ah mas'uul uga ahayd (23 dhimasho ah iyo 17 dhaawac ah) khasaaraha soo gaaray dadka rayidka ah wuxuu inta badan ka dhashay rasaas aan loo meel dayin oo ay furaan ciidamada AMISOM marka kolonyadooda lagu weeraro Walxaha Qarxa, miinooyinka dhulka lagu aaso ama bamboo gacmeedyo. Xadgudubyada kale waxaa kamid ah dilal aan sharciiga waafaqsanayn, hab-dhaqan aan wanaagsanayn oo lala kulmo inta xabsiga lagu jiro, iyo xadgudub jinsi. Labo kiis oo kufsi wadareed ah, hal kiis oo isku-day kufsi ah, iyo lix kiis oo garaacis daran ah ayaa loo aaneeyay ciidamada Itoobiya ee ka tirsan AMISOM, waxaa kale oo jira shan kiis oo si xun ula dhaqan ah, oo

33 AMISOM waxay beddeshay Howlgalka Taagerada Nabada Soomaaliya ee urur goboleedka IGAD (Nofeembar 2004-Maarso 2006), kaasoo waajibkiisu ahaa inay hubiyaan in kuwa ku lahaa wadahadalada nabada ay helaan dhaqdhaqaaq xor ah iyo mariin (jid) nabad ah, ilaalinta iyo ilaalinta ammaanka Baydhabo, ilaaliyaan xubnaha Dawladda Federaalka Ku-meel-gaarka ah (TFG) iyo kaabayaasha, iyo inay tababaraan hay'adaha dawladda ku meel gaarka ah si ay u bixiyaan amniga ayna awood ugu yeeshaan dib-u-dhiska ciidamada ammaanka qaranka.

34 Go'aanka Golaha Amniga S / RES / 1744, taariikhda 21-Febrayo 2007.

35 Sanadkii 2017, Ciidamada AMISOM ee tiradoodu dhan tahay 21,435 (Ciidamada Difaaca Dadka Ugandha 6,022, Ciidamada Difaaca Qaranka Burundi 5,073, Ciidamada Difaaca Kenya 4,046, Ciidanka Difaaca ee Itoobiya 4,323, Ciidamada Difaaca Qaranka ee Jabuuti 1,872 iyo FHQ 119), tirada ciidan ee mandaatada heysta waa 22,126, sida uu dhigayo Xeerka Golaha Ammaanka 2232 (2015) iyo 2297 (2016). Qaraarka Golaha Ammaanka ee 2372 (30 August 2017) wuxuu soo jeedinayaa hoos u dhac ku yimaada shaqaalaha AMISOM ee askarta ah ugu yaraan 21,626 ilaa 31 Disember 2017, si loogu daro ugu yaraan 1040 askari oo bilays ah oo leh shan unug oo booliis qaabaysan. Hoos-u-dhac dheeraad ah oo ku yimaada askarta AMISOM ilaa 20,626 ilaa 31 Oktoobar 2018 ayaa sidoo kale la filayaa.

36 Qaybta 2aad ee Ciidamada Difaaca Kenya, iyo qaybaha 3 iyo 4 ee Ciidamada Difaaca Itoobiya.

37 Tiradani kuma jiraan sadexda kiis ee xadgudubka galmada ee loo aaneeyay Ciidamada AMISOM ee Ethiopia intii lagu jiray warbixinta. Laba ka mid ah kiisaskaas waxaa lagu qoray "baaritaan aan dhammeystirneen" warbixinta Xoghayaha Guud ee 2017 ee ku saabsan tallaabooyinka khaaska ah ee looga hortagayo galmada dhiig-miirashada ah iyo xadgudubka: hab cusub, A / 71/818, bogagga 63-64 (2017)

38 Dacwad ka dhan ah ciidamada AMISOM waxaa si joogta ah loogu wargeliyaa AMISOM oo ay soo saartey Qaramada Midoobay.

uu ku jiro hal dhimasho ah oo ka dhacday xabsiga dhexdiisa ayaa loo aaneeyay ciidamada Djibouti ee ka tirsan AMISOM.

“*Dhacdada qudha ee ay khasaaraha ugu badan geysteen Ciidamada AMISOM waxay ahayd 17-kii Luulyo 2016, markaa oo sida lasoo sheegay AMISOM ay 14 qof ku dileen, saddex kalana ku dhaawaceen guri dhexdiis, gurigaas oo ku yaal magaalada Wardiinle ee gobolka Bay. War Saxaafadeed ku taariikheysan 19kii Luulyo 2016, ayaa AMISOM ku qirtay dhacdada, waxayna soo gudbisay natiijo hordhac ah oo ku saabsan baaritaanadeeda,³⁹ waxayna ballan-qaaday inay baaritaano dheeraad ah ku samayn doonto. Baaritaano ay samaysay UNSOM ayay ku ogaatay in dhibbanayaashu ahaayeen dad rayid ah oo meel iskugu tegay si ay ugu duceeyaan qof rag ah oo xanuunsanaa, mana jirin wax dagaallo ah oo ka dhacay meeshaas ka-hor musiibada lagu laayay dadkaas.⁴⁰ AMISOM waxay si dhab ah arrinka ugu saartay guddi baaritaan, kaas oo diiday in ciidamadoodu ay ku lug lahaayeen dhacdadaas, waxayna sheegeen in khasaaruhu ka dhashay rasaas ay is-weydaarsadeen Ciidamada Difaaca Qaranka Itoobiya ee aan ka tirsanayn AMISOM (ENDF) iyo Al Shabaab. Joogitaan ciidamo ENDF ka socda oo aan ka tirsanayn AMISOM ee markaasi ku sugnaa goobta falku ka dhacay ayaa ah hadal mugdi sii gelinaya warbixinta uu soo saaray guddiga waxaana adkaanaysa in la xaqiijiyo cidda iska leh mas’uuliyadda. Iyadoo Guddiga AMISOM u saartay arrinta uu soo saaray warbixintiisa, ayay haddane adagtahay in meesha laga saaro in ciidamada AMISOM aanay ku lug lahayn kiiska Wardiinle.*”

Hababka ay AMISOM ay u ga Hortagto ugana Jawaabto (Khasaaraha Rayidka)

29. Golaha Ammaanku wuxuu soo saaray Qaraar, 2010(2011), uu markii ugu horraysay ku sheegay waajibaadka AMISOM ka saaran inay ka hortagto khasaaraha soo gaadha dadka rayidka ah isla markaana la aasaaso Unugga Ka-dabatagga, Falanqaynta iyo Ka-jawaabista Khasaaraha Rayidka ah (CCTARC) si loo diiwaan-geliyo loona falanqeeyo xogta lagasoo ururiyo khasaaraha soo gaara dadka rayidka ah iyo hantidooda. Qaraaro kale oo kaasi dabasocday ayaa AMISOM ku dhiiri-geliyay inay xaqiijiso hawl-gelinta Unugga CCTARC oo taageero ka helaya beesha caalamka.⁴¹
30. Unugga (CCTARC) waxaa la asaasay 2015kii, waana la hawlgaliyay, walow ay jiraan caqabado xagga tayada ah, gaar ahaan shaqaale yaraan⁴². Shaqada ugu muhiimsan ee Unuggani u xilsaaranyahay waa lafagurista xogaha lasoo ururiyo ee ku saabsan khasaarayaasha soo gaadha dadka rayidka ah iyo inuu ka caawiyo AMISOM hababka ay u qorsheeyaan, ugana go’aan gaadhaan hawlgalladooda. Lafoguristaasi [ama falanqayntaasi] waxaa kasoo baxaya talooyin iyo tabo lagu yaraynayo khasaaraha madaniga ah, tusaale ahaan, in laxaadka hubka la adeegsanayo iyo waxa la bartilmaameedsanayo ay isu dhigmaan. Inkasta oo UNSOM lagu war-geliyay inay jiraan falanqayn uu diyaariyay unugga CCTARC, haddana ma cadda illaa heerka ay gaarsiisantahay saamayn unuggani ku leeyahay tabaha

39 War saxaafadeedkey AMISOM soo saareen 19kii July ee 2016-ka, AMISOM waxay tiri: “Baaritaan hordhac ah ayaa muujinaya in ciidamada AMISOM ay heleen macluumaad sirtoon oo lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan jiritaanka howlo xagjireyn oo Al-Shabaab ay ka waday tuulada isla markaana ay ciidamada AMISOM u socdeen inay soo baaraan. Ciidamada ayaa lagu soo qaaday weerar gaadmo ah markii ay u soo dhawaadeen tuulada dagaal culus ayaana dhacay. Dagaalyahannada argagixisada ayaa laga awood badiyay kana baxsaday goobta, ka dib markii uu khasaare soo gaaray. Hadda aan joogno ma cadda in dagaalkii dhacay uu dhaliyay khasaaro. “Natiijooyinka hordhaca ah ee AMISOM waxay soo jeedinayaan in ciidamada AMISOM ay ka ag dhowaayeen tuulada Wardinle xilliga dhacdada. <http://amisom-au.org/2016/07/amisom-investigates-claims-of-civilian-deaths-in-wardinle-bay-region/>.”

40 Human Rights Watch (HRW) waxay ogaatay in ciidamada Itoobiyaanka ah la soo sheegay inay si toosa xabad ugu fureen guriga dhibanayaashu ay isugu yimaadeen si ay u duceystaan. Dhibbanayaashu waxay ahaayeen waayeel, hoggaamiye diimeed iyo macalimiin iskuulada Islaamiga. https://www.hrw.org/sites/default/files/supporting_resources/hrw_letter_to_ambassador_madeira_re_wardinle.pdf.

41 Qaraarkii Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay 2036/2012, 2093/2013, 2124/2013 iyo 2372/2017.

42 CCTARC waxaa ka maqan shaqaale xirfad u leh inay soo ururiyaan oo ay falanqeeyaan macluumaadka.

iyo qorsheynta hawlgalka AMISOM. Qaabka looga daba-tago khasaaraha dadka rayidka ah loogana jawaab celiyo eedeymaha ay soo jeediyaan shakhsiyaad ayaa ku yimaada warbixin laga helo taliye qaybeed, cabasho dadweyne, iyo mid shaqsiyeed oo muwaadiniinta soo gudbiyaan. Si kastaba ha ahaatee xidhiidhada laga helo CCTARC ayaa aad u kooban. Iyadii lagu dhex-shaqaynayo hab-samaynta Siyaasadda Ka-taxaddarka Xad-gudubyada Xuquuqul Insaanka (HRDDP), CCTARC iyo Qaramada Midoobay – gaar ahaan UNSOM iyo Kooxda qaabislan Wadashaqaynta Ciidamada iyo Shacabka, ayaa waxaa la wadaagaa xogaha ku saabsan khasaaraaasha rayidka ah [ee ka dhasha hawlgallada AMISOM]. Xafiiska Taakulada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOS) iyo UNSOM ayaa taageero farsamo u fidiya AMISOM iyadoo la eegayo horumarinta Halbeegga Habraacyada Hawlgallada iyo wax ka bedeliddooda⁴³

31. AMISOM waxay baaritaano asaasi ah ku samaysaa xadgudubyada lagusoo eedeeyo, kuwaasi oo haddii la ogaado inay jiraan, la asaaso guddi xaqiiqo raadin ah oo baaritaan ku sameeya xadgudubyada ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada iyadoo la raacayo talooyinka ku xusan Siyaasadda Ka-taxaddarka Xad-gudubyada Xuquuqul Insaanka (HRDDP). Si kastaba ha ahaatee, tallaabooyinkaasi ma aha kuwo ku filan. Waxaa adag in la helo dembi baarayaal u jajaban hawshooda oo ka mid noqda guddiga baaritaanka, iyadoo khubarada aqoonta u leh arrimahaas ee ka socda Dalalka Ciidamadu Ka-joogaan halkan (TCCs), ee aan ahayn kuwo wax laga tirsanayo, inta badan hawsha iyaga loo dhiibo. Waxa intaas sii dheer, iyadoo ay yartahay wercelinta laga helo tallaabooyinka baadhitaan ee ay AMISOM qaaddo, ha noqdaan baadhitaano hordhac ah, ama kuwo guddiyo xaqiiqo-raadin ah loo saaray, UNSOM si buuxda uma qiimayn karto illaa inta lagu kalsoonaan karo baadhitaannada ay sameeyaan AMISOM.
32. Waxaa sidoo kale jira caqabado dheeraad ah oo AMISOM ka heysta xaqiijinta in natiijooyinka baaritaanadooda ay aqbalaan dalalka ciidamada iyo booliska ku deeqay (TCCs/PPCs), iyo in daka loo aaneeyay inay galeen dembiyada si degdeg ah dacwad maxkamad loo soo saaro, dacwad lagusoo oogo, haddii dembi lagu helana la xukumo. Hadaba si loo hirgaliyo in si wax ku ool ah loola xisaabtamo kuwa xadgudubyadaasi geystay, waxay ku xidhantahay Dalalka Ciidamada ku Deeqay (TCCs/PPCs), kuwaasi oo laga filayo inay iskood u baadhaan iyo inay tixgaliyaan talo-soojeedimaha kasoo baxa baadhitaannada ay sameeyaan AMISOM ama guddiyada loo xil-saaro baaritaanada. Dalalka ciidamada iyo booliska ku deeqay (TCCs/PPCs) waxaa mas'uuliyad ka saarantahay xaqiijinta isla-xisaabtanka iyagoo u maraya hababka cadaaladda ee iyagu ay leeyihiin. Tusaale ahaan, Maxkamadda Ciidan ee Uganda ee fadhiga ku leh Soomaaliya ayaa dacwad ku qaaday askar ku lug yeelatay falal dembiyeedyo, sida khiymooyin lagu dhacay shidaal iyo tuuganimo. Si kastaba ha ahaatee, in la helo baadhitaan deg-deg ah, oo ay si daahfuran ay dalalka ciidamada ku deeqay ay sameeyaan ama dacwado ay kusoo oogaan kuwa loo haysto inay geysteen xadgudubyo ka dhan xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ahi, ma ahayn hawlo si waafi ah loo qabtay. AMISOM sidoo kale lama wadaagin Qaramada Midoobay, natiijooyinka kasoo baxay baadhitaannada iyo dambi-ku-oogista ay sameeyeen dalalka ciidamada soo diray. Sidoo kale, waxaa walaac laga muujiyay sidii loo xaqiijin lahaa, in falal aargoosi ah laga ilaaliyo dhibanayaasha iyo markhaatiyaalka ku markhaati fura xadgudubyo ka dhan ah sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada iyo sharciga

43 Wax ka beddelidda sida lagu qeexay qoraalka nidaamka hawlgalka caadiga ah ee AMISOM ee ku saabsan ka jawaabida waxyeellada rayidka: “Dhaqanka dhinacyada qeybta ka ah dagaalka oo siinaya aqoonsi iyo gargaar dadka rayidka ah ee ku waxyeeloobaya hawlgalada dagaalka inta uu sharciga ogol yahay, inkasta oo aysan jirin waajibaad sharciiyeed si loo sameeyo. Sameynta wax ka beddelid waxay qaadan kartaa noocyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin raali-gelin, bixin ta magdhaw lacageed, kaalmo caynsan, barnaamijyada gargaarka nolol- maalmeedka, iyo waxyaabo kale oo loogu talagalay baahida iyo rabitaanka dhibbanayaasha. Waa inay noqotaa mid caddaalad ah oo dhaqan ahaan ku haboon. “

caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, maadaama AMISOM aanay weli diyaarinin tallaabooyin cad cad oo arrinkaas wax looga qabto.

Tallaabooyin lagu yaraynayo khasaaraha oo ay soo jeedisay Qaramada Midoobay

33. Siyaasadda Qaramada Midoobay ee Ka-taxaddarka Xad-gudubyada Xuquuqul Insaanka (HRDDP) waa qaab-samays ay Qaramada Midoobay u adeegsato fulinta taxadarka lagama maarmaanka ah si loo xaqiijiyo in ciidamada aan ahayn kuwa Qaramada Midoobay balse taageerada ka hela Qaramada Midoobay aanay u geysan xadgudubyo ka dhan ah sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka. Qaramada Midoobay waxay aasaastay Guddi Hawl-wadeen ah⁴⁴ oo soo diyaariya qiimeynta khataraha soona bandhiga tallaabooyin lagu yareen karo⁴⁵ si loogu caawiyo ciidmada aan ahayn kuwa Qaramada Midoobay, oo ay ku jiraan AMISOM. Ilaa iyo hadda, Qaramada Midoobay waxay fulisay afar [daraasad] qiimeyn oo lagu qiimeynayo khataraha oo la xiriira howlgallada AMISOM ama ciidamo kale oo la rajeynayo inay hoos iman doonaan AMISOM⁴⁶ marka ay fulinayaan hawlgallo gaar ah, wuxuuna Guddigaasi soo jeediyay talooyin looga hortegayo iyo tallaabooyin loogaga jawaabayo xadgudubyada, talooyinkaas oo ay dib-u-eegis ku sameeynayaan Koox Hawleedka Isku-dhafan ee UN-AMISOM ee ku hawlan arrimaha (HRDDP).
34. UNSOM waxay 50 dacwadood oo eedeymo ku saabsan xadgudubyo ka dhan xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee xilliyada dagaallada u gudbisay AMISOM, waxayna kasoo jawaabeen 26 dacwadood oo kaliya. AMISOM waxay dafirtay 14 dhacdo oo kamid ah 26 dhacdo; waxay qiratay iyo/ama ay guddi u saartay todobo dhacdo waxayna si gaar ah ugala hadashay unugga CCTARC,⁴⁷ waxayna qiratay shan dhacdo oo ay u aaneysay qolyo kale ama ay u weysay cid qaadata mas'uuliyadda.
35. Waxa kale oo walaac ka jiraa sida gaabiska ah ee AMISOM uga soo jawaabto eedamyaha loo soo jeediyo. Waxa kale oo naadir ah in la helo jawaabcelin ka wabixinayso tallaabooyin cad-cad oo la qaaday markii baadhitaanka la samaynayay, sida waraysiyo laga qaaday dhibanayaasha, markhaatiyaasha ama maamullada hoose. In la qaado tallaabooyin la isku-xisaabiyo oo la isku-saxo waxay kamid ah tallaabooyinka mudnaanta leh ee lagu yaraynayo khasaaraha, sida lagusoo bandhigay qaab-samayska QM ee ku aaddan HRDDP, kaas oo lagu kaalmaynayo AMISOM. Markii ay dhacdo in aanay waafi noqon ama la waayo baaritaano la aamini karo oo lagu sameeyo eedeymaha, aya taasi waxay horseedi kartaa in Qaramada Midoobay ay dib uga fiirsato iyo/ama ay hakiso taageerada ay siiso shakhsiyadka iyo guutooyinka ku lug yeesha xadgudubyada.

6. Maleeshiyaad iyo Kooxo Hubaysan oo Gacansaar la leh Ciidamo Ammaan oo Qaran ama Caalami ah

36. Dagaallada Soomaaliya ka jira iyo hawlgallada ciidan ee socda ee ka dhanka ah Al Shabaab, iyo weliba meelaha ay ku yaryihiin ciidamada/hay'adaha sharci fulinta, ayaa soo jiidatay dhinacyo kala-duwan oo xiriir la leh ciidamo amni oo heer qaran ama caalami ah oo ku lug yeesha tacadiyada ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada

44 Iyadoo la raacayo qoraalka nidaamka hawlgalka ee caadiga ah (SOP) ee 2014 hirgelinta Siyaasadda HRDDP ee Soomaaliya, ayaa Guddi-Hawleedku wuxuu ka koobanyahay dhamaan hay'adaha Qaramada Midoobay ee taageerada siiya ciidamada amniga ee aanahayn kuwa Qaramada Midoobay

45 Kooxda HRDDP ee Qaramada Midoobay, oo la aasaasay sannadkii 2016, waxay kobcisaa qiimeynta halista iyo dib u eegista tallaabooyinka looga hortago iyo ka jawaabida xadgudubyada. Waxay kulantay shan goor muddada warbixinta.

46 Qiimeynta khataraha ee ciidamada Ethiopia (ENDF) iyo kuwa Kenya (KDF) ee aan ka tirsanayn AMISOM iyo Ciidamada Darawiishta Jubbaland.

47 Xaaladdan, tixraac CCTARC oo la xidhiidha dabagalka tixgelinta suurtagalka ah ee qaabeynta SOP-yada oo wax laga beddelayo.

colaadaha. Tacaddiyadaas waxaa intooda badan geysta maleeshiyo beeleedyo iyo ciidamada loo yaqaan Liyu Boolis ee Itoobiya.

C. Duqaymaha Hawada ee Ciidamada Caalamiga ahi fuliyaan

37. UNSOM waxay diiwaagnalisay 74 duqaymood oo ay fuliyeen ciidamo kala-duwan intii lagu guda jiray diyaarinta warbixintan⁴⁸, waxaana ka dhashay khasaare soo gaaray dad rayid ah oo tiradoodu tahay 57 (41 dhimasho ah iyo 16 dhaawcyo ah). Ciidamada Difaaca Kenya ee aan ka tirsanayn AMISOM ayaa iyaguna lagu eedaynayaa inay masuul ka yihiin khasaare soo gaadhay 42 qofood oo rayid ah (36 dhimasho ah, iyo lix dhaawac ah)⁴⁹.
38. Tirada dadka rayidka ah ay waxyeellooyinku kasoo gaadheen weerrarada cirka waa kuwa ay adagtahay in la xaqiijiyo maadaama ay duqaymahaasi intooda badani ka dhacaan meelaha ay gacanta ku hayso Alshabaab. Meelahaasi oo Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kaleba ay ku adagtahay inay gaaraan ama aanay gaari karinba.
39. Bishii Disembar 2016, iyadoo la raacayo Qaraarkii Qaramada Midoobay ee tirsigiisu ahaa 2036 (2012), AMISOM waxay soo kireysatay saddex diyaaradood oo nooca qumaatiga u kaca ah, waxaana ay kasoo kireysteen Kenya, waxaana diyaaradahaas duuliya oo ku shaqeeya Ciidamada Difaaca Kenya ee ka tirsan AMISOM. Waxa taasi garab socday isla sannadkaasi 2016, in Ciidamada Difaaca Kenya ee hoos taga AMISOM ay adeegsanayeen qalabkooda dagaalka cirka ee iyaga u gaarka ah. Sidaas darteed, asteynta cidda qaadaysa mas'uuliyadaha khasaaraha ay geystaan Ciidanka Difaaca Kenya ee hoos taga AMISOM iyo Ciidanka Difaaca Kenya ee aan hoos tegin, ayaa noqonaysa arrin mar kasta sii cakirmeysa.⁵⁰
40. Waxa la fuliyay 74 duqaymood oo cirka ah, oo ay ku jiraan 18 weerar oo lagu fuliyay diyaaradaha qumaatiga u kaca oo ay si wadajir ah u fuliyeen cutubka gaarka ah ee CXD ee loo yaqaan Danab⁵¹ iyo Ciidamada Maraykanka oo loo aaneeyay (14 kiisas). Waxaa jira afar weerar cir ee kale ee ay fuliyeen Ciidanka Difaaca Kenya keligood. Sagaal weerar oo ay taageerayso Dowladda Mareykanka

48 dhammaan duqeymaha cirka ee la soo sheegay lama kulmin khasaaraha rayidka ah.

49 Fadlan fiiri jawaabta lifaaqan ee Jamhuuriyadda Kenya, ref. maya. KES / MGD / ADM.1 / 31 / (03) taas oo lagu caddeeyey in KDF aysan si siman u shaqaynayn.

50 Tusaale ahaan, fiiri war saxaafadeed ay soo saartay Wasaaradda Gaashaandhigga ee Jamhuuriyadda Kenya 2 iyo 27 Maarso 2017, taas oo sheegaysa in ciidamada KDF ee ka hawlgala AMISOM ay si guul leh u fuliyeen hawada iyo howlgallada ka dhanka ah Al Shabaab. Isgaadhsiinta ka soo baxday Dowladda Kenya ee howlgallada AMISOM ayaa ahayd mid aan caadi ahayn, maadaama AMISOM hawlgalladeeda caadiyan ay iyadu ka warbixiso. Safaarada Jamhuuriyadda Kenya waxay sheegtey in warbaahintu ay si fudud u xaqiijineyso macluumaadka laga helay AMISOM waxaana ay la jaan qaadaayan sharciga Kenya kaas oo looga baahan yahay Dowladda Kenya inay war ka siiso dadka Kenya howlaha millatari ee ay ka wado Soomaaliya.

51 Danab waa unug CXD ka tirsan oo ka kooban 500 saraakiil si fiican loo tababaray oo ku lug leh hawlgallada ammaanka oo ay ka garab shaqeeyaan ciidamada qalabka sida ee caalamiga ah, badanaa Maraykanka iyo Kenya. Waxaa lagu soo warramey in ay ka qeyb qaadanayaan weerarrada hawada ee ka dhanka ah Al-Shabaab, waxaana uu saldhigoodu yahay garoon diyaaradeed ku yaal Shabeelaha Hoose oo ay maamulaan ciidamada Mareykanka.

ayaa sida lasoo weriyay ka dhacay Shabeellaha Hoose, labo kale ayaa ka dhacday Bakool, saddex ayaa ka dhacday Jubbada Hoose⁵².

41. Weerarada cirka ah waxay burburiyeen guryo waxayna baabi'iyeen xoolo nool, waxaa sidoo kale ay barakiciyeen xoolo dhaqatadii iyo dadkii kale ee ku noolaa deegaanada la bar tilmaameedsaday. Waxa la sheegayaa inay Alshabaab afduubtay afar qof oo ay ku eedeeyeen inay weeraradaasi cirka kuso hagayeen saldhigyadooda. 27-kii September 2016, Maraykanka ayaa duqayn cirka ah ku bartilmaameedsaday Ciidamada amaanka ee Galmudug oo loogu khaldamay inay ahaayeen Al Shabaab, dhacdadaas oo sii kordhisay xiisaddii ka dhexeysay dowlad goboleedyada Galmudug iyo Puntland. Dagaal culus ayaa ka dhex qarxay ciidamada Puntland iyo Galmudug, dagaalkaas oo ka dhacay magaalada Gaalkacayo ayaa socday muddo ka badan laba bilood. Dagaalladaasi ayaa sababay ugu yaraan 25 dhimasho ah iyo 48 dhaawac ah. Kiisas badan ayaa Dowladda Mareykanku ay war saxaafadeedyo kasoo saartay duqeymo cirka ah oo ay ku fulisay diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, waxayna sheegtay in aanay jirin khasaare lagu gaarsiiyay dad rayid ah. Si kastaba ha ahaatee, ma cadda sida mareykanku uu ku xaqiijiyay in aanay jirin khasaare soo gaaray dad rayid ah.
42. Marka laga hadlayo xadgudubyada loo aaneeyo inay geysteen hay'ado dawladda ka tirsan iyo ciidamo caalami ah, UNSOM wax war ah kama hayso baadhitaannada arrimahaasi laga furay. Si kastaba ha ahaatee, lagasoo billaabo 2016kii, DFS ayaa magacawday saddex guddi oo soo baadha seddex dhacdo oo kala duwan oo loo arkay inay halis ku yihiin xaaladaha badbaadinta dadka rayidka ah. Eedeysanayaashii falal dembiyeedyada ee dhacdo kasta oo kamid ahayd saddexdaas dhacdo waxay ahaayeen ciidamo dowladdu leedahay ama ciidamo shisheeye, sida Ciidamada Difaaca Kenya⁵³. Hal kiis oo kaliya ayaa guddigu natiijo kasoo saaray, laakiin natiijooyinkaas lama shaacin. In la daaboco natiijooyinkaas ayaa lagu xaqiijin lahaa daah-furnaan iyo isla-xisaabtan, oo labadooduba lagama maarmaan u ah abuurista kalsoonida muwaadiniintu ay ku qabaan Dowladda.

D. Xadgudubka Xuquuqda Aadanaha iyo Gabood-fallada loo aaneeyo Kooxaha Hubaysan

43. UNSOM waxay aqoonsatay in ka badan 40 kooxood oo hubeysan oo Soomaaliya jooga. Kuwa ugu muhiimsan ee ku lug leh xadgudubyada waa Al-Shabaab, Ahlu Sunna Waljamaaca, iyo kooxo kale oo hubaysan oo inta badan lala xiriiriyo qabaa'lladooda.

1. Al Shabaab

44. Al-Shabaab waxay asalkeedii ka soo dhex baxday Midowgii Maxkamadaha Islaamiga (ICU), oo mar gacanta ku hayay inta badan deegaannada loo yaqaan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Intii u dhexeysay 2007 iyo 2011, Al Shabaab waxay maamulaysay qaybo badan oo ka mid ah Galmudug,

52 Madaxweynaha Mareykanka, Donald Trump ayaa saxiixay amar madaxweyne bishii Maarso 2017, isagoo ku dhawaaqay in qaybo kamid ah Soomaaliya ay tahay goobo ay ka jiraan "colaad dhab ah" wuxuuna amar buuxa ku siiyay taliyeyaasha Taliska Mareykanka ee Africa (AFRICOM) inay weeraro iyo duqeymo cirka ah ku qaadaan dagaallamayaasha loo maleynayo inay xiriir la leeyihiin Al Shabaab. Amarka oo sii kordhinaya awoodda beegsiga isla markaasina adeegsanayaa "xeerarka beegsiga aagagga dagaalka" ayaa si degdeg ah ku dhaqan galay wuxuna socon doonaa 180 maalmood. Amarkani wuxuu hoos u dhigay halbeegyadii uu kusoo rogay Madaxweynihii Hore Barack Obama sanadkii 2013 ee ku qornaa "Siyaasadda Hagidda ee Madaxweyne" taas oo dalbanaysa in "lagu dhaqaaqo wax la hubo ama hubanti ku dhow" si hawlgallada ciidan aanay uga dhalanin khasaare dadka rayid ah soo gaara (Habracyo loo maro Tallaabooyinka Tooska ah ee lagu beegsanayo goobaha Argagixisada, 2013). Amarka lasoo saaray 2017 wuxuu u fasaxayaa hawlgalka AFRICOM inuu weeraro ku qaado dadka looga shakiyo inay yihiin dagaallamayaal Al Shabaab ah ee kaligood ku sugan goobta la bartilmaameedsanayo. Hagayaashu waxaa kale oo ay fasaxayaan khasaaraha rayidka ah ee laga fursan waayo.

53 31-kii Janaayo 2016, Ra'iisal Wasaaruhu wuxuu magacaabay guddi baaritaan ku sameeya saameynta weerarada cirka, taasoo uu hoggaamiyay Wasiirka Difaaca. 8 May 2016, Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu magacaabay guddi shan xubnood oo baaritaan ku sameeya eedeymaha isticmaalka carruurta sida basaasiinta. 26-kii Maajo 2016, Wasaarada Ammaanka ayaa loo doortay guddi baadhitaan ku sameeya eedeymaha saraakiisha NISA ee jirdil loo geystay.

HirShabelle, Koonfur Galbeed, Jubbaland iyo Banaadir, oo ay ku jirto caasimadda, Muqdisho, ka-hor intii aanay hawlgallada amni qaadin CXD iyo AMISOM, hawlgalladaas oo gacanta maamulka DFS dib ugu soo celiyay xarumaha/magaalooyinka waaweyn ee bulshadu ku nooshahay. Al-Shabaab ayaa markaa door-bidday degaannada miyiga ah waxayna dhiseen xeryo tababar oo ciidan iyo saldhigyo ay ka hirgeliyeen meelaha ay ku xoogan yihiin ee Jubbada Dhexe, Degmooyinka Bu'aale, Saakow, iyo Jilib ayaa weli ku jira gacanta Al-shabaab oo ay heysataa⁵⁴.

45. Markii Al-Shabaab ay saldhigatay degaannadaas waxay bilowday adeegsiga xeelado sida Walxaha Qarxa ee Macmalka ah, is-miidaamiyeyaal, iyo dilal qorsheysan. Bartilmaameedkooda koowaad waxaa ka mid ah saraakiisha dawladda, CXD, AMISOM iyo ciidamada kale ee caalamiga ah, iyo sidoo kale goobaha ay ku badanyihiin dadka rayidka ah sida suuqyada, hoteelada iyo makhaayadaha.⁵⁵
46. Awoodda ama tirada ciidan ee Al-Shabaab ayaa lagu qiyaasay in ay u dhexeeyso 7,000 iyo 9,000 sanadkii 2014, laakiin tiradaas ayaa la sheegay in ay hoos u dhacday maadaama sida lasoo wariyay ay gacantooda kasii baxayaan deegaanada waaweyn ee dadku ku badanyahay. Si kastaba ha ahaatee, ugu yaraan boqolkiiba 61 dadka rayidka ah (446,582) ee ku nool Jubbaland, oo ay ku jiraan dadka gudaha ku barakacay (IDPs) ee ku nool degaannada miyiga ah, ayaa weli halis ugu jira oo u nugul weerarrada Al Shabaab⁵⁶.
47. Macluumaad yar ayaa laga hayaa xaaladda dadka ku nool deegaanada gacanta ugu jira Al-Shabaab, waxaana caqabad ka taagantahay sida lagu hubinayo xadgudubyada xuquuqul insaanka iyo gabood-fallada ka dhaca aagaggaas maadaama aan la geli karin ama ay jirto cabsi laga qabo in falal aargoosi ah ay Al Shabaab kula dhaqaaqdo ciddii ka warbixisa tacaddiyada xuquuqul insaanka ee ay geystaan Al Shabaab. Al-Shabaab ayaa diyaarisay nidaam cadaaladeed bar-bar socda hawlohooda kale, nidaamkaas oo lagu magacaabo "Maxkamadaha Al-Shabaab", oo amar ku bixiya jar-jaridda xubnaha jirka iyo dilal. Bishii April 2017, Al Shabaab waxay markii ugu horreysay daabacday manhajkooda waxbarasho, oo loogu talagalay in lagu soo bandhigo fikradaha xagjirnimada, iyadoo afka Carabiga looga dhigay afka waxbarasho⁵⁷. Tan iyo markaas, Al Shabaab waxa ay manhajkaas ka hirgeelnaysay dugsiyada waxbarasho ee ku yaal deegaanada ay gacanta ku heyso waxayna uga digtay waalidiinta ku nool Soomaaliya in aanay caruurtooda ka diiwaan-gelin dugsiyada laga dhigo manhajka "reer-galbeedka"⁵⁸

2. Kooxaha Kale ee Hubaysan

Kooxda Xiriirka la leh Dowladda Islaamiga ah

48. Kooxda Xiriirka la leh Dowladda Islaamiga ah (ISAG), oo ah koox dagaalyahanno ah oo xifaaltan kala dhexeeyo Al-Shabaab ayaa sida la sheegay waxaa hogaamiya Cabdul Qadir Mumin, oo ahaa afhayeenkii hore ee Al Shabaab, waxayna kooxdaasi aan soo sheegnay ay ka hawl-gashaa gobolka Bari ee woqooyiga Puntland. ISAG waxay saldhiggeedii ciidan ee ugu horreeyay ka dhisatay gobolka

54 Qiyaasta dadweynaha 362,921, Qorshaha Horumarinta Qaranka Soomaaliya, 2017.

55 <http://www.sawirroTV.com/2017/02/19/ururka-al-shabaab-oo-markii-u-horeyn-ka-hadlay-madaxweyne-farmaajo/> (oo ka soo horjeesatay faragalinta FGS ka dib doorashadii Madaxweynaha Farmaajo); <http://www.raxanreeb.com/2017/02/speechka-al-shabaab-oo-u-hanjabay-madaxweyn-dowsta-faderaalaal/> (ujeedada ujeedadu tahay in la sii wado la dagaallanka Xukuumadda soo galeysa); <https://www.youtube.com/watch?v=BJwuw-H0mgs> (Afhayeenka al-Shabaab ee geeddi-socodka doorashada 2017).

56 Marka laga reebo qiyaastii 282,003 oo qof oo ku nool magaalooyinka hoos yimaada maamulka Jubbaland ee Gedo (109,142) iyo gobollada Jubada Hoose (172,861), Qorshaha Horumarinta Qaran ee Soomaaliya, 2017.

57 Mawduucyada waxaa ka mid ah: Juqraafiga, Taariikhda, Sayniska, Xisaabta, Soomaali, Carabi, Fiqh, Tawheed, Xadiiska (dhaqanka Nabi Maxamed), iyo Tajweed (sharciyada xukumaya qabka akhrinta Quraanka) War saxaafadeedka al-Shabaab, 19 Abriil 2017

58 War saxaafadeedka al-Shabaab, 19 Abriil 2017.

bishii April 2016, waxaana tirada ciidankeeda markaas lagu qiyaasayay 100⁵⁹. ISAG ayaa markaas wixii ka dambeeyay isku dayday inay isku sii ballaarisoo gobollada Bay, Shabeellaha Hoose iyo labada Jubba, laakiin waxaa jebiyay Al Shabaab bishii Disembar 2016.

49. Bishii Abriil 2016, ISAG waxay sheegatay mas'uuliyadda dhowr bam-gacmeedyo iyo Walxaha Qarxa oo lagu weeraray AMISOM iyo ciidamada amniga, waxaana ka dhashay dhowr khasaaro oo soo gaaray dad rayid ah, oo intooda badan ku sugnaa gobolka Banaadir. Bishii Oktoobar 2016, ISAG waxay qabsatay magaalada Qandala ee gobolka Bari, taas oo sababtay barakaca dadkii deegaanka. Bishii Disembar 2016, ciidamada Puntland ayaa magaalada ka xoreeyay kooxda ISAG iyadoo aanay ka hor-imaanin wax iska-caabbin ah. ISAG ayaa sii wadday in ay weerarro ku qaaddo goobaha ciidan ee ku yaalla qaybo kala duwan oo kamid ah gobolka Bari, laakiin sidoo kale waxay ku hawlaneed falal dambiyeedyo saameeynaya dadweynaha, sida boobka cuntada iyo sahayda beeraha iyo tuulooyinka.

Ahlu Sunna Waljamaaca

50. Ahlu Sunna Waljamaaca (ASWJ) waa urur qunyar-socod ah oo ka dhisan Soomaaliya. Dagaallamayaal ka tirsan [dariiqooyinka] Suufiyada ayaa xoogeystay kadib soo if-baxitaankii Al Shabaab. Waa koox hubeysan oo leh maamul iskiis u taagan oo ka jira gobolka Galguduud – degmooyinka Guriceel iyo Dhuusamareeb. Waxay sheegataa in Hiiraan, Galguduud iyo Mudug ay qayb ka yihiin deegaannada ay ka taliso, waxayna xurguf kala dhexeysay ciidamada amaanka iyo maamulada dowladda ee ka arrimiya deegaannada ay kooxdu gacanta ku hayso. Waxay ka kooban tahay dhaq-dhaqaaq siyaasadeed iyo maleeshiyaad ku sugan Galmudug, waxaana tirada askartooda lagu qiyaasaa 3,000-4,500.⁶⁰ Tiradaasi wey is bed-dedehaa, maadaama xubnaha ASWJ qaarkood ay ka tirsanyihiin CXD isla markaasina ASWJ, markii ay u baahato, ay abaabusho mutadawiciin aan si buuxda u shaqayn oo gelin shaqeeya [gelinka kalena aan shaqayn].⁶¹ Kooxdu ma lahan muuqaal beeleed oo gaar ah. Xiriirka iyo isla macaamilka beelaha waa mid adag oo beelaha badankoodu waxay leeyihiin maleeshiyaad u gaar ah, oo aan sal ku lahayn sharciga Soomaaliya, mana aha maleeshiyaadkaasi kuwo ku shaqeeya hab-dhismeed rasmi ah. Colaadhaha ka dhexeeya beelaha ayaa ah kuwo baahsan waxayna la xiriiraan guud ahaan colaado hubeysan oo aan ahayn caalami, waxayna colaadahaasi si gaar ah ugu badanyihiin gobollada aanay ka jirin ama ku awood yaryihiin DFS ama maamullada dowladda. Dhibaatooyin soo jireen ah oo la kala tabanayay, faquuqid siyaasadeed, muran dhuleed iyo helidda kheyraadka ayaa ah sababaha ugu weyn ee dhaliya colaadda, iyadoo inta bandanna colaadda xalkeeda lagu raadiyo colaad kale, waxaana colaadahaas ka faa'iideysta Al Shabaab. Maleeshiyo beeleedyadu waxay ku kacaan dilal qorsheysan, xadgudub jinsi, iyo burburin ay kula dhaqaaqaan hantida dadka rayidka ah.

Maleeshiyo Beeleedyo

51. Xiriirka iyo isla macaamilka beelaha waa mid adag oo beelaha badankood waxay leeyihiin maleeshiyaad u gaar ah, oo aan sal ku lahayn sharciga Soomaaliya, mana aha maleeshiyaadkaasi kuwo ku shaqeeya hab-dhismeed rasmi ah. Colaadhaha ka dhexeeya beelaha ayaa ah kuwo baahsan waxayna la xiriiraan guud ahaan colaado hubeysan oo aan ahayn caalami, waxayna colaadahaasi si gaar ah ugu badanyihiin gobollada aanay ka jirin ama ku awood yaryihiin DFS ama maamullada

59 Ilaha UNSOM ayaa sheegay in ISAG aysan laheyn wax ka badan 100 dagaalyahan oo ka tirsan Puntland, taas oo ay xaqiijiyeen Kooxda Kormeerka Soomaaliya iyo Eritrea. Ilaha kale ayaa qiyaasaya tirada xagjiriintu inay yihiin inta u dhaxaysa 200 ilaa 400.

60 Qiyaasta Qaramada Midoobay ee tirada/awoodda jilaayaasha amniga, bishii Sptember 2016.

61 Qoraalo loo gudbiyay y CXD (2014) iyadoo madaxda rasmiga ah ee kooxdu ay sheegeen inay diyaar u yihiin in xubnaha ASWJ kusoo biiraan CXD, bishii Febraayo 2017. 11kii Febraayo 2017, arrinkan waxaa si cad u taageeray Taliyaha Ciidanka Xoogga ee Soomaaliya, laakiin ma jirin wax ballan-qaadyo dheeraad ah oo la sameeyay.

dowladda. Dhibaatooyin soo jireen ah oo la kala tabanayay, faquuqid siyaasadeed, muran dhuleed iyo helidda kheyraadka ayaa ah sababaha ugu weyn ee dhaliya colaadda, iyadoo inta badanna colaadda xalkeeda lagu raadiyo colaad kale, waxaana colaadahaas ka faa'iideysta Al Shabaab. Maleeshiyo beeleedyadu waxay ku kacaan dilal qorsheysan, xadgudub jinsi, iyo burburin ay kula dhaqaaqaan hantida dadka rayidka ah.

“10:30 habeenimo, qiyaastii 10-12 rag hubeysan, oo dhamaantood ah rag ka tirsan maleeshiyaadka beesha habargidir, oo ah beel ka tirsan Hawiye, ayaa weeraray Essow, oo ah tuulada aan ku wada nooleyn annaga iyo 14 qoys oo xoolo dhaqato ahaa oo dhamaantood ahaa dad qaraabo ah oo u dhashay jufada Biyomaal ee beesha Dir. Rasaas ayay marka hore cirka u rideen abaarihii 10:30. Markii aan maqalnay rasaasta, hooyaday ayaa igula talisay in aan meesha ka cararo oo aan ka wado wiilkeyga 13-sano jirka ah oo aan meelo fog aadno. Hooyaday waxay moodday, maadaama ay tahay qof waayeel ah, caruurta lixda ahna ay yihiin caruur yaryar, in maleeshiyaadku aanay beegsan doonin. Waan diiday in aan iyaga mesha uga tago laakiin hooyaday ayaa igu cadaadisay in aan meesha ka tago haddii kale ragga weerarka soo qaaday ay I dilayaan aniga iyo wiilkeyga caruurta ugu weyn. Cadaadis kadib, aniga iyo wiilkeyga waan ka cararnay goobta si aan nafteenna u badbaadsano, isaga ayaana noqday canugga kaliya ee iigaga badbaaday sagaal caruur ah. Intii aan sii cararayay, waxaan fursad u helay in aan arko oo aan aqoonsado kuwa weerarka soo qaaday. Dadki ayay qof qof guriga uga baareen. Halkii aan ku dhuumaaleysanayay ee aan ka daawanayay, waxaan maqlayay caruurtii oo qeylinaysa xabadaha dartood. Markii kuwii weerarka soo qaaday ay maqleen codadka caruurta, ayay galeen gurigeena waxayna dileen dhamaan lixdeydii caruurta ahayd iyo ayeeyadood. Gurigiina dab ayaa la qabadsiiyay waxaana lagu dhex gubay meydadkii ku jiray.” – Dhibbane weerar kala kulmay maleeshiyaad beesha Habar-Gidir ah ee goobolka Shabeellaha Hoose, 18kii April 2016, weerarkaas oo sababay dhimashada lix kamid ah caruurteeda gurigeediina lagu burburiyay. Maleeshiyo Beeleedyo

”

52. Dabeecada isla dhaqanka iyo xiriirka macaamil ee ka dhaxeeya qabiilada ayaa ah mid aan deganayn isla markaana ay soo foodsaraan isbedbedelo marka la eego qaababka socdaalka, hababka siyaasadeed iyo barakaca⁶². Isba-haysiyada dhex-mara beelaha iyo taageerada loo fidiyo Al Shabaab ayaa inta badan ku yimaada fursado waxaana is-bedel ugu dhacaa si lama filaan ah. Beelo aan tiro badnayn (waaba haddii ay jiraane) ayaa la safta dhinac kamid ah dhinacyada colaadda qaybta ka ah, inkasta oo ciidamada CXD ay ku dhex jiraan xubno maleeshiyo beeleedyo ah. Tani waxay saamayn ku yeelan kartaa isku-xirka amarka iyo kala-dambaynta ee ciidamada waxayna sii hurin kartaa colaadaha la xiriira beelaha. Sanadkii 2014ki, Kooxda La-socodka [Cuna-qabataynta] Soomaaliya iyo Eretrea (SEMG) ayaa soo tebisay inay jiraan eedeymo ah in “saraakiil sare oo ka tirsan CXD oo si toos ah uga qayb-qaatay colaadyo beeleedyada [iyo] hubka CXD oo si qarsoodi ah loogu gudbiyay maleeshiyo beeleedyo.”⁶³ Xadgudubyada kale ee la diiwaan-geliyay ee ay ku keceen xubno “amar diidayaal ” oo ka tirsan CXD ama maleeshiyo beeleedyo ka tirsan askarta CXD waxaa kamid ah “qaadashada lacago baad ah, dhac hubeysan, jir-dil iyo xarig lagula kaco dadka deegaanka ee

62 Warbixinta Kooxda Kormeerka Cunaqabataynta Hubka ee Saaran Soomaliya iyo Eritrea 2015kii, S/2015/801: “9. Shabeellaha Hoose, tusaale ahaan, Kooxda Cunaqabatayntu ay baaritaan ku hayso masuuliyad shakhsiyeed oo weeraro taxane ah oo lagu qaaday dad rayid ah kana dhacay degmada Qoryooley, gaar ahaan xaafadaha Buulo Sheikh, Hadoman iyo Farhano horraantii Janaayo, Febrayo iyo Maarso ee sanadkii 2015. Waxaa weeraradaas wada geystay ciidamo ka tirsan CXD (waxaana loo adeegsaday qalab/hub uu leeyahay CXD), maleeshiyo beeleed iyo xubno ka tirsan Al Shabaab. Weeraradu waxay ka markhaati kacayaan awoodda is-bahaysiyada iyo danaha kala-duwan ee soo kordhaya ee u dhexeeya dhinacyada qaybta ka ah colaadda Soomaaliya ee heer deegaan. Xadgudubyada ayaa isa soo taray iyadoo ay jiraan colaado u dhexeeya maleeshiyo beesha Saalax ah iyo maleeshiyaad Hawiye ah (gaar ahaan Habargidir, xataa Xawaadle iyo Murusade) oo ku dagaallama deegaanadaas iyo dagaalka guud ee lagula jiro Al Shabaab. Maleeshiyaadka Saalax waa maleeshiyaad difaac waxaana aasaasay beelaha Baantuuga, waxaana hogaamiya Baantu Digil-Mirifle/Dube, Sheekh Saalax”

63 S/2014/726, Lifaaq 3.2. Halista ku wajahan nabadda iyo amniga ee Shabeellaha Hoose iyo Shabeellaha Dhexe, faqradda. 18.

lagusoo eedeeyo inay gacan siiyaan Al Shabaab”.⁶⁴ Warbixinnada Kooxda SEMG ee 2014 iyo 2015 waxay iftiimiyeen in “hogaanka ciidan iyo kan siyaasadeed ee nidaamka federaalka ah la af-duubtay si loogu horumariyo dano beeleed iyadoo ciidamada amniga ee DFS iyo agabkoodaba la geeyo goobaha dagaalka si ay uga qayb-qataan dagaal beeleedyada.”

E. Noocyada Weerarada iyo Xadgudubyada iyo Gabood-fallada loo Aaneeyo Kooxaha Hubeysan

53. Muddadii ay socotay dib-u-eegista, khasaaraha soo gaaray dadka rayidka ah wadartiisuna tahay 3,322 (1,484 dhimasho ah iyo 1,838 dhaawac ah) ayaa loo aaneeyay kooxaha hubeysan ee dagaalka kula jira ee ciidamada qaranka iyo kuwa caalamiga ah , khasaarahaasina wuxuu boqolkiiba 72 ka yahay khasaaraha guud. Kuwa falalka geystay ayaa u badnaa Al Shabaab laakiin xataa waxaa dagaal hubeysan uu dhex maraa Kooxda Xiriirka la leh Dowladda Islaamiga ah ee ka hawlgasaha Puntland iyo maleeshiyo beeleedyada. Khasaaraha dadka rayidka ah soo gaara ee loo aaneeyay Al Shabaab iyo Kooxaha Xiriirka la leh Dowladda Islaamiga ah ayaa ah 60 boqolkiiba wadarta khasaaraha. Waxaa intaas sii dheer, kuwa dhib geystay oo aan heybtooda la garan ayaa adeegsada tabaha ay adeegsadaan Al Shabaab sida Walxaha Qarxa ee Macmalka ah, hoobiyeyaal, iyo dilal qorsheysan. Sidaas darteed, qiyaastii 10 boqolkiiba khasaaraha loo geystay dadka rayidka ah ayaa la waayay meel loo tiiriyo.
54. Khasaaraha loo geystay dadka rayidka ah, loona aaneeyay Al Shabaab ayaa ka dhasha adeegsiga hubka qarxa, iska-hor-imaad toos ah, khaarijin qorsheysan iyo dilal aan sharciga waafaqsanayn. Gobollada ay khasaarooyinkaas aadka u saameeyeen waa Banaadir, Shabeellaha Hoose, Bay iyo Shabeellada Dhexe.⁶⁵ 64 boqolkiiba khasaaraha rayidka ee loo aaneeyay Al Shabaab waxaa uu ka dhashay Qaraxyada loo adeegsado Gawarida (VBIEDs) halka 15 boqolkiiba loo adeegsaday Walxaha Qarxa ee Macmalka ah. Weerarada iska-hor-imaadka ah waxay sababeen 15 boqolkiiba qasaaraha, inta kale ee soo hartay ee khasaaraha waxay ka dhasheen khaarijin qorsheysan (waxayna u dhigantaa 4 boqolkiiba), toogasho (1.8 boqolkiiba) iyo ciqaabta jirka, oo ay kamid yihiin xubnaha jirka oo qaybo laga gooyo iyo karbaash/tacziir (oo noqonaya 0.2 boqolkiiba). Inta badan Qaraxyada loo adeegsaday Gawarida iyo Walxaha Qarxa ee Macmalka ah waxay ka dheceen Muqdisho, iyadoo dagaallada dhulka ah ay badankood ka dheceen gobollada Shabeellad Hoose, Jubbada Hoose iyo Bay.
55. Inkasta oo Al Shabaab ay caadiyan sheegato mas’uuliyadda weerarada ka dhanka ah ciidamada Dowladda iyo bartilmaameedyada kale ee ciidan sida baraha ciidamadu wax ku baaraan (checkpoints) iyo xeryaha tababarada, iyo goobaha kale ee ay ka midka yihiin hoteelada, makhaayadaha iyo suuqyada ay sida joogtada ah u tagaan madaxda/saraakiisha, ayaa haddana mar kasta aanay caddeyn in dhab ahaan ay iyagu fuliyeen weerarada ay sheegtaan. Si kastaba ha ahaatee, Al Shabaab ayaa ka aamustay inay sheegato mas’uuliyadda hawlgallo geystay dhibaato iyo burbur weyn, waxayna taa u yeelayaan inay ku ilaaliyaan sawirkooda ay ku dhex leeyihiin bulshada. Tusaale ahaan, kooxdu ma sheeganin weerarkii 14kii Oktoobar, markaas oo labo qarax oo loo adeegsaday gawaari goob dadku ku badanyahay oo faras-magaalo ah oo ka tirsan degmooyinka Hodan iyo Wadajir ee magaalada Muqdisho, qaraxyadaas oo sababay dhimashada ugu yaraan 512 ruux iyo dhaawaca 316 qofood, sida ay sheegeen guddi ay dhistay DFS, waxaana halkaas ku burburay hoteelo, maqaayado iyo xafiisyo

64 Ibid.faqrada. 24.

65 Weerarada loo adeegsaday Walxaha Qarxa ee inta badan ka dhaca koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan Shabeellaha (135) iyo Banaadir (129). Tirada weerarada ka kala dhacay maamul goboleedyada iyo gobollada xilli warbixineedkan waa sida soo socota: 210 Koonfur Galbeed (135 Shabeellaha Hoose, 67 Bay iyo sideed ka dhacday Bakool), 125 Banaadir, 84 Jubbaland (50 Jubbada Dhexe iyo 34 Gedo), 63 HirShabelle (36 Shabeellaha Dhexe iyo 27 Hiraan) iyo saddex Galgaduud.

ay leeyihiin Hay'ado aan Dowli ahayn iyo ganacsiyo gaar loo leeyahay. Dhacdaasi waxay ahayd dhacdo argagixiso tii ugu dhimashada badnayd ee ka dhacda Soomaaliya ilaa waqtigan, haddana inkasta oo Al Shabaab aanay sheeganin mas'uuliyaddeeda, waxay horay u geysatay weeraro kaas lamid ah oo ay la beegsatay goobaha dadka rayidka ah ee Muqdisho ku yaal.⁶⁶

“ 20kii Disembar 2016, subaxnimadeedii, shan qofood (laba odayaal ah iyo saddex wiil oo yaryar oo da'doodu kala ahayd 9, 12, iyo 13 sanadood) ayaa la dilay. Dhamaantood waxay ahaayeen xoolo dhaqato. Waxay geeleena daajinayeen duurka markii rag hubeysan ay weerar ku soo qaadeen, dhamaan shantoodii waxaa la iskugu geeyay hal meel, waa la isku xirxiray kadibna waa la toogtay. Sidoo kale waxay maleeshiyaadku kaxaysteen dhamaan geelii. Dhamaantood isku beel ayaan ahayn (Cowrmale) mid kamid ahna wuxuu ahaa walaalkey iga yar. Al Shabaab waxay beegsanaysaa dadkeena sababtoo ah odayaasheenii ayaa diiday inay geel u siiyaan 'Zako' ahaan”. – Ruux goobjoog u ahaa weerarka Al Shabaab ee ka dhacay Silow, Jubbada Hoose, 20kii Disembar 2016. ”

56. Lagasoo billaabo Janaayo 2016 ilaa 14kii Oktoobar 2017, sideed weerar oo dhinacyo badan oo loo aaneeyay Al Shabaab ayaa ka dhacay Muqdisho (todobo ayaa ka dhacday) iyo Baydhaba (hal), waxaana ka dhashay khasaaro soo gaartay 363 dad rayid ah (93 dhimasho ah iyo 270 dhaawac ah).⁶⁷ Jubbaland, waxaa Al Shabaab loo aaneeyay 10 Qaraxyo loo adeegsaday walxaha qarxa iyo sideed bambaanooyinka gacmaha laga tuuro ah waxayna ka kala dheceen gobollada Gedo iyo Jubbada Hoose, waxaana ka dhashay khasaaro soo gaaray 76 dad raid ah (19 dhimasho iyo 57 dhaawac ah).
57. Ururada bulshada ee Soomaaliyeed waxay wajahayaan caqabado fara badan iyo khataro iyagoo dowlad muhiim ah ka cayaaraya horumarka dalka iyo wax ka qabashada arrimaha badbaadinta. Ururo bulsho oo aan tiro badnayn ayaa ka hawl-gala goobaha ay gacanta ku heyso Al Shabaab, waxayna ururadaasi u hawl-galaan si is-muujiin la'aan ah. War badan lagama hayo in Al Shabaab ay beegsato ururadaas, laakiin Al Shabaab waxay si weyn u beegsataa goobaha ay ka hawl-galaan ama ay deganyihiin saraakiisha dowladda iyo dhiggooda. Tusaale ahaan, Agaasimaha Fulinta ee Ururka Badbaadinta iyo Horumarinta [dadka] Soomaaliyeed ee loosoo gaabiyo (OSPAD) ayaa la dilayn waxaana la dhaawacay saddex qofood oo u dhaq-dhaqaaqa arrimaha bulshada oo ka kala tirsanaa saddex urur oo kala duwan, dhibtaas oo ka dhalatay weerar dhinacyo badan oo Al Shabaab ku qaaday Hotel Ambassador ee magaalada Muqdisho bishii Juun ee sanadkii 2016.
58. Wadarta ugu yaraan 594 ayaa ahaa khasaare gaaray dad rayid ah (251 dhimasho iyo 343 dhaawac ah) waxana loo aaneeyay maleeshiyaad ay dhex mareen colaado hubeysan, taas oo bologlkiiba 13 ka noqonaysa wadarta khasaaraha. Abaartii ayaa sii hurisay colaado beeleedyada maadaama lagu kala tartamayay kheyraadka, iyadoo isku dhacyada beelaha ay dhaceen rubicii labaad ee sanadka 2017ka (bilaha April, Maarso iyo May) ay sababeen khasaaraha 144 dad oo rayid ah. Labo isku dhac oo waaweyn maleeshiyaadka Gaaljecel iyo Jajele ku dhex maray deegaanada HirShabelle ayaa

66 Al Shabaab si rasmi ah uma sheeganin mas'uuliyadda weerarka, laakiin waxay uga hadleen mid kamid ah barhooda internetka: <http://somalimemo.net/articles/8110/Abuu-Mansuur-Oo-Magaalada-Xudur-Gaaray-iyo-Saraakiil-Itoobiyaan-Ah-Oo-Soo-Dhaweeyay-Sawirro>, <http://somalimemo.net/articles/7848/Khasaaraha-Ka-Dhashay-Qaraxii-isgoyska-Zoobe-Oo-Sii-Kordhay>, <http://somalimemo.net/articles/7897/Al-Jazeera-Qaraxii-Ka-Dhacay-Zoobe-Waxaa-Lagu-Beegsan-Rabay-Saldhigga-Turkiga>.

67 Afar weerar oo iskugu jiro kuwo dhinacyo badan iyo kuwo si-miidaamin ah ayaa ka dhacay Jubbaland waxaana ka dhashay sagaal khasaare oo soo gaaray dad rayid ah (saddex dhimasho ah, lix dhaawac ah). 31kii Maarso 2016, afar qofood oo rayid ah, oo ay ku jiraan labo caruur ah oo kala jiray da'da 10 iyo 13 sanadood, iyo labo ganacsato ah, ayaa dhaacmay kadib markii qof is-miidaamiyay oo isku soo xiray suunka qaraxa uu is-qarxiyay, sida la sheegayna uu bar-tilmaameedkiisu ahaa Agaasimaha maaliyadda ee gobolka Mudug, Gaalkacyo. 23kii May 2017, waxaa la dilay saddex rayid ah, waxaana la dhaawacay shan kale, kadib markii qof is-miidaamiyay oo ka tirsan kooxda la baxday Dowladda Islaamiga ah uu waxyaabaha qarxa iskula qarxiyay bar koontarool oo ku taal Bosaaso, gobolka Bari.

sababay khasaaraha 79 dad rayid ah, halka isku dhacyo kale oo beelaha Duduble iyo Ceyr ku dhex maray deegaanada Galguduud, ay sababeen khasaaraha 14 dad rayid ah.

59. Somaliland gudeheeda, isku-dhacyada beelaha ayaa ah sababta ugu weyn ee khasaaraha dadka rayidka ah. Gaar ahaan, dagaal beeledka gobolka Sool (deegaan ay ku muransanyihiin Somaliland iyo Puntland) una dhexeeyay jufooyinka Qayaad iyo Bahararsame ee beesha Dhulbahante (Daarood) ee ka dhacay Laascaanood, ayaa lagu dilay 78 qofood⁶⁸ (oo ay ku jireen saddex haween ah) ilaa iyo markii ay colaaddu bilaabatay sanadkii 2016.⁶⁹

1. Hababka kale ee ay ku dhacaan weerarada

60. Muddadii ay socotay dib-u-eegista, Al Shabaab iyo Kooxada Xiriirka la leh Dowladda Islaamiga ah ee ka hawl gasaha Puntland ayaa fuliyay weeraro dhulka ah [toos ah] oo ay ku qaadeen fariisimo ciidan waxana ka dhashay khasaaraha dad rayid ah oo gaaraya 383 (132 dhimasho iyo 251 dhaawac). Dadka rayidka ah ayaa inta badan ku waxyeelooba rasaasta ay is-weydaarsanayaan Al Shabaab iyo ciidamada amniga. Dadka rayid ah ee ku nool goobaha ku dhow saldhigyada ciidan ayaa ah kuwo si gaar ah u nugul, sida horay loogusoo faah-faahiyay dhacdadii dhacday 8dii Juun 2017, ee saddex haween oo rayid ah lagu dilay, halka saddex kalena lagu dhaawacay markii Al Shabaab ay weerareen xero ciidan oo ku taal gobolka Bari. Dhibanayaashu waxay ku noolaayeen xerada dhineceeda waxayna sahay iyo badeecooyin u daabuli jireen askarta.

61. Waa sidoo kale la diiwaan-geliyay dhowr dhacdooyin oo la xiriira miinooyinka dhulka lagu aaso oo ay aaseen kooxo hubaysan. Miinooyinka dhulka lagu aaso waxaa intooda badan la dhigaa waddooyinka ay adeegsadaan kolonyada ciidamada amniga, gaar ahaan AMISOM. 6dii April 2017, lix haween ah ayaa la dilay, afar kalena waa dhaawacmeen markii miino dhulka lagu aasay ay la qaraxday gaari caasi ah [minibus] tuulda Golweyn, ee degmada Marka, ee gobolka Shabeellaha Hoose. Puntland, bambo/qarax lagu aasay waddada dhineceeda ayaa waxaa ku dhintay laba qof oo rayid ah deegaanka Buuraleyda Galgala, oo 37 kilo-mitir koonfur uga began Bossaso, gobolka Bari, 30kii May 2017.

62. Al Shabaab waxay mas'uul ka ahayd 86 dilal qorsheysan ah iyo khaarjinta 46 qofood muddada warbixintan. Al Shabaab waxay u beegsataa dadka rayidka ah sababo la xiriira mucaamalka dadka rayidka ah kala dhexeeya hay'adaha dowladda, iyo dhaqdhaqaaqooda bulsho iyo kan siyaasadeed,⁷⁰ ama in dadka rayidka ah ay ka qayb-qaataan hawlo ay mamnuuceen Al Shabaab, sida ka-ganacsiga dhuxusha.⁷¹ Dhibanayaasha waxaa kamid ahaa madax lasoo doortay, shaqaale dowladeed, madax

68 Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Somaliland ayaa beenisay in deegaanada Sool ay yihiin "deegaano lagu muransanyahay", waxayna aaminsantahay in tirada khasaaraha rayidka ah "laga bad-badiyay" (eeg Lifaaqa).

69 Bishii Juun 2016, kadib go'aankii Maxkamadda Shareecada iyo guddigii dhex-dhexaadintu ku gaareen in lasoo afjaro dagaalka Koonfurta Laascaanood, ayaa waxaa billowday wadaxaajood u dhexeeya labada dhinac, waxaana goobjoog ka ahaa wadaxaajoodka Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Somaliland. https://www.youtube.com/watch?v=w54mrxQj_Og

70 Waxaa la beegsaday toban qofood oo iskugu jiray odayaal dhaqameedyo iyo ergo doorasho xilligii doorashooyinka 2016. <http://radioalfurqaan.com/wp-content/uploads/2016/03/Qeybta-1-aad-ee-wareysiga-Sh-Cali-Dheere-15-03-2016.mp3> Afhayeenka Al Shabaab ayaa u hanjabay hoteellada iyo doorashooyinka. http://f.top4top.net/m_262mrsj1.mp3 Afhayeenka Al Shabaab ayaa diray hanjabaado ku aaddan doorashooyinka.

71 Jubbaland, 29 qofod oo ka ganacsata dhuxusha ayaa Al Shabaab waxay ka dhigtay wax ay disho iyo wax ay dhaawacdo, 80 boqolkiiba dadkaasi waxay ku sugnaayeen degmada Badhadhe, gobolka Jubbada Hoose. Maarso 2016, Al Shabaab ayaa dishay sideed, waxayna dhaawacday 13 qofood oo ka shaqaynayay dhuxusha magaalada Burgabo, degmada Badhadhe.

dhaqameedyo beeled iyo dad kale oo caan ah. Weeraradaas intooda badani waxay ka dheceen Muqdisho iyo xarumo kale oo dadku ku badanyahay oo ku yaalla Soomaaliya.

63. UNSOM waxay diiwaan-gelisay toogasho ay Al Shabaab kula dhaqaaqeen 32 qofood oo ay ku rideen “xukun” ay usoo mareen nidaamkooda garsoor ee is-bar-bar yaalla,⁷² waxaana sida lasoo weriyay ay ku eedeeyeen basaasid iyo xog-siinta hay’adaha maamul/dowlad ama ciidamada amniga qaran ama kuwo caalami ah, iyo xataa xubno ka tirsan Al Shabaab oo lagu tuhmay inay goosan rabeen. Hababka khaarijinta waxaa kamid ah toogasho rasaas-ku-furid ah iyo qoor-goyn.⁷³ Marka la fulinayo khaarijinta waxaa inta badan lagu khasbaa dadweyne fara badan inay kasoo qayb-galaan.
64. Al Shabaab ayaa sidoo kale fulisa ciqaab jirka bani’aadamka loo geysto iyo jar-jaridda xubnaha bani’aadamka iyadoo u eegeysa hadba sida ay u fasirtaan Qaanuunka Shareecada. Toddobo dhacdo oo jar-jarid xubnaha jirka bani’aadamka ah ayaa lasoo weriyay, oo sida loo badinayo lagu ciqaabayay falal dhac ah, waxaa sidoo kale dadweynaha hortooda lagu karbaashay shan qofood (oo ay ku jirtay hal haween ah) kadib markii lagusoo eedeeyay dhaqan xumo ama dhaqan aan habboonayn.

2. Af-duubka La-xiriira Colaadaha ee loo geysto Dadka Rayidka ah

65. UNSOM waxay diiwaan-gelisay 729 af-duub oo Al Shabaab kula kacday dad rayid ah muddadii u dhexeysay 1dii Janaayo 2016 iyo 14kii Oktoobar 2017. Ujeeddada af-duubka ayaa caadiyan ahaa sababo la xiriira ka hor-imaanshaha amarrada iyo xeerarka Al Shabaab, sida xilliyada ay ururinayaan canshuurta (Zakat) markaas oo lasoo xiro dadki awoodi waaya inay bixiyaan ilaa ay canshuurtasi ka bixiyaan qoyska ama beesha uu ka dhashay qofka la xiray, ama waxaaba dhacda in Al Shabaab ay af-duubato caruur si ay u qorato oo ay u askarayso. Bishii Luulyo ee sanadkii 2017, Al Shabaab waxay af-duubatay 412 qofood, oo caruur u badnaa. Sanadkii 2016, 86 shaqaale oo ka shaqeynayay dhuxusha ayaa lagu af-duubtay Jubbada Hoose sababo la xiriira inay faraha kula jireen ka-ganacsiga dhuxusha oo ay mamnuucday Al Shabaab. Waxaa la beegsadaa dadka lagu tuhmo inay wada-shaqayn kala dhexeyso dowladda ama ciidamada caalamiga ah ama xubno qoyskooda ama beelhooda ah ay xiriir la leeyihiin dowladda ama ciidamada caalamiga ah. Tusaale ahaan, muddadii u dhexeysay bilihii Luulyo iyo Disembar ee 2016ki, Al Shabaab ayaa waxay beelaha Cawramale ku eedeysay la-shaqaynta maamulka Jubbaland waxayna si aar-goosi ah u dishay 14 xoolo-dhaqato ah, waxayna af-duubatay sideed kale.
66. 729ka qofood ee Al-Shabaab af-duubatay, 403 kamid ahaa waaa lasoo daayay sida la sheegay, caadiyan waxaa siideynta wada-xaajood ka gala odayaal dhaqameedyo waxaana sida dhacda lagu bedeshaa lacag iyo hub.⁷⁴ 3dii April 2016, kadib wada-hadallo deegaanada Jubbaland lagula galay odayaal dhaqameedyo, ayaa Al Shabaab kusii deysay 50 shaqaale oo ka shaqeynayay dhuxusha kuwaa oo 10 maalmood ka hor ay af-duubatay. Sanadkii 2017, Al Shabaab ayaa af-duubatay 35

72 Sagaak iyo Toban sanadkii 2016, iyo 13 sanadkii 2017.

73 19kii Janaayo 2016, Al Shabaab ayaa gobolka Gedo ku toogatay oday 65-sano jir ah oo xoolo dhaqato ahaa oo ay ku eedeeyeen inuu hooy ama gabaad siiyay afar askeri oo kamid ah Ciidank Difaaca Kenya ee AMISOM, kadib weerar lagu qaaday saldhigga Ciidanka Kenya ee deegaanka Ceel Cadde. 22kii April 2016, Al Shabaab ayaa degmada jilib ku toogatay shan haween ah oo markaas aqal galay waxayna ku eedeeyeen inay u basaasayeen ciidamada shisheeye iyo maamulka Jubbaland. Bilihii Oktoobar iyo Nofembar ee sanadkii 2016, lix rag ah, oo ay ku jiraan mid Kenyan ah iyo mid Tanzanian ah, ayaa lagu kala toogtay degmooyinka Jilib iyo Saakow, ee gobolka Jubbada Dhexe. 5tii Febraayo 2017, magaalada Jamaame, ee gobolka Jubbada Hoose, Al Shabaab ayaa dadweynaha hortooda madaxa uga goysay afar rag ah oo rayid ahaa oo ay ku eedeeyeen wada-sahqayn ay la lahaayeen maamulka Jubbaland.

74 13kii Agosto 2016, Al Shabaab waxay sii deysay shan odayaal dhaqameedyo ah, oo sida la sheegay ay ku bedesheen qoryo AK-47s ah.

shaqaale oo gargaar bani'aadan u fidinayay dad ay abaartu saameysay oo ku sugnaa gobollada Gedo iyo Hiiraan, kuwaa dhamaantoo lasii daayay markii dambe.⁷⁵

3. Cafiska Guud

67. Iyadoo qayb ka ah dagaalka ay kula jirto Al Shabaab, ayaa Dowladda Soomaaliya waxay ku dhaqaaqday inay cafis fidiso, taas oo looga dan leeyahay in la dhiiri-geliyo kasoo-goosashada xubnaha kooxda ay kasoo goosanayaan Al Shabaab. Si kastaba ha ahaatee, ma jiraan wax hab-samayn sharci ah ama hab loo maro cafiska [guud]. Diiwaanku wuxuu tilmaamayaa in cafiskii ugu horreeyay ee rasmiga ahaa la bixiyay 3dii Janaayo ee sanadkii 2011 waxaana cafiskaas fidiyay Golihii Wasiirrada ee Dowladdii Federaalka Kumeelgaarka ahayd oo uu markaa Ra'iisul Wasaare ka ahaa Madaxweynaha hadda talada haya ee Maxamed Cabdullaahi Farmaajo. Bishii April 2017, Madaxweynaha ayaa mar kale cusbooneysiisay, isagoo soo marsiiyay warbaahinta, fidintiisa cafiska guud ee muddo saddex bilood ah.⁷⁶ Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka aah Dowladda Federaalka ah ayaa iyaguna fidiyay cafis guud.⁷⁷
68. Ma jirto siyaasad dhamays-tiran oo lagu maareeyo cafiska, inkasta oo uu jiro Barnaamij Qaran oo loogu talo galay Dagaalamayaasha Ka-tanaazula hawlaha ay ku jireen, barnaamijkaas oo loogu faa'iideeyo dagaallamayaasha khatartoodu hooseyso ee ka soo taga Al Shabaab. Bishii Juun ee sanadkii 2016, Golaha Wasiirada ee Dowladda Federaalka ah ayaa meel mariyay "siyaasadda cafiska", ee uu soo diyaariyay Wasiirka Cadaaladda, waxaana ku jira arrin muhiim ah oo ah in baaxadda hirgelinta cafiska aan lagu darin "dembiyada dagaalka, dembiyada ka dhanka ah bani'aadamka, dembiyada xasuuqa ah, dembiyada la xirira xadgudubka jinsiga, iyo dembiyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqul insaanka iyo sharciga xilliyada colaadaha." Si kastaba ha ahaatee, waxay u muuqataa in cafiska la fidiyay ee afka laga sheegay lana soo marsiiyay warbaahinta ka-hor intii aan la meel marin siyaasaddan, in cafisyadaas aanay ku qotomin hab-samayntan. Tusaale ahaan, Dowladda Federaalka ah waxay cafis guddoonsiisay ugu yaraan afar kamid ahaa xubnihii caanka aha ee Al Shabaab kuwaa oo aan weli lagusoo oogin wax dacwad ah, inkasta oo dhamaantood lagu eedeynayo inay geysteen xadgudubyo halis ku ah sharciga xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada, waxaana xadgudubyadaas kamid ah dil, af-duub, qorista iyo askareynta caruurta, iyo is-hor-taagga hawlaha gargaarka bani'aadanimu.⁷⁸

75 UNSOM waxay diiwaan gelisay afduub loo geystay 36 shaqaale gargaar, 35 kamid ah waxaa afduubtay Al Shabaab, mid kamid ahna waxaa afduubtay maleeshiyo beeleedyo.

76 Wasiirkii hore ee Gaashaandhigga ee Dowladda Federaalka ayaa warbaahinta u sheegay in muddada la kordhin doono.

77 Tusaale ahaan, Madaxweynaha Koonfur Galbeed ayaa xilliyo kala duwan ku dhawaaqay cafis guud, sida xafladdii furitaanka "Aqalka Madaxtooyada" ee laga furay Baraawe 29kii Agosto 2016, iyo xafladdii qalinjebinta saraakiisha Daraawiishta ee ka dhacday Baydhaba bishii Disembar 2014. Sanadkii 2014, Madaxweynaha Puntland, isagoo adeegsanaya warbaahinta, ayuu sheegay in hay'adaha Puntland ay maxkamad la tiigsan doonaan xubin caan ah oo Al Shabaab ka tirsanaa (Maxamed Saciid Atom) oo markaas ka hor isku dhiibay Dowladda Federaalka ah, wuxuuma Madaxweynaha Puntland sheegay in wadaadku uu galay xadgudubyo waaweyn oo ka dhan ah xuquuqul insaanka maadaama uu kooxda Madax uga ahaa Hawlgallada Puntland. Madaxda Puntland ayaa markii dambe u ogolaaday ninka baxsarka ahaa inuu ku noolaado Muqdisho iyadoo la raacayo Cafiskii [saamaxaaddii] Madaxweyne ee lagu dhawaaqay Maalintii 17 guuradii kasoo wareegtay Asaaska Puntland.

78 Hawl-wadeennada sare ee ka tirsanaa Al Shabaab ayaa helay cafis guud: Xasan Daahir Aweys (Madixii Xisbul Islaam) 30kii Juun 2013; Zakariye Ismaaciil Xersi (Madixii Wardoonka), Disembar 2014; Maxamed Saciid Atom (Madixii Al-Shabaab ee deegaanada Puntland), Juun 2014; iyo Muktar Robow (Kuxigeenkii Hogaamiyaha Al Shabaab), 13kii Agosto 2017. Warbixinta Kooxda Cunaqabataynta 2016, S/2016/919, lifaaqa 1.5. Cabdullaahi Cabdi Xaaji, xubin ka tirsanaa Al Shabaab lagasoo billaabo 2006, oo la qabtay bishii Agosto 2015 lana sii daayay iyadoo la tixgelinayo cafiskii guud ee uu fidiyay Madaxweynaha Puntland Cabdiweli Maxamed Cali "Gaas". Waa tusaale kamid ah siyaasadda maamulka Puntland ee ah in "la-qabto lana sii daayo" la-tuhunsanayaasha Al Shabaab, waxaana arrintaan diiwaan-gelinayay Kooxda Kor-joogteynta iyo Cunaqabataynta lagasoo billaabo 2014 (eeg S/2014/726, lifaaqa 1.4 iyo S/2016/919, lifaaqa 1.5).

II. Xadgudubka Jinsiga Iyo Xadgudubyada Saameeya Caruurta Ku Nool Meelaha Colaaddu Ka Jirto Ee Soomaaliya

A. Xadgudubyada Jinsiga

69. Khilaafka joogtada ah ee ka socda Soomaaliya wuxuu dhaliyey baahsanaanta xadgudubyada jinsiga ee ka dhanka ah haweenka, ragga, wiilasha iyo gabdhaha, haweenka iyo gabdhaha oo uu si gaar ah u saameeyey. Amni-darrada sii socota, sarreynta sharciga oo liidata iyo helitaan la'aanta gargaarka bini'aadiminimo ayaa sii xumeeyay xadgudubka jinsiga. Sinnaan la'aanta jinsiga,[ama arrimaha dhedig-labka], isu-dheeli-tirnaanta awoodaha, horumarka gaabis ah xagga fulinta waajibaadka Soomaaliya ka saaran heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, barakicinta tiro badan oo dad ah sababo la xiriira colaadda iyo abaaraha, iyo weliba soo celinta qoxootiga ka imaanaya Kenya ee intooda badan ay kusoo noqonayaan magaaloyinka Baydhaba, Luuq iyo Kismayo, arrimahaas oo dhan ayaa waxay gacan ka geysanayaan abuurista jawi dumarka iyo gabdhaha ay si gaar ah ugu nugul yihiin xadgudubyada ku salaysan jinsiga, oo ay ku jiraan rabshadaha xadgudubyada la xiriira galmada iyo ka faa'iideysiga galmada iyo ku-takri-falka. Haweenka iyo gabdhaha barakacayaasha ah ama ka soo jeeda beelaha laga awooda badan yahay ayay soo gaartaa dhibaata ugu badan, waxaana taas ugu wacan hababkii badbaadinta oo aan ahayn kuwo waafi ah oo ku filan, in aanay jirin amay yartahay sida lagu helo hababka cadaaladda ee rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, iyo in ay yartahay badbaadadii ay ka heli lahaayeen beelaha.
70. Hababka Kor-joogtaynta, Falanqaynta, iyo Ka-warbixinta (MARA)⁷⁹ waxay heshay warbixinno ku saabsan Rabshadaha Galmada ee La-Xiriirra Colaada (CRSV) oo ay ka heshay UNSOM iyo Koox-Hawleedka Dalka u Qaabilsan Kor-joogtaynta iyo Ka-warbixinta Caruurta iyo Colaadaha Hubeysan (CTFMRM)⁸⁰. Muddadii la diyaarinayay warbixintan, UNSOM waxay diiwaankalisay 35 kamid ah dhibbanayaasha CRSV oo ka kooban 32 dumar ah iyo saddex rag ah, 14 ka mid ahi waxay ahaayeen carruur (11 gabdhood iyo saddex wiil)⁸¹. kuwa dhib geystay waxaa ka mid ahaayeen Ciidanka Difaaca Qaranka Itoobiya ee ka tirsan AMISOM, Ciidamada Daraawiishta ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, SP, rag hubaysan oo xiran dhar ciidan, oo aan heybtooda la garan, xubno ka tirsan CXD iyo Al Shabaab⁸². Taas barbar-dhigeeda, CTFMRM waxay diiwaan gelisay 228 dhacdooyin kufsi iyo noocyo kale oo xadgudub jinsi ah oo miisaankoodu gaarsiisanyahay CRSV, oo saameeyay 230

79 Nidaamka Maaraynta Macluumaadka Xadgudubyada Jinsiga ku salaysan ee UNPFA wuxuu ururiyaa macluumaad dheeraad ah oo lagu daro MARA ujeedooyin wargelineed iyo jawaab-celinta barnaamijeed dartood. .

80 Farqiga u dhexeeya tirooyinka CRSV, MARA, UNSOM iyo CTFMRM waxay ku xiran tahay siyaabaha farsamo mid kasta uga shaqeeyo Soomaaliya iyada oo ku xiran ammaanka iyo helitaanka. Macluumaadka ay qabteen CTFMRM waxaa laga helay kooxo kormeera ka shaqeeya goobaha colaaduhu saameeyeen. Waxay awood u leeyihiin inay gaaraan bulshooyinka dhulkaas taasi oo u suuragelinaysa helitaanka xog aad u badan. Macluumaadka ay soo ururisay UNSOM iyo MARA waxaa badanaa laga soo ururiyaa warbixinno laga helay ilo kala duwan oo u yimaada Qaramada Midoobay. Waxana socda dadaalo lagu midaynayo xogahaas.

81 UNSOM waxay billaabatay diiwaangelinta kiisaska CRSV bishii Sebtembar 2016 ka dib markii la hirgeliyay xoojinta hawlaha ilaalinta ee qaybta xuquuqda aadanaha.

82 22kii Luulyo 2016, wiil ayaa waxaa kufsaday laba xubnood oo Al Shabaab ah oo u dhow magaalada Afgooye ee gobolka Shabeellaha Hoose. Waxaa lagu eedeeyay in uu haysto fiidiyoowyo ay ku jiraan sawirro qaawan oo qaniisnima ah. Mid ka mida kuwa dambilaayaasha ah ayay al-shabab dhagax ku dileen halka uu asxaabtiisana lagu hayo xabsiga Al-Shabaab. 10kii Janaayo 2017, Al Shabaab waxay si bareer ah u kufsadeen una dileen labo rag, 15 iyo 20 sano jir, oo ku saabsan dhaqanka qaniisnimada, gobolka Jubbada Hoose. 14kii Oktoobar, saddex askari oo ka tirsan ciidamada SNA ayaa kufsadey wiil 11 jir ah oo ku nool xaafada Hawo tako ee gobolka Beledweyne, gobolka Hiiraan. Taliyaha SNA waxa uu xiray askarta lagu aqoonsaday badbaadaha.

gabdhoo⁸³. Kala badh kufsiyada ay diiwaangelisay CTFMRM waxaa geystay xubno hubaysan oo aan la heybtooda la garan.

71. Dhaqanka guurka khasabka ahi waa mid walaac badan leh. MRM waxay soo warisay 18 kiis oo ku saabsan guurka khasab ah kuwaas oo ay ku lug yeeshen xubno ka tirsan CXD (saddex)⁸⁴, Al-Shabaab (13), iyo ASWJ (laba). Tusaale ahaan, 14kii September 2017, xubno aad u hubeysan oo Al Shabaab ka tirsan ayaa gabadh 15-sano jir ah ka afduubtay gurigeeda oo ku yaal xaafadda Waaberi, degmada Ceelbuur, gobolka Galgaduud, waxayna ula dhaqaaqeen meel aan la garanayn ka dib markii aabaheed uu diidey soo jeedin guur oo ka timid mid kamid ah ragga. Ka hor afduubka, kiiska soo-jeedinta guurka waxaa loo gudbiyay “maxkamad” Al Shabaab lahayd halkaas oo gabadha aabeheed uu “maxkamadda” horteeda ku diiday so-jeedinta guurka isagoo u cuskaday in gabadhiisa ay weli yartahay. Markaa kadib, aabihii waa lasoo xiray, waxyar kadibna, gabadhii ayaa la afduubtay.
72. Maamulada dowladda ayaa haweenka Al-Shabaab ku soo rogay ciqaab wadareed, xarig aan loo aaba-yeelin, iyo barakicin khasab ah. Hab-dhaqankaasi waxay u sabababeynayaan in dadka qaraabada la ah xubnaha Al Shabaab ay taageeraan hawlaha dowlad-diidnimada ah, sidaas darteedna ay khatar ku yihiin amniga. Tani waa arrin soo noqnoqota, iyada oo dhacdooyin noocaan oo kale ah la diiwaan geliyey sannadkii 2015⁸⁵. Bilihii Sebtembar iyo Oktoobar ee sanadkii 2016⁸⁶, Maamulka Jubbaland wuxuu amar ku bixiyay in xaasaska Al-Shabaab ay ka baxaan dhammaan goobaha uu gacanta ku hayo maamulku, wuxuuna ugu hanjabay inay si khasab ah uga saari doonaan haddii ay si iskood ah uga bixi waayaan.
73. 7-dii May 2013, DFS iyo Qaramada Midoobay waxay wada saxiixeen War-murtiyeed Wadajir ah oo ku saabsan Xadgudubyada Galmada ee ka dhaca Soomaaliya. Markaa kadib, bishii May ee sanadkii 2014, DFS waxay ansixisay Qorshe-Hawleed Qaran ee Ciribtirka rabshadaha galmada ee Xilliyada Colaadaha (NAP/SVC) iyo istiraatiijiyad dhamaystiran oo looga hortegaayo lagulana dagaallamayo rabshadaha galmada iyo Rabshadaha Galmada ee La-Xiriirra Colaada (CRSV)⁸⁷. Qorshe-Hawleedka waxaa ku jira in adeeg sharci oo lacag la'aan ah loo fidiyo dhibbanayaasha CRSV, qaybaha qaabilsan Colaadaha Ku-salaysan Jinsiga iyo Galmada (SGBV) ee hoos taga Xeer Ilaaliyaha Guud si ay dacwad ugusoo oogaan kiisaska la xiriira CRSV, maxkamadaha guurguura ee meelaha miyiga ah iyo meelaha fog fog si ay u bixiyaan adeegyada cadaaladda, iyo sidoo kale olole wacyi-gelin oo ku saabsan sharciga.⁸⁸

83 Laga bilaabo 1da Jannaayo ilaa 30 Sebtembar 2017.

84 10kii July 2016, MRM waxay soo warisay in gabadh yar oo 15-jir ah lagu khasbay in ay guursadaan askari SNA ah tuulada Busul ee gobolka Gedo, kadib markii askarigu u hanjabay hooyadeed. Wasaaradda Jubbaland ee Jinsiga, Arrimaha Qoyska, iyo Xuquuqda Aadanaha ayaa baartay dhacdadan waxayna ku soo gabogabaysay in sheekada sida horay loogu soo wariyay aysan ahayn mid xaqiiqo ah (eeg lifaaqa).

85 Dhacdooyin dhowr ah ayaa dhacay sanadkii 2015-ka kadib markii 65 looga shakiyay in ay yihiin xaasaska Al-Shabaab laga mastaafuriyay magaalooyinka Kismaayo iyo Afmadoow ee gobolka Jubbada Hoose ee jubaland loona mastaafuriyay deegaanada ay maamulaan Al-Shabaab.

86 Gobolka Gedo, maamulka degmada Baardheere ee maamulka Jubbaland ayaa mudo todoba cisho ah ku siiyay haweenka Al Shabaab inay kaga baxaan magaalada. Ka qayb qaadashada odayaasha beelaha iyo maamulka degaanka ayaa ka hortagay ka-eryidda la qorsheeyey waxayna horseeday in ugu dambeyntii la joojiyo amarkaas 21ka Oktoobar 2016.

87 Horumarinteeda waxaa ku jira Wasaaradaha Difaaca, Caafimaadka, Amniga Qaranka, Cadaaladda, Haweenka, Xuquuqda Aadanaha iyo Horumarinta, Arrimaha Diinta, Waxbarashada, Ciidamada Booliska Soomaaliyeed, Ciidamada Qaranka Soomaaliya iyo Ururada Bulshada Rayidka ah.

88 Taageerada dhibanayaashu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Qorshaha Qaranka; 71 xarumood oo dalka oo dhan ah ayaa taageero siiya dadka ka badbaaday GBV iyo qoysaskooda, oo ay ku jiraan hoy ku meel gaar ah oo loogu talagalay ilaalinta dadka ka badbaaday iyo shan guryo badbaado oo dalka oo dhan ah; 61 dadkii ka badbaaday waxa ay ka faa'iideysteen badbaadin ku-meel-gaar iyo guryo ammaan ah sideedii bilood ee ugu horreeyay sannadkii 2016-ka.

74. Caqabadaha ugu waaweyn ee badbaadinta dhibanayaasha rabshadaha galmada la kulma waxay la xiriiraan awooddaha xadidan ee booliska si ay wax uga qabtaan kiisaska noocaas ah iyo sidoo kale rabitaan la'aan, oo uu ugu horreeyo hoggaanka booliska, oo aan u diyaar ahayn inuu adeegsado nidaamka cadaaladeed ee rasmiga ah ah si wax looga qabto kiisaska xadgudubyada galmada⁸⁹. Bishii Nofeembar 2016, Qaybta Badbaadinta Haweenka iyo Carruurta waxaa laga dhex aasaasay Xarunta Dhexe ee Booliska ee magaalada Muqdisho⁹⁰ iyada oo ay jiraan qorshayaal lagu kordhinayo tirada askarta booliska ee dumarka ah ee ka hawlgala, laakiin waxaa weli meesha ka maqan hantidii iyo xirfadihii lagu baari lahaa warbixinnada la xiriira dembiyada rabshadaha galmada.. Adeegsiga hababka cadaaladda ee ku dhisan dhaqanka ayaa loo arkaa hab fudud oo loogu talagalay oday dhaqameedyada si ay u joogteeyaan saameynta ay ku leeyihiin beelaha dhexdooda iyo inay saameyn ku yeeshaan adeegyada booliska. Helidda xog/macluumaad dhamaystiran oo sax ah oo ku saabsan kiisaska CRSV ee Soomaaliya ayaa weli ah caqabadda ugu weyn sababtoo ah waxaa xaddidan ama aan suurto-gal ahayn in la gaaro meelo badan oo dalka kamid ah iyo in aanay jirin adeegyo loogu talo galay dadka soo badbaaday, iyo sidoo kale nuglaanshaha dadka soo badbaaday ay u nugulyihiin aargoosiga uga imaan kara dembiilayaasha.

B. Carruurta iyo Colaadaha Hubaysan

75. Carruurta ayaa weli waxaa si ba'an u saamaynaya colaadaha daba-dheeraaday. Bilihii Luulyo iyo Agosto ee sanadkii 2012, DFS ayaa saxiixday labo Qorshe-Hawleedyo: mid kamid ah waxaa lagu cirib-tirayaa qorista/askareynta caruurta iyo adeegsigooda, kan kalena waxaa lagu cirib-tirayaa dilka iyo dhaawicidda cauurta. Waxaa la meel-mariyay Siyaasado Gaar ah⁹¹, waxaana la diyaariyay qaab-dhismeedyo iyo habab⁹² lagu horumarinayo tayada, lagu abuurayo wacyi-gelin, laguna taageerayo dadaallada maamulada. Intaas waxaa sii dheer, UNSOM ayaa waxay ku taageertaa CXD dhiiri-gelinta iyo baaritaanka askarta si loo xaqiijiyo inay ka maran-yihiin [oo aanay ku jirin] caruur. Taageeradaas waxaa kamid ah kor-joogteynta isku-dhafka ciidamada gobollada ee lagu biirinayo CXD, iyo sidoo kale in lala shaqeeyo ciidamada gobollada ee aan weli la rasmi noqon.⁹³

76. Inta badan xogta iyo macluumaadka lagu soo bandhigay cutubkan waxaa diiwaangeliyay oo hubiyay Koox-Hawleedka Dalka u Qaabilsan Kor-joogtaynta iyo Ka-warbixinta Caruurta iyo Colaadaha Hubaysan (CTFMRM). Kiisaska badankood waxaa ku lug lahaa Al-Shabaab, ASWJ, iyo CXD, iyadoo Al Shabaab ay mas'uul ka ahayd 60 boqolkiiba xadgudubyada.⁹⁴

77. Dhamaan dhinacyada ku lugta leh colaadaha waxay qorteen carruur. Tirada carruurta la qortay ee la adeegsaday ayaa laba-laabantay (1,915) marka loo barbardhigo sannadkii 2015-ka, taas oo keentay

89 Wax ka qabashada rabshadaha galmada la xiriirta colaadda waxay u baahan tahay in saddex arrimood oo muhiim ah la xaliyo: gaaritaan la'aanta qaybo badan oo dalka ka mid ah; warbixinadda ku saabsan rabshadaha galmada la xiriirta colaadda oo yar isla markaana sii xumeeynaya hanjabaadaha badbaadayaasha; iyo nidaam sharci iyo mid hay'adeed oo aan ku filnayn wax ka qabashada rabshada galmada.

90 Iyadoo la raacayo Habka Booliska ee cusub oo ujeedkiisu yahay dhisidda awoodda booliska iyo hagaajinta dheelitirka jinsiga ee booliska. Jubbaland, Xarumaha Jinsiga ayaa laga aasaasay afar saldhig booliis oo ku yaalla Kismaayo, oo ay ku jiraan laba kamid ah xeryaha barakacayaashu.

91 2014 nidaamka hawlgalka ee caadiga ah (SOP) ee soo qaabilaada iyo gudbinta carruurta horeyna ula xidhiidhay kooxaha hubaysan; liiska hubinta ee caadiga ah ee go'aan ka qaadashada da'da; 2016 Amarka Guud ee ku saabsan siyaasadda qorista ee mamnuucaya shaqaaleynta kuwa aan qaan-gaarin.

92 Horumarkan waxaa ka mid ah: i) Guddiga Wadajirka ee DFS / UN ee ka shaqeeya fulinta qorshe hawleedka, ii) Dejinta Qaybta Ilaalinta Carruurta ee Wasaaradda Gaashaandhigga iyada oo loo magacaabay wakiilo millatariga ah, ii) abuuritaanka Koox Wadajirka oo ka kooban DFS / Qeybta Badbaadada Caruurta iyo kooxda wareegta ee Qaramada Midoobay u qaabilsan hubinta caruurta..

93 Tusaale ahaan, 235 ka mid ah 310 xubnood ee ka tirsan Ciidanka Booliska Gaarka ah ee Koonfur Galbeed (SWSPF) ayaa lagu sameeyay baaritaan, waxana laga helay laba wiil oo da'doodu loo aqoonsaday inay ahayd 16 jiro waana laga saaray ciidanka 17kii Maajo.

94 Al-Shabaab waxa lagu qoray lifaaqyada warbixinta sannadlaha ah ee Xoghayaha Guud ee sannadka 2016 ee ku saabsanaa carruurta iyo iskahorimaadka hubaysan ee qorista, isticmaalka, dilka, dhibaateynta iyo afduubidda carruurta. CXD ayaa weli ku baaqiya liiska qorista, isticmaalka, dilka iyo dhibaateynta carruurta, halka ASWJ ay ku baaqi tahay liiska qorista iyo isticmaalka carruurta.

koror laba laab ah kiisaska loo aaneynayo Al Shabaab (1,206)⁹⁵. Sidaa daraadeed, Al-Shabaab ayaa ku qoran liiska warbixinta sannadlaha ah ee Xoghayaha Guud ee sannadkii 2016 ee ku saabsanayd carruurta iyo colaadaha hubaysan, qorista, adeegsiga, dhilka, dhaawiciddooda, iyo afduubka carruurta. CXD ayaa weli ku jira liiska dhinacyada loo aaneeyo qorista caruurta, adeegsigooda, dilkooda iyo dhaawiciddooda, iyadoo ASWJ ay ku jirto liiska dhinacyada loo aaneeyo qorista iyo adeegsiga caruurta. Intaa waxaa sii dheer, carruurta waxaa soo gaara waxyeellada xadgdubyo culus inta lagu guda jiro hawlgallada ciidan, oo ay ku jiraan dil iyo dhaawicid, iyo xarig iyo xabsi gelin ay kula dhaqaaqaan ciidamada amaanka ee Soomaaliya marka ay socdaan hawl-gallo iyo baaritaano ciidan. Warbixinnada ku saabsan qorista carruurta ayaa korortay 269 boqolkiiba iyadoo sanadkii 2015 aya ahayd (903 kiisas) ilaa 2017 (3,335). Sanadkii 2017, 71.5 boqolkiiba qorista waxaa loo aaneeyey Al Shabaab, 14.6 boqolkiiba waxaa loo aaneeyay maleeshiyo beeleedyo, halka 7.4 boqolkiiba loo aaneeyay CXD.⁹⁶

78. Al Shabaab waxay olole caruur qorasho ah ka samaysay deegaanada Dowlad Goboodka Galmudug iyo gobolka Jubbada Hoose sanadkii 2016 markalena Galmudug sanadka 2017ka. Xaaladda dambe, Al Shabaab waxa ay ku khasabtay odayaal ka kala yimid tuulooyin kala duwan inay keenaan caruur ku biirta kooxda oo lagu tababaro xeryo ciidan⁹⁷. Al Shabaab waxa ay caruurta inta badan ka qortaa degaannada miyiga ah ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya waxayna kasoo qorataa dugsiyada waxbarasho, malcamadaha, masaajidada, iyo xafladaha diiniga ah. Saboolnimada iyo fursad la'aanta ayaa kooxda fursada u siisay inay si fudud uqorato caruurta.⁹⁸

79. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli walaac weyn ka jiraa halbeegga habraacyada hawlgallada ee loogu talo galay la-wareegidda iyo sii gudbinta caruurta horay uga midka ahayd kooxaha hubaysan, iyo in ciidamada amniga iyo Al Shabaab ay si sharci darro ah caruurta uga qaadaan xorriyaddooda. Tiro caruur ah oo gaareysay 581 oo la xiray sanadkii 2016 (oo ay ku jireen 21 gabdhood), ayaa 70.9 boqolkiiba waxaa hayey CXD, halka 14.9% ay hayeen Al-Shabaab⁹⁹. Wadar ahaan, 110 carruurtaas ayaa waxaa lagusoo qab-qabtay hawlgallo amni oo ka dhan ah Al Shabaab oo ka dhacay Puntland¹⁰⁰. Markii hore waa la maxkamadeeyay waxaana loo xukumay sida dad waaweyn oo kale, iyadoo sagaal kamid ah ay maxkamad ciidan ku xukuntay dil, ka-hor intii aan xukunkooda la khafiifin oo aan laga dhigin 10-20 sanadood oo xabsi ah, halka 27 kale, oo da'doodu u dhaxaysay 15 iyo 17, ay maxkamad ciidan ku xukuntay 10 ilaa 20 sanadood oo xarig ah. Dhammaan carruurtaas ayaa markii dambe loo wareejiyay xarumo dhaqancelin oo ku kala yaalla Muqdisho iyo Garoowe¹⁰¹.

80. Sannadkii 2016, CTFMRM waxay xaqiijisay dil iyo dhaawicid loo geystay 1,847 carruur ah, waxaana dhacdooyinkaas intooda badan loo aaneeyay kooxo hubaysan oo aan heybtooda la garan (44.1

95 Warbixinta Sanadlaha ah ee Xog-hayaha Guud ee ku saabsan Carruurta iyo Colaadaha Hubaysan - 2016, S / 2017/821, para. 134

96 Sanadka 2016 iyo 2017, 258 carruur ah ayaa waxaa soo qortay CXD. ASWJ (3.8 boqolkiiba); Galmudug, Jubbaland iyo ISWA waxay ka muuqdeen wax ka yar 1 boqolkiiba mid kasta (xogta CTFMRM).

97 Bishii Maarso 216, Al-Shabaab ayaa lagu soo wargeliyay in 60 carruur ah ay ka diiwaan gashey xerada tababarka Al-Shabaab ee Jilib, gobolka Jubbada Dhexe. Bishii Luulyo 2016, kooxdu waxay cadaadis saartay odayaasha qabiilka Cowrmale ee Hawiye ee Jubbada Hoose si ay u siiyaan wiilasha da'doodu u dhaxayso 10 iyo 17 sano. Odayaashu way diideen waxaana loo soo wargaliyay in ay bixiyaan 360 geel ah iyo 120 dhalinyaro. Bishii Sebtembar 2016, Al Shabaab waxay ku qasbeen odayaasha degaanka Galmudug inay siiyaan 100 wiil, oo loo wareejiyay xerada tababarka milatari ee Khalid Bin Walid ee degmada Ceel Buur. Bishii Juun 2017, Al-Shabaab ayaa lagu soo warramey inay si qasab ah ugu qorayso carruurta dugsiyada Al-Shabaab ee Galmudug.

98 Carruurta la xiriirta Al-Shabaab oo la qabtay bishii March 2016-kii, maamulka Puntland ayaa sheegay in Al-Shabaab ay u ballan-qaadday waxbarasho iyo hab-nololeed si ay u qortaan, halka xaaladaha kale carruurta loo isticmaalay inay inay qalqaaliyaan asxaabtooda inay ku biiraan.

99 Tirada maxaabiista ay hayaan Ciidamada Xooga (405 wiil iyo 7 gabdhood); Alshabaab (76 wiil iyo 11 gabdhood); maleeshiyo beeleedyada (15 wiil iyo 2 gabdhood); ASWJ (12 wiil), Booliska Somaaliyeed (31 wiil), AMISOM (7 wiil), Ciidamada Jubaland (9 wiil), Ciidamada ISWA (2 wiil iyo hal gabar).

100 Puntland si cad uma qeexin cunug ama ilmo yar iyogoo xitaa ay meel mariyeen xeerka nidaamka garsoorka caruurta, dastuurka dawlad goboleedka Puntland iyo Xeerka nimaadka garsoorka caruurtuba wuu ku qeexayaa cunug ama ilmo yar; qofkasta oo ka hooseeya da'da 15 iyadoo ay liddi ku tahay dastuurka dawlada federaalka iyo xeerarka caalamiga ahba

101 44 Galmudug, 66 Puntland.

boqolkiiba)¹⁰², Al Shabaab (24.3 boqolkiiba), CXD (11.2 boqolkiiba), iyo maleeshiyo beeleedyo (10.7 boqolkiiba), Dhibaatooyinka badankood waxay ka dhasheen rasaas ay is-weydaarsanayeen dhinacyo ay dirir ka dhexeysay. Weerarada loo adeegsado hoobiyeyaasha, weerarada loo adeegsado Walxaha Qarxa¹⁰³, iyo dhacdooyin ku lug leh haraadiga walxaha qarxa ee kasoo haray dagaallada ayaa si iskumid ah uga qayb qaata dhibaatooyinka soo gaara caruurta. Caruurta waxaa sidoo kale ay dhibanayaal u noqeen duqeymaha diyaaradaha¹⁰⁴ ee lagu eedeeyo ciidamada MAREYKANKA, Ciidanka Difaaca Kenya, iyo ciidamo kale oo aan la bar-garanin.¹⁰⁵

81. CTFMRM waxay diiwaangelisay kufsiga 535¹⁰⁶ carruur ah (533 gabdhood iyo laba wiil) iyadoo boqolkiiba 35.8 kuwa geystay kiisaskasi ay ahaayeen kooxo hubeysan oo aan heybtooda la garanin¹⁰⁷. Tirada kasoo hartay ayaa loo aaneeyay maleeshiyo beeleedyo (20.7 boqolkiiba), CXD (21.1 boqolkiiba), Al Shabaab (15.8 boqolkiiba), Ciidamada Dowlad Goboleedyada (8.9 boqolkiiba), ASWJ (0.7 boqolkiiba), AMISOM (0.7 boqolkiiba) iyo Ciidanka Difaaca Qaranka ee Itoobiya (0.1 boqolkiiba).
82. CTFMRM waxay sidoo kale diiwaangelisay 76 dhacdo oo ah weeraro loo geystay dugsiyo waxbarasho iyo 20 dhacdo oo ah weeraro loo geystay isbitaalo¹⁰⁸. Intaa waxaa sii dheer, dugsiyadii waxbarasho ayaa la burburiyay lana bililiqeystay intii ay socdeen iska-hor-imaadyada u dhexeeyay dhinacyada colaaddu ka dhexeysay. Al Shabaab waxay mas'uul ka ahayd 54 weerar oo loo geystay dugsiyo waxbarasho, waxaana kusoo xiga CXD (12), ASWJ (saddex) iyo maleeshiyo beeleedyo (saddex), halka AMISOM, Ciidamada Difaaca Kenya, Ciidamada Qalabka sida ee Koonfur Galbeed iyo kooxo hubaysan oo aan heybtooda la garan uu midkiiba mas'uul ka ahaa min hal weerar oo lagu qaaday dugsi waxbarasho.
83. CTFMRM waxay diiwaan gelisay afduubka 2,265 carruur ah, oo badankood loo aaneeyay inay geysatay Al-Shabaab (1,991), maleeshiyo beeleedyo (119) iyo CXD (108)¹⁰⁹. Sidii hore loo soo sheegay, afduubka waa tab ay Al Shabaab badanaa ugu adeegsato qorista caruurta. Sanadkii

102 Kooxaha hubaysan ee aan la aqoon (816), Alshabaab (449), Ciidanka Qaranka (207), Maleeshiyo beeleedyada (198), AMISOM (60), KDF (17), Ciidamada dawlad goboleedyada (18 Koonfur galbeed 13 Jubaland, 10 Puntland ah iyo 3 Galmudug ah), Ciidanka booliska (11), ASWJ (1) iyo ciidanka maraykanka ee hubaysan oo ah (1)

103 dii Juun 2016, laba wiil (16 jir iyo 17 jir) ayaa la diley saddex kalena waa ay dhaawacmeen markii Al Shabaab ay weerar ku qaadeen hotelka Ambassador ee magaalada Muqdisho. 14kii Oktoobar 2017, 25 carruur ah (15 wiil iyo 10 gabdhood) ayaa la dilay halka 15 kale (10 wiil iyo shan gabdhood) la dhaawacay. Dhacdadan ayaa dhacday ka dib markii weerar baabuur walxaha qarxa laga soo buuxiyay ka dhacay Muqdisho.

104 24kii Maarso 2016, wiil ayaa la dilay shan kalena (oo da'doodu u dhaxayso sadex iyo 14 sano jir) ayaa lagu dhaawacay weerar xaga circa ah oo ay fuliyeen Ciidamada Kenya ee Jubbada Hoose. Ciidamada Kenya waxay sheegteen in ay beegsanayeen xerada milatari ee Al-Shabaab. 15kii Maajo 2016, weerar xiga circa ah waxa lagu dilay wiil 16 jir ah degmada Afoooye ee Shabeellaha Hoose. 22kii Juunyo 2016, afar carruur ah ayaa lagu dilay duqeyntii xaga circa oo ay geysteen ciidama Keynya degmada Ceel Waaq eegobolka Gedo. Natiijooyinkaas waxaa lala wadaagay Xafiiska Jamhuuriyadda Kenya u qaabilsan xarunta Qaramada Midoobey ee New York, iyada oo la raacayo nidaamka warbixinta Xoghayaha Guud ee Carruurta iyo Colaadaha. Xukuumadda Kenya ayaa ka jawaabtay oo beenisay natiijooyinkii. Ka eeg lifaaqa jawaab dheeri ah oo ay bixisay Safaaradda Jamhuuriyadda Kenya..

105 UNSOM waxa ay diiwaan-galisay 29 dhaawac ah (12 qof, 17 dhaawac ah) oo ka dhacay Jubbaland; 11 ayaa loo aaneynayaa hawlgallo dhuleed ama duullaano ay sameeyeen ciidamada shisheeye, sagaal qof oo Al Shabaab ah, iyo mid ka mid ah ciidamada ammaanka Jubbaland. Lix dhaawac ayaa lala xiriiriyay Walxaha qarxa eek a hara dagaalada (ERW) iyo laba kale oo IEDs lagu qarxiyay by weeraro aan la garanayn.

106 Qiyaasta rabshadaha galmada ee saameeya carruurta ayaa la rumeeyan yahay in warbixin yar uun laga bixiyo sababo la xiriira cabsida cambaareynta, aargoosi, iyo la'aanta adeegyo ku filan oo loogu talagalay badbaadayaasha.

107 Dhibaatooyinka ay geysteen kooxaha mucaaradka ah (192 dhibbanayaasha), maleeshiyaadka qabiilka (111), SNA (113), Al-Shabaab (83), ciidamada Jubbaland (19), Ciidamada Koofur Galbeed (19), ASWJ (afar), ciidamada Puntland (laba), Ciidamada Galmudug (saddex), Ciidamada AMISOM ee Guutada Ethiopia(3), Ciidamada AMISOM Djibouti (mid) iyo Ciidamada Ethiopia (mid).

108 15kii Abriil 2016, dugsi hoose ayaa qayb ahaan uu burburiyay madfac ay soo rideen Al-Shabaab ee gobolka Shabeellaha Hoose. 28kii Agoosto 2016, xarun caafimaad oo ku taal degmada Hobyo, gobolka Mudug, ayaa la xiray ka dib markii shaqaaluhu ay la kulmeen hanjabaad dil ah oo uga timid Al Shabaab ka dib dagaallo ka dhex dhacay ciidamada Al Shabaab iyo kuwa Galmudug.

109 Qaar kale waxaa ka mid ah kooxaha hubaysan ee aan la aqoonsaneyn (22), ASWJ (afar), AMISOM (mid), Ciidamada Koonfur Galbeed (saddex) iyo ciidamada booliska (17).

2016kii, 548 caruur ah ayaa waxaa afduubtay Al Shabaab¹¹⁰ si ay u askareeyaan. Kiisaskaas mid kamid ah waxaa lala xiriiriyay rabshadaha galmada ee oo La-xiriira Colaadda (CRSV).¹¹¹

84. Intii u dhaxaysay Jannaayo 2016 iyo September 2017, CTFMR ayaa xaqiijisay 53 dhacdooyin ah oo is-hortaag lagu sameeyay helitaanka gargaar bani'aadanimu. Dhacdooyinkaas waxaa loo aaneeyay Al Shabaab (29), maleeshiyo beeleedyo (16), CXD (afar), kooxo aan la aqoon (laba), Ciidanka Qalabka Sida ee Puntland iyo Ciidanka Qalabka Sida ee Koonful Galbeed (hal midkiiba). Caqabado amni dartood ayaa waxaa suurto geli weysay in la ogaado tirada caruurta ah ee ay saameeyeen dhacdooyinkaas

110 Bishii Luulyo 2016, Al-Shabaab ayaa 123 wiil oo da'doodu ka yartahay 17 jir oo ka soo jeeda deegaanada Ceel Buur iyo Ceel Dheer, gobolka Galgaduud, waxay u qaateen xerooyinka tababarka Al-Shabaab.

111 Bishii Luulyo 2016, labo xubnood oo ka tirsan Al-Shabaab ee ku sugan gobolka Gedo ayaa wiil 16 jir ah afduubatay waa ayna kufsadeen.

III. Talo soo jeedin

85. Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad Goboleedyada Federaalka iyo ciidamada caalamiga ah waa inay horumariyaan, hirgeliyaan, dhinacyada kalena la wadaagaan siyaasadaha hawlgalka iyo tallaabooyin wax ku ool ah si loo xoojiyo ixtiraamka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bini'aadanimada xilliyada colaadaha, kana fogaadaan waxyeellada dadka rayidka ah, iyada oo si dareen gaar ah la siinayo fulinta hawlgallada ciidan ee magaaloooyinka. Gaar ahaan,
86. Dhinacyada colaadda isku haya, oo ay ku jiraan dalalka AMISOM ciidamada/booliska u soo diray waa inay:
- (a) U hoggaansamaan oo xaqiijiyaan ixtiraamka sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee bini'aadanimada xilliyada colaadaha, oo ay ku jiraan amarrada ama jiheynta, iyo inay la xisaabtamaan kuwa beegsanaya, dilaya ama dhaawacaya dadka rayidka ah;
 - (b) Qaadaan dhammaan tallaabooyinka taxadarka ee suurtagalka ah ee lagu ilaalinayo dadka rayidka, gaar ahaan haweenka iyo carruurta, lagana ilaaliyo saameynta hawlgallada ciidamada;
 - (c) Iska ilaaliyaan inay yoolalka/ujeeddooyinka ciidamada dhexdhigaan gudaha iyo meel u dhow goobaha dadka rayidka deganyihiin;
 - (d) Inay joojiyaan ciidamada aan caadiga ahayn, miliishiyoooyinka iyo kooxaha hubaysan u adeegsadaan hawlgallada CXDS iyo AMISOM, ay kala diraan hub ka dhigisna ku sameeyaan dhammaan kooxaha iyo maleeshiyada sharci-darrada ah ee hubaysan;
 - (e) Taageero ku filan siiyaan ururinta nidaamsan iyo falanqaynta macluumaadka ku saabsan ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ka mid tahay xogta oo loo kala soocay jinsiga iyo da'da iyo falanqaynta jinsiga, ayna xaqiijiyaan inay u adeegto oo ay ka mid noqoto falanqaynta, ka hortagga iyo ka jawaabidda colaadda;
 - (f) Xaqiijiyaan in baaritaan wax ku ool ah deg-deg ah, oo madax-bannaan, dhexdhexaad ah, dhameystiran iyo maxkamadeyn lagu sameeyo arrimaha la xiriira eedeymaha qatarta ah ah ee loo aaneeyo AMISOM iyo ciidamada kale ee caalamiga ah, la xisaabtamaan kuwa geystay xadgudubyada, isla markaana siiyaan kaalmo iyo garnaq ku filana dhibanayaasha.
 - (g) Dejiyaan, ayna hirgeliyaan siyaasado wax ku ool ah oo lagu yareeyo khasaaraha, oo ay ka mid yihiin tilmaamo hagid oo lagu go'aamiyo bartilmaameedka.
87. Dhinacyada aan Dowladda ahayn sidoo kale waa inay:
- (a) Joojiyaan isticmaalka dhammaan walxaha qarxa ee macmalka ah (IEDs), iyo weerarrada isku jirka ah, , ayna joojiyaan rididda dhammaan hubka qarxa ee saamaynta ballaaran leh, oo ay ku jiraan hoobiyeyaasha, gantaalada iyo bambo gacmeedyada, oo laga soo rido loona rido meelaha ay dadka rayidka ah deganyihiin;
 - (b) Joojiyaan bartilmaameedsiga ula kaca ah ee dadka rayidka ah (oo ay ku jiraan saraakiisha Dowladda, shaqaalaha rayidka, suxufiyiinta, ururrada bulshada rayidka ah, oday dhaqameedyada beelaha iyo shaqaalaha gargaarka) iyo waxyaabaha/agabka rayidka ah;
88. Intaas waxaa dheer, DFS iyo Dowlad Goboleedyada waa inay:
- (a) Ku biiraan dadaalka caalamiga ah ee sare loogu qaadayo ixtiraamka iyo u hoggaansanaanta sharciga caalamiga ee xuquuqda bani'aadamka xilliyada dagaallada iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha si kor loogu qaado ilaalinta dadka rayidka;
 - (b) Qaadaan tallaabooyin dhab ah oo lagu joojinayo rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha iyagoo si wax ku ool ah u fuliya Qorshe Hawleedka Qaran ee lagu Dhameynayo

rabshadaha Galmada waqtiga Colaadaha oo ay ka mid tahay shirar soo noqnoqda oo uu yeesho Guddiga Qabanqaabada iyo iyagoo baaritaan ku sameynaya dacwadna ku soo oogaya kuwa lagu eedeeyo inay ka dambeeyaan xadgudubyada, oo ay ku jiraan xadgudubyada ay geystaan saraakiisha ciidanka xooga iyo kuwa nabadgelyada, si waafaqsan sharciga caalamiga ah.

- (c) Taageeraan ururinta nidaamsan iyo falanqaynta macluumaadka ku saabsan ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ka mid tahay xogta oo loo kala soocay jinsiga iyo da'da, ayna xaqiijiyaan inay u adeegto oo ay ka mid noqoto falanqaynta, ka hortagga iyo ka jawaab-celinta colaadda;
- (d) Qaataan tallaabooyinka sharci dejin, siyaasadeed iyo sharci fulineed ee lagama maarmaanka u ah si loo xaqiijiyo in in baaritaan deg-deg ah, madax-bannaan, dhammeystiran oo wax ku ool ah lagu sameeyo dacwadna lagu soo oogo kuwa geysta xadgudubyada sharciga caalamiga ee bani'aadanka ee xilliyada dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan kuwa geysta dembiyada khatarta ah;
- (e) Si dhakhso ah, madaxbannaan, wax ku ool leh, hufan oo aan eexasho lahayn baaritaan ugu sameeyaan eedeymaha xadgudubyada sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada xilliga dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee ay geystaan ciidamada amniga iyo kooxaha hubaysan iyo, marka loo baahdo, dacwad lagu soo oogo kuwa lagu eedeeyo dembiyada;
- (f) Sameeyaan habraacyo cadcad oo baaritaan oo lagu aqoonsanayo laguna maxkamadaynayo shakhsiyaadka mas'uulka ka ah xadgudubyada halista ah ee xuquuqda aadanaha, gaar ahaan marka la eego haweenka iyo carruurta;
- (g) Dadka la wadaagaan natiijooyinka hay'adaha loo xilsaaray inay baaraan dhacdooyinka ayna fuliyaan talooyinkooda;
- (h) Ansixiyaan heshiisyada caalamiga ah oo loogu talagalay ilaalinta dadka rayidka, oo ay ku jiraan heshiisyada caalamiga ah iyo heshiis gobolyada xuquuqda aadanaha, iyo Heshiiska Ka Ganacsiga Hubka iyo heshiis goboleedyada la midka ah, ayna xaqiijiyaan in sharciyada qaranka iyo siyaasaduhu ay waafaqsan yihiin waajibaadka caalamiga ah;
- (i) Dardargeliyaan hannaanka sameynta Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha kaas oo ah inuu u shaqeeyo sidii hay'ad madax-bannaan oo waxyaabaha ay qabanayso ay ka mid yihiin, inuu baaritaan ku sameeyo xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee dagaalka dhexdiisa lagu geysto;
- (j) Dejiyaan siyaasad guud oo dhammeystiran oo ku saabsan bixinta cafis la siiyo dadka ka qayb qaatay colaadda, geystayna dembiyada ka dhan ah dadka rayidka, iyagoo maxkamadaynaya kuwa laga yaabo inay masuul ka yihiin xadgudubyada daran ee sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda dadka xilliyada dagaalka, oo ay ku jiraan dembiyada dagaalka iyo dembiyada ka dhanka ah aadanaha; xaqiijiyaan in cafis waliba oo loo fidiyo xubnihii hore ee Al-Shabaab ama ciidamada amniga ee federaalka uu buuxiyo waajibaadka Dowladda ee ku aadan sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada ee xilliga dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee qaxootiga, una hoggaansamo ballan-qaadkeedii ay ku sameysay Shirkii London oo ahaa in aysan taageerin cafis isku duuban oo loo fidiyo kuwa geysto xadgudubyada daran ee xuquuqda aadanaha;
- (k) Xaqiijiyaan la xisaabtanka dembiyada laga galay dadka Soomaaliyeed, oo ay ka mid tahay dib-u-eegista sharciga iyo meelmarinta sharciyo cusub si loo xoojiyo ilaalinta dadka rayidka ah;
- (l) Ka shaqeeyaan horumarinta/xoojinta dib-u-heshiisiin qaran si rabshadaha dalka looga ciribtiro;
- (m) Dardargeliyaan dadaallada hadda jira ee lagu hirgelinayo labada Qorshe Hawleed ee sannadkii 2012kii ee ku saabsan Carruurta iyo Colaadda Hubeysan, oo ay ku jirto in dembi laga dhiyo ciidan ka qorista carruurta iyo adeegsigooda, nidaaminta kala soocidda/baaritaanka askarta iyo fulinta Amarka Taliska 1 ee Taliyaha Ciidamada XDS, ee mamnuucaya oo ciqaabaya ciidan ka qorista carruurta iyo xadgudubyada kale ee halista ah ee ka dhan ah carruurta.
- (n) Xaqiijiyaan in dhibbanayaasha, oo ay ka mid yihiin kuwa loo geystay tacaddiyada galmada iyo rabshadaha jinsiga ku saleysan, ay helaan magdhow, oo ay ku jirto taageero caafimaad iyo mid bulsho;

- (o) La shaqeyaan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah si loo xoojiyo farsamooyinka ilaalinta loona xaqiijiyo u hoggaansamida sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ku jirto hirgelinta Istaraatiijiyada Hawsha Qaran ee Soomaaliya ee sannadkii 2016kii iyo Qorshe Hawleedka Ka Hortagga iyo La-Dagaallanka Xagjirnimada Rabshadaha wata, iyo hababka kale ee aan militariga ahayn oo qayb ka ah hab isku-xiran oo dhammeystiran oo amniga lagula tacaalo;
- (p) Xaqiijiyaan in dib-u-habeynta amniga qaranka loo fuliyo si waafaqsan waajibaadka xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah, ayna sameeyaan habab kormeer ah oo ku haboon;
- (q) Xaqiijiyaan in ololaha millatari ay la jaanqaadaan dadaallada dib-u-habeynta amniga qaran taasoo qayb ka ah dib-u-soo-celinta iyo fidinta Awoodda Dowladda si sare loogu qaado ilaalin waxtar leh oo loo sameeyo dadka rayidka ah, ay ka hortagaan, kana joogsadaan askar ka qorista iyo afduubidda iyo xadgudubyada kale ee halista ah ee ay geysato Al-Shabaab.

AMISOM:

- (a) Xooji iskaashiga idin kala dhaxeeya dhammaan hay'adaha Qaramada Midoobey ee ay arrintu khuseyso iyo hay'adaha kale ee bani'aadamnimada iyadoo loola danleeyahay in sare loo qaado tayada ciidamada AMISOM si ay u gutaan waajibaadkooda iyadoo si buuxda ugu hoggaansan waajibaadka Dowladaha ka qeybgalaya ee sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha ee xilliga dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
- (b) Hirgeli Amarrada Taliska Ciidamada ee ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ku jirto Amarka ilaalinta xuquuqda carruurta iyo una hoggaansan halbeegyada habraacyada howlgalka AMISOM ee ku saabsan soo dhoweynta iyo u gudbinta carruurta horey loola xiriiriyay kooxaha hubaysan; ogeysiinta Qaramada Midoobay mar kasta oo ciidamadeedu ay carruurta ku qabtaan howlgallo si ay u sameeyan dabagal ku filan una xaqiijiyaan ilaalintooda.
- (c) Baaritaan ku sameeya dhammaan eedeymaha ku saabsan xadgudubyada iyo ku takrifalka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo xadgudubyada sharciga caalamiga ee xilliyada dagaalka, warbixina ka bixi baaritaan waliba iyo natiijo kasta.
- (d) Iskaashi la yeelo Dowladaha ciidamada iyo booliska ku deeqay (TCCs / PCCs) si loo xaqiijiyo in dhammaan saraakiisha ciidamada iyo booliska AMISOM ay si ku filan ugu tababaran yihiin sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo waajibaadka sharciga caalamiga ee ee xilliga dagaalka, iyo cawaaqibta ka dhalanaysa xadgudubyada ka hor inta aan dalka la keenin.
- (e) Sii wad dadaallada dib-u-eegista hanaanka iyo hirgelinta guddiyada baaritaanka, iyada oo xoogga la saarayo hababka la xiriira xadgudubyada iyo takrifalka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha ee xilliga dagaalka; taageero ka codso Qaramada Midoobay, hadba sida ku habboon.
- (f) Xooji Cutubka Raad-raaca, Baaritaanka iyo Jawaab ka bixinta Khasaaraha Dadka Rayidka (CCTARC) si looga dhigo uu u noqdo mid xoog leh awoodna u leh raadraaca iyo diiwaangelinta khasaaraha dadka rayidka ah isla markaana sare u qaadi tayada iyo dhaqaalaha si wax looga qabto dhacdooyinka.

Midowga Afrika:

- (a) Sare u qaad shaqaalaha qaybta xuquuqda aadanaha ee AMISOM si waafaqsan Qaraarka Golaha Amaanka 2723 iyada oo loola danleeyahay kordhinta tayadeeda si ay u kormeerto unna xoojiso ixtiraamka sharciga caalamiga ee xilliyada dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, isla markaana si deg deg ah ugu jawaabto kiisaska xadgudubyada iyo takrifalka, oo ay ku jiraan eedaymaha xadgudubyada iyo takrifalka loo geysto carruurta;
- (b) Dhameystir dib-u-eegista iyo ansixinta siyaasadaha Midowga Afrika ee ku saabsan Anshaxa iyo Anshaxmarinta iyo Ka-hortagga Ka Faa'ideysiga iyo xagdubka Galmada; inta sida rasmiga ah looga ansaxinayo, taageer in siyaasadahan gudaha AMISOM si ku meelgaar ah looga hirgeliyo.
- (c) Xaqiiji in dukumiintiyada gaarka u ah hawlgalka AMISOM ay ka tarjumayaan awoodaha uu ansaxiyay Golaha Nabadda iyo Amniga ee Midowga Africa iyo Golaha Amaanka ee Qaramada

Midoobay, oo ay ka mid tahay marka la eego u hoggaansamidda xuquuqda aadanaha iyo sharciga bani'aadamnimada ee xilliga dagaalka. Gaar ahaan, xooji iskaashiga ee hirgelinta Siyaasadda Taxadirka Waajibka ah ee Xuquuqul Insaanka (HRDDP) iyada oo loo marayo in tallaabooyinka yareynta dhibaatooyinka lagu ballaariyo Heshiisyada Xaaladda Hawlgalka, Heshiiska Isfahamka ee u dhexeeya Guddiga Midawga Afrika iyo dalalka ciidamada keenay (TCCs/PCCs), Xeerarka Hawlgalka, Tilmaamaha Gaarka ah ee AMISOM ee ilaalinta dadka rayidka, Halbeegyada Habraaca Hawlgalinta ee la xiriira guddiyada baaritaanka AMISOM, iyo awaamirta kala duwan ee Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga iyo Taliyaha Ciidamada ama Taliyaha Booliska ee Hawlgalka.

- (d) Tixgeli dejinta hage/tilmaame waafaqsan xuquuqda aadanaha ee Siyaasadda HRDDP ee ku saabsan taageerada iyo hawlgallada wadajirka ah ee ciidamada aan Midowga Afrika ahayn, in laga ambaqaado casharadii laga bartey tababarka ay AMISOM siiyaan CXDS.
- (e) Xaqiiji in dhammaan dalalka TCCS/PCCs ay tababaro ku qaateen sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo waajibaadyada sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada ee xilliga dagaalka iyo cawaaqibta xadgudubyada uga dhalan karta dhammaan ciidamada la keeni doono Soomaaliya.

Hay'adaha/dhinacyada Bani'aadamnimada:

- (a) Ku xisaabtan in si siman loo gaarsiiyo helitaanka gargaarka bini'aadanimada iyo adeegyadooda, taasoo u baahan in fiiro gaar ah loo yeesho shakhsiyaadka iyo kooxaha laga yaabo inay si gaar ah u nugul yihiin ama ay ku adagtahay helitaanka gargaarkaas.
- (b) Ka hortag isku day kasta oo si ula kac ah meesha uga saara qaybo ka mid ah dadka ay dhibaatu saameysey iyo iyada oo ku saleysan baahida iyo in laga fogaado nooc kasta oo ah takoorid toos ah ama dadban.

Beesha Caalamka:

- (a) Inay sii wadaan dhiirigelinta iyo xoojinta taageerada Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada sidii loo hirgelin lahaa Heshiiska Amniga, iyo inay xaqiijiyaan in Qaab-dhismeedka Amniga Qaran uu ku salaysanyahay sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee xilliyada dagaallada;
- (b) Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada ku taageeraan xoojinta booliska iyo hay'adaha kale ee fulinta sharciga si loo damaanad qaado ilaalinta iyo helitaanka garsoor caddaalad ah oo la awoodi karo.

LIFAAQYADA

Qaab-dhismeedka Sharciga

Qaab-dhismeed Sharci

1. UNSOM mowqifkeedu waa in colaadaha hubaysan ee ka jira Soomaaliya ay yihiin colaado aan ahayn caalami una dhexeeya Dowladda Soomaaliya iyo ciidamadeeda qalabka sida (ciidamada amniga qaranka Soomaaliya oo ay taageerayaan ciidamo military oo caalami ah) iyo kooxo hubaysan oo aan ka tirsanayn Dowladda. Dhamaan dhinacyada qaybta ka ah colaadda - Ciidamada qalabka sida ee Soomaaliyeed, ciidamada militari ee caalamiga ah, iyo kooxaha hubaysan ee aan ka tirsanayn Dowladda – waxaa waajibaad cad ka saaranyahay sharciga caalamiga ah ee ilaalinta dadka rayidka ah.

Qaab-samaynta Sharciga ee Caalamiga ah: Waajibaadka Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha iyo Sharciga Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha

Waajibaadka ku xusan Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha

2. Waajibaadka dawladdaha ee xurmeynta sharciga caalamiga ah ee xilliyada colaadaha ayaa qayb ka ah waajibaadkooda guud ee xurmeynta sharciga caalamiga ah, sida ku cad Heshiiskii Geneva ee 1929 iyo 1949. In kastoo Soomaaliya ay qayb ka tahay Heshiisyadii afarta ahaa ee Geneva ee 1949,¹¹² ayaa Soomaaliya aanay qayb ka ahayn Heshiiska Dheeraadka ah ee kowaad iyo Heshiiska Dheeraadka ah ee labaad ee 1977 toona, iyadoo Heshiiska dambe ee labaad uu wax ka qabanayo badbaadinta dadka rayidka ah ee xilliyada ay jiraan colaadaha aan caalamiga ahayn, iyadoo sharcigu waxyaabo kale uu wax ka qabanayo ayaa wuxuu mamnuucayaa weeraro ka dhan ah dadka rayidka ah iyo hantidooda (waxaa lagu qeexay in uu lagama maarmaan u yahay samata-bixinta dadka rayidka ah). Si kastaba ha ahaatee, marka ay jiraan colaado hubaysan oo aan caalami ahayn, Soomaaliya waxaa waajib ku ah qodobada ku hoos qoran Qodobka guud ee 3aad ee Heshiisyadii Geneva iyo Qodobka 4aad ee Heshiiska Dheeraadka ah ee II kuwaas oo loo asteeyay inay noqdaan xeer dhaqameedka caalamiga ah.¹¹³ Waxaa intaas dheer, in Soomaaliya ay waajib ku yihiin qodobada ku qoran afarta Heshiis ee Geneva ee 1949 iyo xeerarka kale ee Heshiisyada dheeraadka ah ee ka midka ah xeer

112 Heshiishkii Geneva 1929 ee xanaanada dhaawaca iyo bukaanka, Qodabkiis 25aad (ee ku qoran Vol.II, Cutubkiisa 40, 1) Heshiishkii Geneva 1929 ee la xidhiidhay dawaynta maxaabiista dagaalka, Qodobka 82 (ibid 2); Heshiishkii Geneva 1949, Qodobka 1 (ibid 3). Qodabka kowaad ee Heshiishkii Geneva 1949 ayaa wuxuu faahaahiyay in baahiyadkan la fuliyo si loola xidhiidhiyo waajibaadka lagu xaqiijinayo u hogaansanaanta sharciga caalamiga ah ee bani aadantinimada. Waajibaadkan in la qadariyo lana xaqiijiyay waxaa sidoo kale laga helaa paratakoolka I. Waajibaadka dawladeed ee xeerkanii kaliya kuma koobna in ciidankoodu u u hogaansamaan sharciga caalamiga ah ee bani aadantinimadaa, laakiin waxaa sidoo kale la rabaa inay u hogaansamaan shaqsiyaadka kale iyo kooxaha ku shaqaynaya nidaamdayadiisa ama raacaya sharcigan. Tani waa natiijadii xeer lambar 149, iyadoo loo eegayo in dawladuhu in ficiilada shaqsiyaadkan ama kooxahan masuuliyadooda qaadaan sida uu dhigayo xeerka caalamiga ah ee dacwadaha. Waxay tani si gaar ah ula xidhiidhaa colaada ka jirta Soomaaliya, madaama oo ay AMISOM ka kooban tahay ciidamo kala yimid Uganda, Burundi, Djibouti, Kenya, iyo Ethiopia. Iyagoo ku hawlgalaya heshiishka u dhaxeeya qaramada midoobay iyo wadamada ciidamada ugu deeqaay, dhaqamada iyo ciqaab marinta ciidanka milatariga waxaa masuuliyadooda iska leh dalalkii ay ka kala yimaadeen

113 Qodobka guud ee 3aad wuxuu mamnuucayaa “rabsho loo geysto qofka iyo noloshiisa”, “In arxandaro ah loola dhaqmo” ama danbiyada kale ee ka dhanka ah sharafta iyo karaamada qofka”. Qodobka 4 ee baratakoolka labaad wuxuu ilaaliyaa shacabka ku dhex sugan goobaha rabshadaha hubaysan, “dambiyada ka dhanka ah karaamada qofka” gaar ahaan bahdilka, kufsiga, in xoog jidhkooda looga ganacsado iyo dhacdo kasta oo waxyeelaysa. Uganda, Burundi, Djibouti, Kenya, iyo Ethiopia waa wadamada ku deeqay ciidamada AMISOM waxayna dhamaantood xubno ka yihiin paratakoolka labaad. Qodobka 3aad ee ee heshiishka Geneva 1949 wuxuu dhigayaa heerarka ugu horeeya ee xubnuhu, oo ay ku jiraan dawlada iyo hayadaha aan dawliga ahaynba, ayaa laga rabaa inay dhawraan colaadaha hubaysan ee aan caalamiga ahayn. Qodobka 3aad wuxuu si cad u reebayaa tacadiyada nololsha qof taabanaya iyo shaqsiyadiisa qofnimo, oo ku jirto dhagartu, dhaawaca, dhaqamada arxandarada ah iyo jidh dilka iyo sidoo kale danbiyada ka dhanka ah sharafta iyo karaamada shaqsiya iyo oogista dacwado sharciga baalmarsan goob kasta iyo waqti kastaba.

dhaqanka caalamiga ah ee xilliyada colaadaha xeerkaas oo la adeegsado xilliyada ay jiraa colaado hubaysan oo aan caalami ahayn.¹¹⁴ Kooxaha aan hoos imaanin dowladda waxaa iyaga xataa waajib uu ka saaranyahay sharciga caalamiga ah ee xilliyada colaadaha madaama ay kooxahaasi qayb ka yihiin colaadda.

3. Dhammaan dowladaha ku deeqay ciidammada caalamiga ah ee jooga Soomaaliya ama gacanta ka geysanaya hawlgallada Soomaaliya waxay saxiixayaal ka yihiin Heshiisyaa afarta ah ee lagu gaaray Geneva 1949-kii. Inkastoo aaney dhammaan dalalka ku deeqay ciidamada AMISOM aanay saxiixin Heshiiska Dheeraadka ah ee labaad ee 1977kii, ayaa haddana iyaga iyo dalalka kale ee caawinaya Soomaaliya waxaa waajib ku ah u hogaansanaanta xeerarka sharci dhaqameedka caalamiga ah ee xilliyada colaadaha ee lagu dhaqmo marka ay jiraan colaado hubaysan oo aan ahayn kuwo caalami ah. Ugu dambeyntii, AMISOM waxay bishii May ee sanadkii 2013ka meel-marisay istiraatiijiyad ballaaran oo dalka oo dhan laga hirgeliyo oo lagu ilaalinayo dadka rayidka ah bishii Maayo 2013, taas oo “qeexaysa hanaan dhamaystiran oo si ballaaran u wada saamaynaya Hawlgalka looguna talo galay taabba gelinta hawlaha badbaadinta ee taabanaya dhinac kasta ee hawl-gallada.”¹¹⁵

Waajibaadka ku xusan Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha

4. Xeerka caalamiga ah ee xuquuqul insaanka waa mid dhaqan gal ah xilliyada nabdoon iyo weliba xilliyada ay jiraan colaadaha hubaysan. Marka ay jiraan colaadaha hubaysan, sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada ayaa is-kaabaya oo midba midka kale uu ku xoojinayaa badbaadinta [rayidka]. Soomaaliya waxay qayb ka tahay heshiisyo xuquuqul insaan oo heer caalami iyo heer goboleedba leh, waxaana kamid ah Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Madaniga iyo Kuwa Siyaasadda iyo Heshiiska Afrikaan ee Xuquuqul Insaanka iyo Xuquuqda Dadyowga. Dhammaan xeerarkani si gaar ah ayay u ilaalinayaan xaq nolosha. Waxay ku waajibinayaan dowladaha inay ilaaliyaan xuquuqul insaanka asaasiga ah ee dadka ku nool dhulka iyo maamulada ay ka taliyaan.¹¹⁶
5. In kastoo aynan qayb ka noqon heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, jilayaasha aan dowliga ahayn, oo ay ku jiraan kooxaha hubaysan ee aan dowlad ka amar qaadanin ee fulinaya hawlo u eg hawlaha dowladda isla markaasina gacanta ku haya dhul, sida Al Shabaab, waxaa waajib ku ah inay ixtiraamaan xeer dhaqameedyada caalamiga ah ee xuquuqul insaanka haddii hawsha ay fulinayaan ay saamayn ku yeelanayso xuquuqul insaanka dadka ku hoos nool maamuladooda. Waxaa hoosta laga xariiqi karaa in waajibaadka xuquuqul insaanka ee saaran kooxaha hubaysan ee aan ka amar qaadanin dowlad eek a hawl-gala Soomaaliya (hoos ka eeg) aysan saameyn ku

114 Kuwan soo socdaa waa maabaa'diida ugu haboon ee qabta dhaqamada dhamaan xubnaha ujooga coolada maxaliga ah ee Somaaliya: (a) Yoolka: dadka iyo shaqsiyaad shacab ahi waa inaanay badhtilmaameed u noqon weererka. (b) Saamiga: “weerar ka dhan ah ciidan militari kasoo lafilan karo in khasaaro nololeed u gaysan karo shacabka, ama dhaawac, ama waxyeelo u gaysan kara shacabka ama isku darka intaas waa la mamnuucay.”(c) Difaaca dagaalka...” Dadka shacabka ah waa inay helaan gabaad guud oo kaga gaashaman karaan khataraha kaga iman kara hawlgalada milatari” “Habdhaqanka hawlgalada milatari, waa in taxadar xoog leh laga moojiyaa sidoo loo badbaadin lahaa shacabka iyo hantidooda” sidoo kalana waa in dhamaan la sameeyaa waxyaabaha lagaga hortagi karayo iyadoo ujeedku yahay “in laga fogaado iyo in la yareeyo khasaaraha nololeed ee dadka shacabka ah, dhaawaca iyo waxyeelada handtida shacabka.”

115 Warbixinta gudoomiyaha komishanka ee ku aadan xaalada Somaaliya. Dokumentiga Midawga Africa PSC/PR/2. (CCCLXXIX), 13 June 2013.

116 Xeerka caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, dawladdu waa inay baadhaan adeegsiga xooga daran ee hayadahooda, gaar ahaan kuwa kushaqada leh ku dhaqanka sharciga. Waajibkan, iyo sidoo kale in lagu guul daraysto in lagu dhaqmo, ayaa wuxuu ka imanayaa waajibaadka ah in la ilaaliyo xaq nolosha. Si loo xoojiyo baadhintaana dawlada, waa inay sida ugu macquulsan ugu dadajiyaan, u dhamaystiraan, dhexdhexaad ka noqdaan, madax banana yahay una furan yahay dadka inay waxka dhahaan. Waajibka dawlada ee baadhitaanka waxaa uu ka shaqeeyaa dhamaan goobaha sharciga laga dhaqan galiyay. Sidoo kale fiiri mabaa'diida aasaasiga ah ee xaq dawaynta iyo magdhawga ee dhimanayaasha tacadiyada daran ee sharciga caalamiga ee xuquuqul insaanka iyo tacadiyada daran ee sharciga caalamiga ee bani'aadanka; Maabaa'diida aasaasiga ah ee adeegsiga awooda iyo hubka fudud ee hayadaha sharci dajinta, xeerka anshaxmarinta saraakiisha hayadaha sharci fulinta.

lahayn waajibaadka Soomaliya ka saaran ilaalinta sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha dhulkooda iyo meelaha kale ee ay maamusho. Dawladdu waxay ku qasban tahay in ay ku dadaasho siyaasadda taxadarka ayna samayso wax kasta oo ay awood u leedahay si ay u ilaaliso dhamaan dadka ku nool dhulkeeda iyo dadyowga ku hoos nool xukunkeeda ayna ka ilaaliso halista ka dhanka ah ku naaloonta xuquuqul insaanka, halistaas oo ka imaan karta jilayaasha aan dowliga ahayn, oo ay ku jiraan maamulada waaqica ama dhab ahaan u jira (de facto) iyo kooxaha hubeysan. Soomaaliya waa inay raadisaa sidi ay [sharciga hortiisa] ugula xisaabtami lahayd kuwa geysta xadgudubka ka dhanka ah xuquuqul insaanka waana inay xaqiijisaa xuquuqda dhibanayaasha, oo uu ku jiro xaqa uu dhimanaha u leeyahay daweyn iyo xaal marin wax ku ool ah.

Waajibaadka ku xusan Sharciga Dembiyada ee Caalamiga ah

6. Sharciga caalamiga ah ee dembiyada waxa uu u taagan yahay xakamaynta iyo ciqaabista shakhsiyaadka geysta falal aad u xun, Soomaaliyana waxaa mas'uuliyad muhiim ah ay ka saarantahay inay baarto oo dacwad kusoo oogto dembiyada caalamiga ah sida dembiyada dagaal, dembiyada ka dhanka ah aadanaha, iyo xasuuqa, eek a dhaca deegaanada ay leedahay. Heshiiska/Sharciga Rome wuxuu dowladaha xubnaha ka ah ku waajibinayaa inay la shaqeeyaan Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada oo ay kala shaqeeyaan baaritaanka iyo dacwad-ku-qaadista dembiyada, oo ay ku jiraan sii xiritaanka iyo isasoo dhiibista la-tuhunsanayaasha. Inkastoo Soomaaliya aysan qayb ka ahayn Sharciga Rome, waxay caddeysay in ay "si buuxda u taageersan tahay mabaadi'da ku xusan Sharciga Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada "oo ay ka go'antahay in la soo afjaro dhaqanka joogtada ah ee ciqaabid la'aanta dembiyada iyo in la xaqiijiyo in kuwa geysta xadgudubyada ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada colaadaha lagula xisaabtamo falalkooda oo cadaaladdu dhaqan gasho. "¹¹⁷
7. Dowladaha ciidamoodu ay ka mid yihiin ciidamada militariga ee caalamiga ah ee ku lugta leh [wax-ka-qabashada] colaadaha Soomaaliya ayaa sidoo kale mas'uuliyad ka saarantahay inay baaraan oo ay maxkamadeeyaan dembiyada ay muwaadiniintoodu ku galaan Soomaaliya. Tusaale ahaan, dawladaahan waxaa waajib ku ah in ay baaritaan ku sameeyaan ayna dacwad kusoo oogaan xadgudubyada ku xusan Qodobka 8 (2) (e) (i) ee Sharciga Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada, sharcigaas oo tilmaamaya haddii "si ula kac ah weerar loogu geysto dad rayid ah, ama shakhsiyaad rayid ah oo aan ka qayb-qaadanayn colaadaha" ay ka dhigantahay dembi dagaal oo ka dhex dhacay colaado hubeysan oo aan caalami ahayn.

Qaab-dhismeedka Sharciga Qaran, Hay'adaha iyo Qorshe-Hawleedyada

8. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya wuxuu ilaaliyaa xuquuqda nololaha, xorriyadda, amniga, iyo xoriyadda kulanka, ka-mid-noqoshada, iyo isusoo-baxyada, iyo xuquuq kale.¹¹⁸ Nidaamka sharci ee Soomaaliya waa nidaam isku dhafan oo ka kooban xeerka guud, Shareecada, iyo xeer dhaqameed (Xeerka Soomaliya).
9. Awoodda nidaamka garsoorka rasmiga ah ee lagu maareeyo kiisaska ayaan wali si buuxda loo soo celin kadib markii uu dhacay burburkii dagaalkii sokeeye ee bilaabmay 1991. Dawlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah waxay billaabeen inay dhistaan hay'addooda caddaaladda, inkastoo shaqaalaha hay'adaha cadaaladda intooda badani aysan haysan tababarka rasmiga ah. Ma jiraan habab kormeer, maxkamaduhuna ma heystaan awood ay ku dhaqan geliyaan go'aanada.

¹¹⁷ Jawaabta Soomaaliya ee talooyinka laga siiyay Dib-u-eegista Caalamiga ah ee Mudeysan §98.1.

¹¹⁸ Dastuurka kulmeedhgaadhka ah ee Soomaaliya 124: "Waxay dawlada federaalku damaanad qaadaysaa nabada, madaxbanaanida iyo amniga qaranka ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya iyo badqabka dadkeeda iyadoo u adeegsanasa taas ciidamadeeda amniga."

Iyadoo ay ku larantahay aragtida xididdeysatay ee laga qabo musuqmaasuqa, ayaa tani waxay si xun u saameynaysaa kalsoonida dadweynahu ku qabaan nidaamka cadaaladda ee rasmiga ah. Dadyow badan ayaan gaari karin [heli karin] nidaamka rasmiga ah waxayna door bidaan inay khilaafaadkooda ula tagaan habab dhaqameedka cadaaladeed, oo ay kamid yihiin “maxkamadaha” ay maamulaan Al Shabaab ee ku yaal deegaanada ay maamusho [Al Shabaab].

Qaab-samaynta Qaran ee Wax ka Qabashada Rabshadaha Galmada

10. Nidaamka sharciyeed ee Soomaaliya ee wax ka qabashada rabshadaha galmada wuxuu ka kooban yahay Shareecada, nidaamka caddaaladda ee dhaqanka (Xeer), iyo nidaamka garsoorka rasmiga ah, inkasta oo kiisaska intooda badan lagu xalliyo Xeerka iyo Shareecada. Sida hadda lagu dhaqmo, nidaamyadani waxay badanaa keenaan dhibbaatooyin dheeraad ah oo soo wajaha dumarka iyo gabdhaha, iyada oo aan caddaalad loo helin kuwa ka badbaaday, haddana aan la ciqaabin kuwa dembiileyaasha ah.¹¹⁹
11. Puntland ayaa hadda ah Dowlad Goboleedka kaliya ee leh sharci gaar u ah wax ka qabashada xadgudubka jinsiga - Xeerka Xadgudubyada Galmada ee Puntland - oo la ansixiyay 20kii Agoosto 2016. Dejinta xeerar wax looga qabanayo xadgudubyada galmada ayaa hawshoodu u socotaa dowladda federaalka ah iyo Somaliland. Sheybaarro casri ah (forensic laboratories) ayaa laga hirgeliyay Muqdisho iyo Garowe si ay u sameeyaan diiwaan-gelin iyo qoraalo caafimaad oo rasmi ah, qoraaladaas oo dadka soo badbaaday ay ka dhigan karaan cadeeymo marka ay maxkamadda la tiigsadaan fal dembiyeedka khuseeya xadgudubka galmada.¹²⁰

Qaab-samaynta Qaran ee Wax ka Qabashada Ilaalinta/Badbaadinta Caruurta

12. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee 2012 ayaa caddeynaya qodobga gaar ah oo ilaalinaya xuquuqda carruurta ee xilliyada ay socdaan colaadaha hubeysan, gaar ahaan qodobkiisa 29aad, oo qeexaya ‘ ILmo kasta wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo, oo aan loo adeegsan dagaallada hubaysan’. Isla qodobkaas ayaa sidoo kale wuxuu ereyga caruur ku qeexayaa ‘ qof kasta oo da’diisu ka yar tahay 18-jir ‘.
13. Iyadoo ku beegneyd waqtigii la ansixinayay Dastuurka Kumeelgaarka ah sanadkii 2012kii, ayaa Dowladda Federaalka ah iyo Qaramada Midoobay waxay saxiixeen labo Qorshe-Hawleedyo oo loogu talagalay inay soo afjaraan qorista iyo adeegsiga iyo dilka carruurta ee ay geystaan ciidamadeeda marka ay fulinayaan hawlgallada ciidan iyadoo diiradda lagu saarayay fulinta waajibaadka ka saaran sharciga caalamiga ah.¹²¹

119 Nidaamka cadaalada dhaqanku waxay la xidhiidhaa dhexdhexaadinta isku dhacyada qabiilada iyo magdhawga oo sida badan ku dhacda gacanta qoyska halkii laga siin lahaa dhibanaha tacadiga galmada. Ka dibna Eedaynihii la sii daayo, dacwadana lasoo afjaro. UNSOM waxa soo gaaray warbixino haween iyo gabdho oo lagu qasbay in loo guuriyo danbiilihii. Nidaamka dhaqanka aad ayaa loo tixgaliyaa, qoysaska iyo qabaa’ilkuna waa ay ku tiirsan yihiin. Waxay Qaramada Midoobay soo saartay siyaasad dhaqameed lagu xalinayo dhaqamada nuucaas ah. kana

120 Iyadoo ay qayb ka tahay maamulka caafimaad ee baratakoolka kufsiga si kor loogu qaado tayada adeeg gaadhsiinta dhibanayaasha.

121 Caruurta waxaa la siiyay damaanad qaad aasaasi ah ee dadka aan qayb toos ah ka qaadan colaadaha maxaliga ah. (Qodabka 3 ilaa Faalada Guud (GC) iyo Qodobka 4aad ee baratakoolka II). Waxaa ilaalin gaar ah la siiyay caruurta waxaana la xadiday kaqaybgalkooda colaadaha iyadoo ay ka mid tahay xiristaiyo mamnuucida xukunka dilka ah (Paratakoolka II, Qodabka 4, faqradiisa 3c; .3d GCIV Art. 68 Paratakoolka II qodobka 6). Xeerarka 135, 136 iyo 137 waxay ka kooban yihiin qodobga gaar ah oo ilaalinaya caruurta kusugan goobaha colaadaha hubaysan.

14. Dowladda Federaalku waxay horumar ka gaareysaa hirgellinta labada Qorshe-Hawleedyo, iyadoo taageero ka heleysa Xafiiska Badbaadinta Caruurta ee UNSOM iyo Koox Hawleedka Dalka u qaabilsan Kor-jooqteynta iyo Ka-war-bixinta (CTFMR), ayay ansixisay siyaasado gaar ah¹²² waxayna dhistay qaab-dhismeed iyo habab lagu horumarinayo tayada iyo awoodda, lagu abuurayo wacyi laguna taageerayo dadaallada maamullada dowladda.¹²³ Waxaa intaa dheer, taageero la siiyay dhiiri-gelinta iyo baarista (screening) ciidamada si loo hubiyo in aanay jirin caruur ka tirsan CXD, iyadoo sidoo kale lala shaqaynayo ciidamo goboleedyada aan weli la sharciyaynin.¹²⁴
15. Guul taariikhi ah ayay ahayd in bishii Oktoobar ee sanadkii 2015ki Soomaaliya ay xubin ka noqotay Heshiiska Xuquuqda Caruurta, oo weliba bishii Maarso ee sanadkii 2014ki ay dhaqan gelisay Heshiiska Lr. 182 ee Ururka Shaqaalaha ee Caalamiga ah kuna saabsan Hababka ugu Xun ee Shaqaaleynta Caruurta.¹²⁵ Sidoo kale, Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha ayaa ka hadlaya badbaadinta caruurta.¹²⁶
16. Caqabadda ugu weyn ayaa ah is-waafajinta qeexidda ay Dowladda Federaalka ah siisay ereyga 'Caruur' iyo qeexidda Dowlad Goboleedyada ee isla ereygaas. Tusaale ahaan, Dastuurka Puntland wuxuu ereyga 'Caruur' ku qeexayaa ilmaha da'doodu ka hooseyso 15 sano.¹²⁷ Wixii ka dambeeyay soo qabashadii caruur lagu qiyaasay 100 oo ay soo qabteen maamulada Puntland iyo Galmudug sanadkii 2016kii, waxaa ugu dambeyntii lagu guuleysatay in lasii daayo dhamaan caruurtii lasoo qabtay, inkasta oo 40 kamid ah ay yihiin xukun sugayaal.

122 Nidaamka Hawlgalka Caadiga ah (SOP) ee 2014 ee qaabilaada iyo wareejinta caruurta ee la xiriira kooxaha hubaysan; nidaam lagu go'aaminayo da'da; 2016 Amarka guud ee ciidamada lagaga mabnuucayo in la shaqo geliyo dad aan qaangaadhin.

123 Guulahan waxaa ku jira: i) Gudi isku dhaf ah oo ka booban DFS/Qaramada Midoobay oo shaqaynaysa taasoo dusha kala socota dhaqan galinta qorshayaasha, ii) In Wasaarada Difaaca laga dhiso gudida ilaalinta caruurta iyadoo loo magacaabay xubno militariga ah oo arintan qaabilsan, iii) In la dhiso gudi isku dhaf ah oo ka kooban FGS/CPU iyo kooxda waregta ee Qaramada Midoobay.

124 Tusaale ahaan, 235 oo ka mida 310 xubnood ee booliska gaarka ah ee koonfur galbeed ayaa la waraystay, halkaasoo laba wiil oo da'doodu tahay 16 jirro laga helay lagana saaray 17 bishii May 2017kii.

125 Wali waxaa jira caqabado iyo galdaloolo waaweyn waxaana loo baahan yahay in dadaalada la sii wado si si buuxda loogu kantaroolo qodobadan si loo xoojiyo qaabdhismeedka sharciga ah ee hada jira. Waqtiga warbixintan, Wasaarada Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Bani'aadamku (MoWHRD) waxay diyaarinaysaa warbixintii ugu horaysay ee dawlada Somaaliya si loogu gudbiyo Gudida Xuquuqda Caruurta, iyadoo wadatashi balaadhan la yeelanaysa Dawlad goboleedyada xubnaha ka ah federalka(FMS). Wasaaradu waxay sidoo kale bilowday 17kii bishii November iyadoo taagero ka helaya UNICEF, Geedi socodka lagu curinayo Xeerka Xuquuqda Caruurta, hawl aad u muhiim ah oo lagu dhaqan galinayo Heshiishka Xuquuqda Cruurta.

126 Keydka Macluumaadka ee Gudida Caalamiga ah ee laanqeerta cas, rule 135: Caruurta ay saamayeen colaadaha hubaysani waxay leeyihiin ixtiraam iyo ilaalin gaar ah.

127 Dhaqan galinta heshiishka xuquuqda caruurta ayaa siday u badan tahay xalin doonta madmadawga sharci ee ku aadan qeexitaanka ilmaha yar, waxaa sidoo kale kor loo qaadi doonaa siyaabaha arimaha caruurta ay ula dhaqmaan qaybaha bulshadu.

Jawaabaha La helay

Somaliland

Faallooyinka ku saabsan Warbixinta UNSOM:

- Marka la tixraaco qaybaha ka hadlaya Sool, Sanag iyo Buhoodle ee lagu tilmaamayo “Dhul lagu muransan yahay” waa arrin dareen-kicin leh oo wax u dhimaysa wadahaadalka u dhexeeya Somaliland iyo Soomaaliya. Waxa xaqiiqo la wada ogyahay ah in Maxmiyaddii Talyaaniga ee Soomaaliya iyo Maxmiyaddii Ingiriiska (Britishka) ee Soomaali ay lahaayeen xuduudo kala soocan oo ay aqoonsanaayeen Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay. Si aan kuula socodsiino xaaladda jirta, cabashooyinkii siyaasadeed ee deegaannada Sool iyo Buuhoodle waa la xalliyay waana taas midda keentay in madaxdii deegaannadaas ee kala ah Cali Khaliif iyo Dr. Saleban Xagla Toosiye (Wasiirka Caafimaadka) ay joogan Hargaysa. UNSOM waxaa waajibkeeda shaqo uu yahay inay nabad iyo maamul dowladeed kusoo celiso Soomaaliya ee ma aha inay noqoto wakiil sii dheereeya dhibaataada oo u maraya xasilooni darri siyaasadeed.
- Dhacdadda ka dhacday garoonka kubadda cagta ee Hargeysa wuxuu ahaa fowdo iyo isku-dhac u dhexeeyay taageeyayaal kooxo kubadda cagta ah “Football Hooliganism” oo ay dad rayid ah oo aan waxba galabsan iyo Booliska labaduba ay dhibbanayaal u noqdeen oo ay soo gaareen dhimasho iyo dhaawac intaba, waxaana dhibaataadaas geystay qas-wadayaal taageerayaal u ahaa [kooxaha] kubadda cagta kuwaas oo aqbali waayay guul darrada kooxdooda. Isku-day kasta oo la isku dayo in xaaladdaas lagu eedeeyo booliska waa in lagu dilo sumcadda dalkeenna iyadoo loo marayo warbixinno khaldan oo bareer ah, waxaana joogitaanka UNSOM ee Hargeysa loo arki doonaa qas iyo dhinac u xaglin.
- Maxaa keenay in la adeegsado oo carrabaabo dadkii dhintay oo lagu kala sheego Daarood, Baharsame iyo Qayaad iwm? Soo daabicidda magacyada dhibbanayaashii dagaallada jufooyinka ayaa ku-filnayd muhiimna u ahayd dhamaan dadka danaynayay ee arrintu khusaysay, haddii aanay UNSOM lahayn ujeeddo qarsoon oo ay kusii daba-dheeraynayso colaadda iyo dirirta beelaha gobolka Sool. Sidee ayaad ku hubiseen in tirada dadkii dhintay ay ahayd 78 qofood, maadaama Wasaaradda Arrimaha Gudaha ay aaminsantahay in laga bad-badiyay, Wasaaradduna waxay soo bandhigi kartaa liiska saxda ah ee dadkii dhintay, haddii loo baahdo.

Mudane Yasseir Arish Kalinle

Jamhuuriyadda Somaliland

Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Xiriiriyaha Amniga Gudaha & La-taliyaha Saree ee Wasiirka

Telefoon +252634241116. Telefoon +252659104440

Email:ibnuarish@gmail.com

Iyadoo la tixraacayo kulankii wadatashiga ahaa ee laga yeeshay warbixinta Ilaalinta Dadka Rayidka ah ee dhacay taariikhdu markii ay ahayd 29kii Nofeember, 2017 Wasaaradaha Dowlad Goboleedka Jubaland way ka mahad celiyeen walaaca laga muujiyay in la ilaaliyo sumcadda Dowlad Goboleedka Jubaland ee Soomaaliya. Waxaan ku faraxsannahay in aan idinla wadaagno walaaceenna ku aadan warbixinta guud.

Faqrada 24aad:

Hey'adadda Adeegga Sirdoonka ee Jubaland ma jiraan wax xabsiyo ah oo ay gacanta ku haysay ilaa markii ciidamada booliska Jubaland la tababaray. Ilaa inta aan ka warheyno, Hey'adda Adeegga Sirdoonka ee Jubaland ma jiraan wax xadgudubyo xaga xuquuqda Aadanaha ah oo ay geysatay mana loo ogola [sideedaba] inay ka hawl-gasho magaalada Kismayo. Ciidamada booliska ayaa hadda ah kuwo shaqeeya oo loo xilsaaray maamulka. Ma la ogola in ciidamo kale ay ka dhinac shaqeeyaan. Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga Jubaland waa garab kamid ah ciidanka militariga waxayna la dagaallamaan kooxda argagixisada ah ee Al Shabaab waxayna soo ururiyaan xogta ku saabsan kooxda argagixisada ah.

Faqrada: 70aad

Wasaarda Xuquuqda Aadanaha, Arrimaha Qoyska iyo Jinsiga, ayaa si weyn gacan uga geysata ilaalinta dadka dib ugu soo laabanaya wadanka ee ka imaanaya Kenya si loo ilaaliyo sumcadda qof kasta oo muwaadin ah iyo dadka ku soo laabanaya dalka. Wasaaraddu waxay mar kasta wacyi gelin ka samaysaa ilaalinta iyo badbaadinta haweenka, gabdhaha iyo caruurta, waxaana si guud wacyi gelinta looga sameeyaa arrimaha galmada iyo jinsiga ee ku salaysan colaadda. Wasaaraddu waxay si adag ugu ololeeyaa ka-qaybqaadashada haweenka ee arrimaha siyaasadda si wax looga qabto kala-duwanaanta awoodaha. Waxaa si buuxda u jira [u shaqeya] arrimaha ku saabsan ilaalinta beelaha saboolka ah iyo beelaha la liido. Dhamaan beelaha ku nool Jubaland waxaay leeyihin xuquuq isku mid ah, mana jiraan beelo liida beelaha kale. Haweenka iyo Gabdhaha soo barakacay waxaa si buuxda loogu dhowraa deegaanada ay gacanta ku hayso Jubaland, mana jirto cid ku xadgudbi karta xuquuqdooda. Wasaaradda ayaa majaraha u haysa ololaha loogu doodayo xuquuqda dadka lagu xadgudbay laakiin caqabaddu waxay ka jirtaa in dadka qaar ee kasoo badbaada xadgudubyada aanay doonaynin inay arrimohooda la wadaagaan [hay'adaha] weyna la aamusaan.

Faqrada 72aad:

Wasaarda Xuquuqda Aadanaha, Arrimaha Qoyska iyo Jinsiga, markii ay heshay warbixinta, waxay la xiriirtay qoyska gabadha oo xaqiijiyay in gabadhooda aan xoog lagu kaxaysanin. Sidoo kale, waxay xaqiijiyeen in wararkaasi ay been abuur yihiin. Sidoo kale, Wasaaraddu waxay xiriir la sameysay dad madaxbanaan oo ku nool tuulada Busar, iyaguna waxay sidoo kale xaqiijiyeen in aanay marnaba maqlin dhacdo noocaas oo kale ah oo ku saabsan gabar si khasab ah lagu guursaday. Ilo wareedyo kale ayaa Wasaaradda u xaqiijiyay in tuulada Busar ay ku nool yihiin dad kasoo wada jeeda hal beel, taas oo ka dhigan in gabadhooda aan xoog lagu wadan karin. Kadib markii la dabagalay oo loo kuur galay arrinta, Wasaaraddu waxay ogaatay in gabadha iyo askariga uu ka dhexeeyay xiriir ayna ku heshiiyeen inay is guursadaan. Askarigii wuxuu gabadhii ka doontay qosykeeda laakiin aabaha dhalay gabadha aya sheegtay in la siiyo yarad ama sooryo qiimeheedu dhanyahay toban neef oo geel ah, nikii gabadha doontay ayaa isna sheegay in aanu awoodin sooryada sidaas u badan. Markii dambe, gabadhii iyo ninkii waxay ku heshiiyeen inay isla fakadaan si ay xal ugu helaan guurkooda. Heshiiska guurka [ama

nikaaxa] ayaa dhacay iyadoo aabaha uu ka maqanyahay goobta. Markii gabadhii guriga lagusoo celshay si loo abaabulo arooskii, ayaa aabihii ka-horyimid wuxuuna ku adkeystay go'aankiisii, gabadhiina ay qaadacday go'aankii aabeheed waxayna raacday ninkeedii. Aabaha dhalay gabadha wuu diiday in uu nala wadaago xogtaan laakiin waxaan ka helnay ilo wareedyo kale, waana taas midda keentay inay sheegtaan in gabadhooda xoog looga watay si ay danhooda u meel mariyaan. Guurka waxaa keenay sabab la xiriirta in gabadhu ay diiday in sidi addoon loo iibsado maadaama guurku uu yahay xaqeeda.

Wasiir Qamar Dek Khaliif

Wasaaradda Xuquuqul Insaanka, Arrimaha Qoyska iyo Jinsiga
Saxiix: =saxiixday

Wasiir Cabdinuur Cali Adan

Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda
Saxiix: =saxiixay

TIX: AMISOM/HOM/22/475.17
Mogadishu, 08^{da} Disember 2017

Mudane,

Waxaan ka fal-celinayaa warbixinta cinwaankeedu yahay *'Badbaadinta Dadka Rayidka ah: Dhisida Asaaaska Nabadda, Amniga iyo Xuquuqul Insaanka Soomaaliya'* taas oo ay si wadajir ah u diyaariyeen Kooxda Badbaadinta iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) ee UNSOM iyo Guddiga Sare ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqul Insaanka (OHCHR). Warbixintu waxay ka hadlaysaa falal waxashnimo leh iyo tacadiyo lagu soo waramay inay dheceen lagasoo billaabo 1dii Janaayo 2016 ilaa 14kii Oktoobar 2017. Waxay eedaymo usoo jeedinaysaa dhamaan dhinacyada qaybta ka ah colaadda Soomaaliya oo ay ku jiraan tacadiyo lagu soo waramay inay gaysteen ciidamada AMISOM. Waxaanu daraasadeynay warbixinta iyadoo aan ognahay xaqa ay Qaramada Midoobay u leedahay inay wax ka qorto arrintan, ayaan waxaan aaminnsanahay in warbixintan ay ka kooban tahay dhacdooyin gaar ah oo si qaldan loo dhigay kana dhacay gudaha Somaliya kuwaas oo lala xiriiriyay hawlgalada AMISOM. Waxaa sidii la filayay aan laga dheegan niyad wanaag qaybo ka mid ah warbixinta.

Eedaymaha loo soo jeediyay AMISOM

Eedaymaha culculus ee loo soo jeediyay AMISOM waxaa laga heli karaa faqradda 28aad ee Warbixinta. Eedaymaha halkaas ku xusan ayaa ah:

- (i) Muddada ay warbixintu ka hadlayso, 178 khasaare oo soo gaaray dad rayidka ah (95 dhimasho ah iyo 83 dhaawac ah) ayaa loo aaneeyay AMISOM;
- (ii) Laba kiis oo kufsi wadareed ah iyo hal kiis oo iskuday kufsi ah ayaa sidoo kale loo aaneeyay AMISOM;
- (iii) Inta badan khasaaraha dadka rayidka ah kasoo gaaray AMISOM wuxu dhacay xilli ay ciidamada AMISOM iska difaacayeen weeraro ka dhan ah gaadiidkooda/kolonyadooda oo loo adeegsaday miinooyinka waddada la dhigo, Walxaha Qarxa iyo/ama iyadoo weerer lagu soo qaaday. Marka loo fiiriyo Warbixintan, ciidamada AMISOM waxay si aan loo meel dayin u toogteen dad rayid ah si sharciga ka baxsan;
- (iv) Dhacdooyinka gaarka ah ee kor ku xusan waxaa sii dheer, in Warbixintu ay sidoo kale curyaaminayso kalsoonida lagu qabo nidaamka baarista ee AMISOM gaar ahaan Guddigeeda Xaqiiqo Raadinta, iyadoo taasi ay wax kama-jiraan ka dhigeysa baaritaannada Hawlgalka AMISOM ku sameeyay eedaymaha gaarka ah.
- (v) Ugu danbayntii, Warbixintu waxay walaac ka muujisay mad-madow ku aaddan isla-xisaabtanka la xiriira hawlaha ay qabtaan dalalka ku jooga Soomaaliya heshiis laba-geesood ah oo ay la galeen Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS).

A. Eedaymaha kufsigu iyo isku dayga kufsi

Warbixinta waxaa ku jira eedaymo dhacdooyin dhacay laga soo bilaabo bishii *'Janaayo 2016 ilaa 14 Oktoobar 2017'*....*Laba dhacdo oo kufsi iyo hal isku day kufsi ah oo lala xiriiriyay AMISOM'*. Eedayntan ayaa dhowr jeer lagu xusay warbixinta. Inkastoo faahfaahin dhamaystiran aan si cad loogu xusin Warbixinta, wuxuu hawlgalku ka warqabaa saddex eedaymo oo galmo la xidhiidha laguna soo eedeeyay AMISOM mudada ay warbixintu ka hadlayso. Sidaas darteed, waxaan u qaadannay in warbixintu ay ka

hadlayso isla eedaymahaas. Sidaas darteed, ii ogolaw hadaba in aan si kooban uga warbixiyo waxaa uu hawlgalku ka qabtay eedamayahaas.

I. Dhacdadii Ceelbuur ee 7dii May 2016kii.

14kii bishii May 2016 kii, waxaad ii soo dirtay warqad taas oo aad uga hadashay eedayn ku saabsan labo caruur ah oo kala jiray da'da 15 iyo 17 sanno kuwaas oo ay kufsadeen 14 ka mid ah ciidamada milatariga Ethiopia ee ka mid ah hawlgalka AMISOM. Iyadoo la fiirinayo halista ay ku yeelanayso AMISOM, ayaan waxaan magacabay koox si ay usoo baaraan eedaymahaas. Kooxdu waxay ka koobnayd 3 rayid ah (Laba saraakiil Xuquuqul Insaanka ah iyo hal sarkaal oo arimaha Jinsiga ah) iyo sarkaal ka socday Cutubka Raad-raaca, Baaritaanka iyo Jawaab ka-bixinta Khasaaraha Shacabka (CCTARC) iyo Xiriirka Shacabka iyo Ciidamaada ee xafiiska AMISOM. Kooxdu waxay booqdeen Baydhabo, Ceelbuur, Ceelshiil iyo Ceelqoxle iyadoo waraystay 39 qofood oo markhaati ah oo deeganaa magaalooyinkaas. Baaritaankeeda kadib, iyo qiimeynta ay ku samaysay caddeymaha, kooxdu waxay kusoo gunaanaday in dhacdadaasi aanay kaba dhicin halkaas. Waxa xusid mudan, in warqaddii aad iisoo qortay ee ku saabsanayd eedeymaha aad ku xustay in dhibanayaasha la sheegay lagu daweyay isbitalka Xalaane ee ku yaala magaalada Ceelqoxle kadib dhacdadii la sheegay ee kufsiga. Si kastaba ha ahaatee, kadib wadatashiyo qoto dheer, waxay kooxdu soo ogaatay in aanu wax isbitaal ah ama xitaa farmashi aanu ku oolin magaalada. Natiijooyinkii kooxda baaritaanka waan kula wadaagay waxaana isla natijada si shakhsi ah aan kala hadlay saraakiisha hayada UNICEF.

Li ogolaw inaan mar kale ku celiyo xaqiiqada ah in baadhitaankan lasoo sameeyay iyadoo ay deeganadaa ka jirto walaac aad u sarreeya oo dhinaca amniga ah. Hadana iyadoo baaritaanka la dhamaystiray, wixii kasoo baxayna lasoo gaarsiiyay xafiiskaaga, ayaa warbixintu waxay ka dhigaysaa dhacdadii Ceelbuur eedaymo lasoo cadeeyay oo ka dhan ah AMISOM. Iyadoo la eegayo cadaaladda/dhexdhexaadnimada lana dhowrayo dhamaystirnaanta, waxaa wanaagsanaan lahayd in kuwii soo qoray warbixintan ay xog ka siiyaan AMISOM arrimaha soo socda:

- (a) Waa kee baaritaanka madaxabanaan ee QM sameysay kaas oo ku qanciay kooxda soo qortay warbixinta inay gaaraan gunaanadka ah in kufsi dhacay?
- (b) Dhacdadan waxaa la sheegay inay dhacday bishii May 2016, warbixintii kooxdayda baadhitaankuna waxay kusoo gaartay isla bishii May 2016, maxay QM ay AMISOM u siin weysay faahfaahin ku saabsan baaritaanka ay samaysay iyo waxyaabihii kasoo baxay baaritaankaas, gaar ahaan maadama oo ay ka hor imanayso warbixintii AMISOM? Tani waxay qayb ka noqonaysaa heshiishyadii kooxda wada shaqaynta ee AMISOM-UNSOM-UNSOS-HRDDP, taas oo sida aad ogtahay ah koox joogto ah oo wax ka qabata arrimahaas oo kale.

II. Dhacdadii Buulo-Burte ee bishii April 2016kii

Waxaa laga yaabaa inaad xasuusato in 26kii bishii April 2017ka aad iisoo dirtay qoraal sheegaya in askari ka tirsan guutada Jabuuti ee AMISOM uu kufsaday gabadh 16 jir ah oo cuntada u karin jirtay askarta ku sugan xerada AMISOM ee degmada Bullo-Burto. Markii aan helay warqadaada, waxaan magacaabay koox baaritaan hordhac ah soo samaysa, iyadoo si cad usoo ogaaday xaqiiqada ah in dhacdo kufsi ay dhacday balse eedaysanuhu uu ahaa askari loo tobobarayay ciidanka Xooga Dalka ee Soomaaliya (SNA) ee aanu ahayn askari ka tirsan ciidamada AMISOM. Xogta lasoo ogaaday waxay ahayd in hawlo lagu qorayay askar ay ka socotay Xerada AMISOM waqtigaas. Eedaysanahu wuxuu ahaa muwaadin Soomaaliyeed oo kamid ahaa kuwa la tababarayay. Waa la xiray waxaana lagu wareejiyay booliska si ay tallaabooyinka xiga iyo dambi oogis ugu qaaadaan. Dabcan, waxaa loo soo diray xafiiskaaga sawirkii eedaysanaha iyo warbixintii ciidanka booliska. Wali waxay warbixantu ka dhigaysaa dhacdadan eedaymo kufsi oo lagu soo cadeeyay AMISOM. Sidii dhacdadii Ceelbuur, waxaa muhiim ah in QM ay faahfaahin

ka bixiso baaritaan kasta oo ay samaysay kaas oo horseeday gunaanad ka hor imaanaya warbixinta ay soo saartay AMISOM.

III. Dhacdadii Garastaan ee 18kii June 2017

Waxaa la sheegay in 18kii bishii Juun 2017ka gabar 35 jir ah oo ku nool tuulada Gaarastaan ee deegaanka Baydhabo oo la joogtay geel kaynta halkaas oo ay soo gaareen koox ka tirsan ciidamada Itoobiya si ay xaabo/qoryo dabka lagu shito ay uga gurtaan meesha. Waxaa la sheegay in mid kamid ah askarta uu xageeda u dhaqaaqay soona qabtay kadibna isku dayay inuu kufsado laakiin ay ku qaylisay taasoo gaartay askartii kale. Iyadoo sidaa xaalku u socdo ayuu askarigii sii daayay kadib markii uu middi uga dhuftay lugta. Waxaa la sheegay in dhibanaha lagu daweeeyay isbitaalka lana fasaxay. Waxay kadib dhacdadani kusoo wargalisay ciidanka booliska ee Baydhabo. 7dii bishii Luulyo 2017kii. Waxaan kusoo ogaysiiyay in baaritaan hordhac ah lagu samayn doono eedaymahan. Baadhitaanka hordhaca ah ayaa lasoo sameeyay, iyadoo la fiirinayo khatarta ay leedahay eedayntani, waxaan diyaariyay koox baaritaan oo ka kooban gabdho kaliya si ay usoo badhaan eedaymahan. Dabcan, kooxdu waxay lasoo xidhiidhi doonaan saaxiibada UNSOM ee arintani qusayso si ay usiiyaan xog ka caawisa inay gaaraan gunaanad cadaalad ah. Marka la fiiriyo tan, maadaama dadka qoray warbixintana ay u muuqdaan inay cadayn u hayaan masuuliyada eedaymahan in ay leedahay AMISOM, waa inay si lamid usoo gudbiyaan guddiga maadaama la rabo in laga gun gaaro eedaytan.

B. Eedaymaha ku saabsan dilalka sharci daradda ah.

Warbixintu waxay muujinaysaa eedaymo waawayn oo [la galay] intii u dhaxaysay bishii Janaayo 2016 kii iyo 14 kii Oktoobar 2017, AMISOM iyaga ooka jawaab celinaya walxaha qarxa, miinooyinka dhulka lagu aaso iyo weeraro ayay si aan kalasoo lahayn xabad ugu fureen dad rayid ah, iyadoo dilay, sidoo kalena dhaawac u geystay boqol iyo todobaatan-iyo-sideed (178) ka mid ah dadkaas rayidka ah. Waxay warbixintu sidoo kale sheegtay in ciidamada AMISOM ay mas'uul ka ahaayen dilal sharci darro ah iyo si-xun ula-dhaqan ay kula keceen dadkii xabsiyada ay ku hayeen. Sidoo kale dhacdadii Wardinle ka sokow, warbixintu waxay ku guul daraysatay inay wax faahfaahin ah ka bixiso inay caddayso eedaymahaa culculus. Mudadadii ay warbixintu socotay, wuxuu xafiiskaagu iisoo gudbiyay tiro dhacdooyin ah oo lagu soo eedayay inay AMISOM ku lug lahayd. Marka laga tago dhacdooyinka ay hadda AMISOM ku waddo baaritaannada, eedaymaha intooda badan waa laga jawaabay waxaana lala wadaagay xafiiska Hawlgalka. Sidaa darteed, hawlgalku kama warqabo dhacdooyin ay ciidankoodu si aan kala sooc lahayn rasaas ugu fureen dad rayid ah ama dilal sharci darro ah oo loo geystay dad rayid ah. Sidaas darteed, AMISOM waxay codsanaysaa inay hesho xog dheeraada oo laga yaabo inay ku jirto gacanta dadka qoray warbixintan kuwaas oo cadaynaya eedaymaha ay warbixintani ka kooban tahay. In eedaymahan oo kale lasoo jeediyo iyadoo aan loo helin caddeymo lagu xaqiijiyo ayaa waxay kasoo horjeeddaa habka wadashaqaynta ee AMISOM-UNSOM-UNSOS-HRDDP.

C. Hawlaha ay Soomaaliya ka wadaan Dalalka Ku-deeqay Ciidamada ee aan hoos tegin AMISOM iyo mad-madowga ku jira xaqiijinta cida qaadaysa mas'uuliyaddooda.

Mid ka mid ah dhacdooyinka lala xiriiriyay AMISOM taasoo ay warbixintu si gaar ah u xustay waa dhacdadadii ka dhacday Wardinle laguna eedeeyay AMISOM. Warbixintu waxay QM ku sheegtay in:

“Joogitaanka Ciidamada Difaaca Qaranka Itoobiya ee aan ka midka ahayn hawlgalka AMISOM ee isla goobta hawlgalka ku jooga magaca Ciidamada Itoobiya ee AMISOM, ayaa abuuraysa mugdi kana dhigeysa xaqiijinta mas'uuliyadaha mid culays lagala kulmo. Iyadoo maanka lagu hayo gunaanadka ay gaareen kooxda baarista ee AMISOM, waxaa wali adag in meesha laga saaro inay ciidamada AMISOM ku lug lahaayeen dhacdadadii Wardinle’

Mudane, ii ogolaw in aan caddeeyo qodobadan soo socda:

- (i) Isla markii aan helay caddeymo hordhac ah oo u baahan in baaritaan dheeraad ah lagu sameeyo, waxaan magacaabay oo aan u diray guddi soo baara . Gudigu waxay booqdeen Baydhabo, Wardiinle, iyo Awdinle waxayna wareysteen dad farabadan oo ay kamid yihiin Wasiir kamid ah Dowlad Gobaleedka Koonfur Galbeed, Guddoomiye Degmo, Odayaal Dhaqameedyo, Dhibanayaal, xubno kamid ah qoysaska dadkii dhintay, askarta AMISOM iyo guutada Itoobiya ee goobtaas ku sugan. Waxaa cadaatay in dhibaataada halkaas ay ka dhacday iyadoo Ciidamada AMISOM aanay joogin halkaas. Dhab ahaantii, inta lagu gudajiray baaritaanka, guddiga ayaa ka xaqiijiyay UNSOS in aanay ka warqabin goobo AMISOM ay ku lahayd agagaarkaas iyo in aysan jirin wax saad bixin ah ee deegaankaas ka jiray.
- (ii) Inkastoo aragti ahaan ay dhici karto inay masuuliyadaha lakala leeyahay ay isku milmaan oo uu mugdi soo galo, haddana taasi ma aha dhib ama culays uu la kulmo hawlgalka AMISOM ee Soomaaliya. Dhacdadii ka dhacday Wardinle waa dhacdada kaliya ee AMISOM iska diidday mas'uuliyaddeeda una tiirisay ciidamo aan kamid ahayn AMISOM, kana hawlgala aaggaas ee ka socda Dalalka Ku-deeqay Ciidamada. Waxaa muhiimada gaar ah leh in hoosta laga xarriiqo markii la gaarayay gunaanadkan, in horay loo sameeyay baaritaano qoto dheer, ayna kamid tahay xaqiijinta ay UNSOS xaqiijisay in aanay hawlo saad bixin ah ka fulin aaggaas sababtoo ah ma jiraan askar ka tirsan AMISOM oo ku sugan aaggaas.
- (iii) Iyado maskaxda lagu hayo arrimahaas , waxaan si adag dood uga qabnaa gunaanadka warbixinta ee sheegeysa in askarta AMISOM ay si uun ugu lug lahaayeen kiiska Wardiinle. Arrinta ku saabsan joogitaanka ciidamo aan ka tirsanayn Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed iyo ciidamo kale oo aan hoos tegin AMISOM, ayaa ah arrin waajibkeedu saaranyahay Dowladda Soomaaliyeed, oo AMISOM aanay awood u lahayn. Bedelkii loo hawlgeli la lahaa in mas'uuliyadda loo kala qaybiyo oo loo saariyo AMISOM marka xaaladahaan oo kale ay yimaadaan, waxaan ku talinaynaa in tallaabta waxtarka leh ay tahay in QM ay arrinta kala hadasho dalka kamidka ah Dalalka Ku-deeqay Ciidamada ee aan sheegnay in uu mas'uul ka yahay dhacdadaas.

D. Dhaliisha loo soo jeediyay habka baarista ee AMISOM

Mudane, ii ogolaw in aan halkan ka sheego walaaca aan ka qabo Faqrada 36aad ee Warbixitan taas oo qorysa:

'Waxa kale oo walaac ka jiraa sida gaabiska ah ee AMISOM uga soo jawaabto eedaymaha loo soo jeediyay. Waxa kale oo naadir ah in la helo jawaabcelin ka wabixinayso tallaabooyin cad-cad oo la qaaday markii baaritaanka la samaynayay, sida waraysiyo laga qaaday dhibanayaasha, markhaatiyaasha ama maamullada hoose. In la qaado tallaabooyin la isku-xisaabiyo oo la isku-saxo waxay kamid ah tallaabooyinka mudnaanta leh ee lagu yaraynayo khasaaraha, sida lagusoo bandhigay qaab-samayska QM ee ku aaddan HRDDP, kaas oo lagu kaalmaynayo AMISOM. Markii ay dhacdo in aanay waafi noqon ama la waayo baaritaano la aamini karo oo lagu sameeyo eedeymaha, aya taasi waxay horseedi kartaa in Qaramada Midoobay ay dib uga fiirsato iyo/ama ay hakiso taageerada ay siiso shakhsiyaadka iyo guutooyinka ku lug yeesho xadgudubyada'

Mudane, ii ogolaw in aan jawaabahan ka bixiyo arrimaha ku xusan faqradda kore:

- (i) Marka hore, waxaa nalagu eedeeyey eedaymaha ku xusan faqraddan. Dhamaan baaritaanada uu sameeyay Guddiga Baaritaanka, waxaan la kulmeynay markhaatiyaal xog-ogaal ah. Tusaale ahaan, sida dhacdada kor ku xusan ee kiiskii Ceelbuur ka dhacay, waxaan wareysannay 39 qof oo ay ka mid yihiin madaxda dawladda, hogaamiyeyaasha diinta, madaxda Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, madaxda CXD iyo madax dhaqameedyada. Dhacdadii Wardinle ka dhacday, waxan warbixinno ka ururinnay Wasiir ka tirsan Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, Guddoomiye Degmo, Odayaal Dhaqameedyo, Dhibanayaasha , xubno kamid ah qoysaska dadkii geeriyooday,

askarta AMISOM iyo guudtada Itoobiya eek u sugan deegaankaas, iwm. Dhamaan natiijada baaritaanadaasi waxaa loo soo gudbiyay xafiiskaada. Wararka sheegaya in aanan wax talaabo ah u qaadin in aan wareysano dhibanayaasha, markhaatiyada iyo dowladda hoose ayaa ah mid marin habaabin ah.

- (ii) Midda labaad, Warbixinta waxaa ku xusan in jawaab-celinta AMISOM iyo baaritaanadeeda ay yihiin kuwo gaabis ah. Waa maxay fasiraadda ay QM u heyso ereyga “dhakhso” marka laga hadlayo jawiga hawlgal ee sida Soomaaliya oo kale ah, halkaas oo dhacdooyinku ay ka dhacaan meelo ay ka jirto xaalad amni darro oo sarreysaa? Baaritaannada lagu sameynayo eedeymaha halista ah waxay qaadanaayan waqti waxayna u baahanyihiin in la geliyo maskax si gunaanadka la sameeyo loogu sii sameeyo hubin iyo turxaan-bixin dheraad ah.
- (iii) Midda saddexaad, qaar kamid ah baaritaanada aan sameynay waxaan ku gaarnay gunaanad cad oo ah in qaar kamid ah dhibbanayaasha dhibaataadu kasoo gaartay hawlgallada AMISOM la siiyo lacago xaal marin ah (ex gratia). Hadda waxaa la diyaariyay Siyaasad iyo Halbeegga Habraacyada Hawlgallada ee loogu talo galay Cutubka Raad-raaca, Baaritaanka iyo Jawaab ka-bixinta Khasaaraha Shacabka (CCTARC) waxayna naga caawin doonaan sidii aan u gudan lahayn waajibaadkaas. Caqabadaha xagga kharashka ku saabsan waxaan waqtigii loogu talo galay u gudbinay QM si loo horgeeyo Shirweynaha Deeq-bixiyeyaasha ee dhici doona horraanta bisha Oktoobar ee sanadkan. Tani waa hab kamid ah hababka wax ku oolka ah ee QM ay ku caawin karto Hawlgalka.
- (iv) Sidoo kale, waxaan ogsoonnahay qodobka ku xusan jumlada lagusoo gabagabeeyay faqradda kor ku xusan. Sida aan u fahamsannahay ayaa ah in hanaanka HRDDP aanu ahayn hanaan ciqaab marin ama hanaan hadba sidii la rabo looga tanaasuli karo. AMISOM waxay u fahamsantahay in uu yahay hanaan fulineed oo xuquuqul insaanka lagu hago kaasoo u baahan in QM ay hagto ayna ka talo siiso jihada ama hay’adda loogu adeegayo marka ay jiraan sababo lagu rumaysan karo in ciidamo aan ka tirsanayn QM ay geysteen xad-gudubyo ba’an kuwaas oo ah kuwo lasoo qorsheeyay oo baahsan. Joojinta iyo la-noqoshada taageerada waa xalka ugu dambeeya, marka xadgudubyadaas oo kale ay dhacaan loona waayo caddeyn ah in la qaaday wax tallaabooyin ah oo lagu saxayo laguna yaraynayo saameynta, marka laga reebo indha-indheynta QM. Waxaan u aragnaa in aanu jirin qodob kamid ah qodobbadaas oo la dhihi karo wuu qabanayaa ama waa lagu qabsan karaa AMISOM.

Mudane, ii ogolow in aan soo gunaanado hadalkayga anigoo markale ku celinaya sida AMISOM ay uga go’antahay in fulinta hawlgalladeeda ee Soomaaliya ay waafajiso dhamaan sharciyada lagu dhaqmo ee kala ah Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha (IHL) iyo Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka (IHR). Xaaladda deeganada laga hawlgalo waa mid adag iyadoo maanka lagu hayo tabaha iyo qorshayaasha dagaal ee Al Shabaab. Si kastaba ha ahaatee, askarteenna waa la tababaray waxaana si cad loo faray inay u hogaansamaan sharciyada dhaqan-galka ah. Si looga guul gaaro hawshaas, AMISOM waxay soo saartay siyaasado kala duwan iyo tallaabooyin muhiim ah si ay u hagaan ciidamooda ku sugan Soomaaliya. Waxaan kusoo dhoweynaynaa UNSOM inay Hawlgalka ku taakulayso sidii loo xoojin lahaa hababka hadda jira ee ay adeegsato AMISOM si ay u sii wadato fulinta hawlgalladeeda iyadoo u hoggaansan dhamaan xeerarka degsan.

Iga guddoon, Mudane, tixgelinta qadarinteyda ugu sarreysa.

Danjire Francisco C. Madeira

Ergayga Gaarka ah ee Gudoomiyaha Guddiga

Midowga Afrika u qaabilsan Soomaaliya, ahna Madaxa AMISOM

SIR XAJIN

Telefoon: +252699583547/617983387
Marka aad ka jawaabeysid, fadla kusoo qor
E-mail: Mogadishu.kes@gmail.com

SAFAARADDA KENYA, MUQDISHO
GEGIDA CAALAMIGA AH EE MUQDISHO
MUQDISHO

Ref. No. KES/MGD/ADM.1/31/(03)

Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya – Xafiiska Ergeyga Sare ee Qaabilsan
Xuquuqul Insaanka
Muqdisho

(Ku: Kirsten Young)

Jawaabta Dowladda Kenya ee ku aaddan warbixinta qabya qoraalka UNSOM (Soomaaliya) ee ku saabsan Badbaadinta Dadka Rayidka ah:

Dhisidda Aasaaska Nabadda, Amniga iyo Xuquuqda Aadanaha Diseembar, 2017

Waxaan tixraacaynaa qoraalka [dokumentiga] kor ku tilmaaman ee anaga naloosoo diray 28dii Nofeembar, 2017. Dokumentiga waxaa ku qoran eedeymo la xiriira xadgudubyo ka dhan ah Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Dagaallada iyo Sharciga Caalamiga ah Xuquuqul Insaanka, eedeymahaas oo loo soo jeediyay Ciidamada Difaaca Kenya ee ka tirsan AMISOM kana hawlgala Soomaaliya, ciidamadaas oo warbixintu ku tilmaantay in ay yihiin Ciidamada Difaaca Kenya ee aan ka tirsanayn AMISOM. Waxaan rabnaa in aan si cad u sheegno in Dowladda Kenya ay warbixintan u aragto wax aad iyo aad xiiso abuur u ah, isla markaana xambaarsantahay eedeymo aan loo heyn wax caddeyn ah oo saameyn khatar ah ku yeelanaya Ciidamada Difaaca Kenya (CDK) oo ah ciidan xirfad leh. Si aan u kala caddeyno, jawaabteenna hoos ku qoran ayaa noqon doonta qoraalka farta maddow ee italics – ka ah. Waxaana jawaabteenna diiradda ku saari doonnaa faqradda 28, 29, 38, 40, 41, 43, 78 iyo 81 ee warbixinta, taas oo qaab xun loogu tilmaamay CDK. Waxaa kale oo jawaabta kamid noqon doona qoraal indha-indhayn ah oo ku saabsan warbixinta, waxayna jawaabtu u qorantahay sida soo socota:

EEDEYMAHA LOOSOO JEEDIYAY AMISOM IYO CIIDANKA DIFAACA KENYA EE KU SUGAN SOOMALIYA

Faqradda 27aad: Ee lagu sheegay in Kenya iyo Itoobiya ay Soomaaliya ka joogaan ciidamo u hawlgala si ka madaxbanaan Taliska Guud ee AMISOM, ciidamadaas oo ay ogolaatay Soomaaliya.

Jawaab: Jamhuuriyadda Kenya ma laha askar aan ka tirsanayn AMISOM ee ka jooga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. In warbixinta QM ay ku tilmaanto in Kenya ay leedahay ciidamo kusoo duulay Soomaaliya, ayaanan ahayn oo kaliya hadal aan sax ahayn, balse waa ah hadal aad nasiib darro u ah, sidaas darteed, waxaa loo baahanyahay in qaybtaas ka mid ah warbixinta si degdeg ah looga tiro.

Faqradda 28aad: Dhamaan guutooyinka AMISOM waxay ku lug leeyihiin xadgudubyo – dilal, kufsi wadareed, isku-day kufsi. **Guutada Kenya oo dishay 4 qof oo rayid ah dhaawacdayna 5 kale.** Khasaaraha soo gaaray dadka rayidka ah wuxuu inta badan ka dhashay rasaas aan loo meel dayin oo ay furaan ciidamada AMISOM marka kolonyadooda lagu weeraro Walxaha Qarxa, miinooyinka dhulka lagu aaso ama bamboo gacmeedyo. Xadgudubada kale waxaa kamid ah dilal aan sharciga waafaqsanayn, hab-dhaqan aan wanaagsanayn oo lala kulmo inta xabsiga lagu jiro, iyo xadgudub jinsi.

Jawaab: Hadal qoraaleedkan guud ma khuseeyo Ciidanka Difaaca Kenya oo iyagu ku dhaqma hab-dhaqanka ugu wanaagsan ee hawlgallada. Xaalad kasta ee ay dhacaan khasaare soo gaara dadka rayidka ah ama ay jiraan cabashooyin noocii ay doonaa ha ahaadaane, habraaca ayaa ah in lagusoo wargeliyo kadibna la baaro, laakiin habraacyadaas mid kamid ah ma lama marin. Kenya weli ma soo gaarin cabasho ku saabsan dhimasho dad rayid ah oo lagusoo eedeeyay CDK intii lagu guda jiray muddada dib-u-eegista. Haddii ay soo gaari lahaayeen cabashooyin, si dhakhso leh ayaa loo baari lahaa, waxaana laga qaadi lahaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah. Eedeynta halista ah ee loosoo jeediyay CDK ma aha wax xaqiiqo ah oo caddeyn ku fadhiya. Sidaas darteed, waa in aanay kasii qayb ahaanin warbixintan. Walxaha qarxa ee lala beegsado kolonyada waxaa sii kordhiyay dhabba-galka Al-Shabaab ee caadiyan ka dhaca Waddooyinka Waaweyn ee Sahaydu maro. Caqligal ma aha in dadka rayidka ah ay fuliyaan dhabba-gal. Xaaladda iyo sawirka suurto-galka ka ah warbixinta ayaa ah in dagaallamayaashu ay iska dhigayaan dhibbanayaal. Ciidanka Difaaca Kenya ee ka tirsan AMISOM waxay si sax ah u raacaan mabaadi'da dhigaysa in tallaabooyinka la qaadayo ay noqdaan kuwa lagama maarmaanka ah [principles of necessity], kala-soocidda, iyo isku-dhiganka marka ay fulinayaan hawlgallo ka dhan ah Al-Shabaab. Sida horay loosoo sheegay, weerarada Al Shabaab ay u adeegsato walxaha qarxa iyo miinooyinka dhulka lagu aaso ayaa waxaa ku xigsada ama daboolo rasaas. Jawaab kasta oo guutada CDK ay ka bixiyaan xaaladahaas oo kale ayaa sida asalka ah lala beegsadaa argagixisada Al Shabaab ee lalama eegto dad rayid ah. Intaas waxaa sii dheer, CDK weligood kama qayb qaadanin dhacdooyin la xaqiijiyay oo lagu geystay dilal sharciga ka baxdsan, kufsi ama in si xun loola dhaqmo dadka lo xiraa.. Run ahaantii, CDK weligood dad xabsi kuma gelin Soomaaliya gudeheeda.

Sidaas darteed, Ciidanka Difaaca Kenya kama war hayo eedeymo gaar ah oo ku saabsan dilal sharci darro ah, hab-la-dhaqan xun ama xadgudub galmood oo ay geysteen xubnaha ciidanka ee jooga Soomaaliya. Iyagoo ka warqaba inay waajib tahay in la ilaaliyo dadka rayidka ah, lana xaqiijiyo taageeriddooda, ayaa CDK waxay goobaha ay mas'uulka ka yihiin ka fuliyaan Wada-shaqaynta Rayidka iyo Ciidamada (CIMIC) si loosoo jiito quluubta iyo dareenka bulshada guud. Tusaale ahaan [waxaa kamid ah], Goobo caafimaad oo toddobaad kasta Dadka lagu Daweeyo oo laga hirgeliyay dhamaan goobaha ay CDK mas'uulka ka yihiin, Dhismaha dugsiyo waxbarsho (Madrasooyin) oo laga dhisay deegaannada Busaar, Taabta, Hoosingo, waxaa kale oo ay ku deeqeen qalabka codbaahiyaha ah ee lagula hadlo dadweynaha, miisas ayay u qeybiyeen dugsiyo waxbarasho oo ku yaal Hoosingo, waxay ceelal biyood ka qodeen Afmadow, Billis Qooqaani, Taraka iyo Dhobley. Sidaas darteed, waxaan dalbanaynaa in eedeymaha aan saxda ahayn ee ka dhanka ah CDK laga saaro warbixinta.

Faqradda 29aad: CDK ee aan ka tirsanayn AMISOM waxay mas'uul ka ahaayeen 64 khasaaroooyin soo garay dadka rayidka ah (32 dhimasho ah iyo 32 dhaawac ah) sanadkii 2016. Deegaanada Jubbaland, xadgudubyada badankood waxaa loo aaneynayaa inay ka dhasheen duqeymo cirka ah oo ay geysteen CDK, oo sida lasoo weriyay loola kaashaday warar sirdoon oo laga helay CDK ee AMISOM.

Jawaab: Ilaha sirdoon ee ka jira Soomaaliya ayaa tiradoodu badantahay weyna ka ballaaran yihiin ilala sirdoon ee Dalalka Ku-deeqay Ciidamada. In la yiraahdo duqeymaha cirka ah waxaa la fuliyaa iyadoo la adeegsanayo warar sirdoon oo laga helay CDK ee AMISOM, ayaa ah wax xushmo la'aan waxayna u baahan tahay in loo caddeeyo si aan shaki laheyn. Warbixintan waa wax laga xumaado waxayna u muuqataa inay tilmaameyso in CDK ee ka tirsan AMISOM ay rasaas ku furaan dadka rayidka ah. Iyadoo la raacayo Qaraarka Golaha Amaanka ee tirsigiisu yahay 2036 (2012), Ciidanka Difaaca Kenya waxay ku hawl-galaan saddex diyaaradaha qumaatiga u kaca ah oo ka amar qaata kana dambeeya Taliyaha Ciidamada AMISOM. Diyaaradaha qumaatiga u kaca ee weerarada geysta waa agabka kaliya ee duqeymaha cirka lana adeegsado marka Al Shabaab ay geysato ama ay

geysan rabto weeraro aad u ballaaran oo ka dhan ah Guutooyinka AMISOM. Waxaa xusid mudan in argagixisada Al Shabaab ay adeegsadeen hub cul-culus sida "Tiknikada" lagu xiro gawaarida, Madaafiic iyo hoobiyeyaal, taas oo khasab ka dhigeysa in la adeegsado diyaaradaha qumaatiga u kaca ee wax duqeeya.

Eedeymaha khuseeya duqeymaha cirka ee ay geysteen ciidamada caalamiga ah

Faqradda 38aad: 74 duqeymo cirka ah ayaa dhacay muddadaas waxaana ka dhashay 57 khasaare dad rayid ah (23 dhimasho ah iyo 34 dhaawac ah). 26 kamid ah duqeymahaas cirka ah waxaa geystay CDK ee aan ka tirsanayn AMISOM waxaana ka dhashay 48 khasaare dad rayid ah (19 dhimasho ah iyo 29 dhaawac ah). Waxaa lagusoo warramay in duqeymaha cirka ah lala beegsanayay goobaha ay joogeen Al Shabaab, kadib weerarkii lagu qaaday saldhigga CDK ee AMISOM ee gobolka Gedo bishii Janaayo 2016.

Jawaab: Ma jiraan CDK oo ka halwaga Soomaaliya oo aan ka tirsanayn AMISOM. Run ahaantii, eedeyntaasi waa mid aan sax ahayn. Marka meel la geynayo Ciidamada Difaaca Kenya, waxaa lagu saleeyaa qaab-samayska sharci waxaana loo maraa Axdiga ama Dastuurka Qaramada Midoobay.

Faqradda 40aad: Bishii Disembar 2016, AMISOM waxay soo kireysatay saddex diyaaradood oo nooca qumaatiga u kaca ah, waxaana ay kasoo kireysteen Kenya, waxaana diyaaradahaas duuliya oo ku shaqeeya Ciidamada Difaaca Kenya ee ka tirsan AMISOM kana amar qaata Taliyaha Ciidamada AMISOM. Si kastaba ha ahaatee, CDK ee hoostaga AMISOM waxay adeegsanayeen qalabkooda dagaalka cirka ee iyaga u gaarka ah, taas oo asteynta cidda qaadaysa mas'uuliyadaha khasaaraha ka dhigeysa mid cakiran.

Jawaab: Eeg jawaabaha laga baxshay faqradda 29 iyo 38. Sida muuqata, wabixinta Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) waxay soo xigatay war saxaafadeed ay soo saartay Wasaaradda Gaashaandhigga Kenya oo warbixintu u soo qaadatay caddeyn ahaan. Waxaa xusid mudan, marka la eego hab-samaynta sharciga ee Kenya, in Wasaaradda Gaashaandhigga looga baahanyahay inay si joogto ah dadweynaha ula socodsiiiso horumarka CDK ay ka sameeyaan Soomaaliya. Xogta ku qoran [qoraalka] Wasaaradda Gaashaandhigga Kenya waxaa lagasoo dheehday warbixinnada warbaahinta AMISOM iyo kuwa caalamiga ah. Guutada Ciidamada Difaaca Kenya, inkasta oo ay ka tirsanyihiin kana amar qaataan AMISOM, haddana waxaa la xisaabtamaya muwaadiniinta iyo hay'adaha Jamhuuriyadda Kenya. Sidaas darteed, waa mas'uuliyad saaran Wasaaradda Gaashaandhigga inay muwaadiniinta ku wargeliso horumarrada la taaban karo ee la xiriira hawlgallada CDK ay ka fuliyaan Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, waa muwaadiniinta Kenya kuwa, iyagoo adeegsanaya dowladdooda, dirsaday CDK si ay u caawiyaan walaalhooda Soomaaliya, waxayna [muwaadiniinta Kenya] xaq u leeyihiin inay ogaadaan xaaladda halka ay marayso.

Faqradda 41aad: 74-ta duqeymood ee cirka ah eek u xusan faqradda 38aad, waxaa kamid ah 4 duqeymood oo CDK iyo Danab ay ka wada fuliyeen Jubbada Hoose. Hal qof oo rayid ah ayaa lagu dilay, labo kalena waa lagu dhaawacay duqeymo cirka ah oo CDK ka fuliyeen deegaanka Badhaadhe ee gobolka Jubbada Hoose. Xusid 45 – Danab waxay wada hawlgalaan Ciidamada Mareykanka iyo CDK si ay u wada fuliyaan duqeymo cirka ah oo ka dhan ah Al Shabaab.

Jawaab: CDK weligood ma fulin hawlgallo wadajir ah oo ay la fuliyeen DANAB. Danab waa la tababaraa waxayna la hawlgalaan ciidamo kale. Hawlgallada wadajirka ah waa inay lahaadaan qaab-samayn sharciyadeed oo leh tilmaamo iyo mas'uuliyado cad-cad oo lagu fuliyo hawlgallada si looga dheeraado mugdiga ku imaan kara haddii lasoo jeediyo eedeymo, sida kuwa ay soo bandhigtay warbixinta. Waxaa kale oo aan caddeynaynaa in CDK aanay weligood duqeymo cirka ah ka geysanin

deegaanka Badhaadhe sida lagusoo edeeyay. Sidaas darteed, eedeymaha loosoo jeediyay CDK eek u xusan faqraddan ma aha kuwo xaqiiqo ah waana in laga tiro warbixinta.

Faqradda 43: Xadgudubyada ay geystaan hay'adaha dowladeed iyo ciidamada caalamiga ah, gaar ahaan CDK laguma sameeyo baaritaan.

Jawaab: Kenya, gaar ahaan CDK kama war-hayo wax baaritaano ah oo socda ama hakad ku jira oo la xiriira badbaadinta dadka rayidka ah ee [ku saabsan xaaladda] Soomaaliya, amaba wax xadgudubyo ah, noocii ay doonaan ha ahaadaane.

Eedeymaha ku aaddan xadgudubyo loo geystay caruur

Caruurta waxay dhibanayaal u noqeen duqeymaha diyaaradaha ee lagu eedeeyo ciidamada Mareykanka ,, Ciidanka Difaaca Kenya, iyo ciidamo kale oo aan la bar-garanin. Xusid 95 - 24kii Maarso 2016, wiil ayaa la dilay 5 kalena waa la dhaawacay waxaana dhibtaas geystay duqeymo cirka ah oo CDK ka fuliyeen Jubbada Hoose. KDF waxay sheegteen in ay beegsanayeen xero ciidan oo ay lahayd Al-Shabaab. 22^{kii} Juun 2016, 4 carruur ah ayaa lagu dilay duqeyntii CDK ee degmada Ceel Waaq, gobolka Gedo.

Jawaab: CDK weligood weeraro hawada ah kama fulin gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya taariikhda lagu sheegay warbixinta. Si kastaba ha ahaatee, sida lagu sheegay warbixinta faqradda 78aad, dhinacyo badan oo ay kamid tahay Al Shabaab ayaa qorta oo askareeya caruurta si ay u dagaal geliyaan. Sidaas darteed, wax la qaadan karo ma aha in warbixintu ay dhacdada la xiriiriso khasaaro gaaray caruur, waxay u badantahay in khasaaraha caruurta ee lagu sheegay warbixinta ay ahaayeen caruur ka tirsanaa kooxaha dagaallama. Tusaale ahaan, waxaa la mid aha caruurta ka qayb qaadatay duullaankii lagu qaaday qaybo kamid ah Puntland ee lagu xusay faqradda 80aad ee warbixintan. Sidaas darteed, eedeymahaan ma aha kuwo xaqiiqo ah. Waxaa xusid mudan in Ceelwaaq ay tahay Kenya oo aanay ahayn meel ku taal gobolka Gedo ee Soomaaliya, sidaas darteed, sida warka loo dhigay juquraafi ahaan waa khalad.

Faqradda 83aad: 76 dhacdooyin lagu weeraray dugsiyo waxbarasho iyo 20 kale oo lagu weeraray isbitaallo, ayaa CDK waxay mas'uul ka ahaayeen weerar loo geystay hal dugsi waxbarasho.

Jawaab: CDK kama war qabo wax weerar ah oo xubnihiisu u geysteen dugsi waxbarasho oo ku yaal gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Marka laga hadlaayo dugsiyada waxbarasho, isbitaallada iyo goobaha loo bulshadu isticmaasho, , CDK waxay dayac-tireen dugsiyo badan oo waxbarasho, madrasooyin, goobo caafimaad iyo masaajidyo ku yaalla goobaha ay mas'uulka ka ahaayeen. Sidaas darteed, lama filan karo in CDK ay burburriyeen kaabayaal ay horumar ku sameeyeen si ay u kasbadaan kalsoonida iyo taageerada dadka. Sidaas darteed, warbixintu sax ma aha. Waxaa intaas sii dheer, in CDK ay aqoon u leeyihiin Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha / Sharciga Colaadaha Hubeysan, sidaas darteed, waxay awood u leeyihiin inay hubiyaan sharcinimada goobaha la beegsanayo. Inkasta oo argagixisada Al Shabaab ay si joogto ah gabbad uga dhigtaan goobaha ay dadku degganyihin/joogaan sida dugsiyada waxbarasho, isbitaallada iyo meelaha la degganyahay, ayaa CDK si ku-talaggal ah uga fogaadaan inay weeraro ka fuliyaan goobaha ay kamid yihiin dugsiyada waxbarasho iyo isbitaallo si looga fogaado khasaare kale. Sidoo kale, waxaa xusid mudan in CDK si quman loogu tababaray Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha iyo dhinacyada guud ee bani'aadamimada. Ka hor inta aan loo dirin hawl, askartu waxay maraan tababar kale oo lagu cusbooneysiinayo tababarradoodii hore ee ku saabsan dhinacyadaas, waxayna tababarradaas ku qaataan Xarumaha Taageerada Hawlgallada Nabadda ee ku kala yaal Embakasi iyo Karen ee dalka Kenya. Sanadkii 1999 ayaa dhinacyadaas aan soo sheegnay lagusoo

daray barnaamijyada tababarrada ciidan. Tababarrada la bixiyo ka-hor inta aan ciidanka la qaadin iyo weliba inta ay qaybta ka yihiin hawlgalka, tababarradaas oo ku saabsan Xeerarka Caalamiga ah ee lagu maamulo hawlgallada ciidan ayaa waxaa tababarradaas fuliya Guddiga Caalamiga ah ee Bisha Cas (ICRC), waxaana tusaale ahaan kamid ah tababarki hawlgalka lagu dhex qaatay bishii September 2017 ee ka dhacay Dhobley. Waxaa intaas dheer, in taliyeyaal badan iyo saraakiil sharci yaqaanno ah oo ka tirsan CDK ay tababarradaas oo kale kusoo qaateen dalalka Talyaaniga, Australia iyo Ghana waxaana soo qabanqaabiyay ICRC.

Indha-indhayn Guud

Saaxada Soomaaliya waxaa ka hawlgala dhinacyo badan oo leh ujeedooyin kala-duwan, lugahana la galay xadgudubyo ka dhan ah Sharciga Caalamiyada Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka, haba ugu tun weynaadaan Al Shabaab. Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) waxay u muuqataa in aanay kala saarin dagaallaayaal, dad rayid ah iyo dhibbanayaal. Warbixinta ayaaba la moodaa in loo diyaariyay si loo kobciyo agendaha kooxda argagixisada ah maadaama sawir xun laga baxshay hawlgallada la-dagaallanka argagixisada iyadoo lagu buun-buuniyay dacaayadaha [borobagaandada] Al Shabaab. Eedeymahaas joogtada ah oo kale ee aan loo haynin wax xaqiiqo ah ayaa waxay dhibaato ku noqonayaan sidii looga guul gaari lahaa waajibaadka shaqo ee Qaramada Midoobay / Midowga Afrika, maadaama warbixintu ay niyad-jebinayso Nabad-ilaaliyeyasha.

Ka siyaasad ahaan, dhamaan hawlgallada CDK waxay waafaqsanyihiin Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka iyo Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha. Dowladda Jamhuuriyadda Kenya, iyadoo fulineysa waajibaadkeeda caalamiga ha, kama gaabin doonto inay marsiiso hababka iyo tallaabooyinka ku habboon qof kasta ee lagu tuhmo ku-xadgudubka Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha iyo Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka. Intaas waxaa sii dheer, Dowladda Kenya, marka laga hadlayo dhamaan hawlgalladeeda, waxay qaaddaa tallaabooyin kasta oo taxaddar ah si loo ilaaliyo dadka rayidka ah.

Gaar ahaan, geedi-socodka beegsiga waxaa si sarreysa ula socda oo xakameeya Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha iyo Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka. Waa geedi-socod qiimeyn oo joogto ah isla markaasina dhamaystiran, waxaana si sare loola kaashadaa xogo sirtoon oo laga helo dad iyo sahan farsamo, kor kala socod xog raadin, iyo xog buuxda oo laga helo halka bar-tilmaameedka ah. wada-shaqaynta iyo hubinta waxay ku timaadaa oo kale in xogaha sirtoon lala wadaago bahda sirtoonka. Geedi-socodkan waxaa looga dan leeyahay in la xaqiijiyo in hawl-galladu ay noqdaan kuwo si toos ah u abbaara Al Shabaab, laguna ilaalinayo dadka rayidka ah. Dowladda Kenya waxay qabtaa oo u muuqata aragtida ah in diiradda iyo xoogga warbixinta la saaro xadgudubyada ka dhanka ah Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha ee ay geystaan Al Shabaab oo markii ay doonaan sheegta inay yihiin rayid/dhibbanayaal kadib markii ay geystaan falal waxashnimo ah marka loo fiiriyo xeeladaha isu-dhigan la'aanta ah ee ay adeegsadaan. Sida iska cad, Al Shabaab iyo taageerayaashooda ayaa adeegsada xadgudubyadaas si ay u sameystaan dacaayado (borobagando). Dowladda Kenya ayaa sidoo kale ka walaacsan eedeymaha halista ah ee loosoo jeediyay CDK, eedeymahaas oo ah kuwo guud oo aan weli la caddeynin [la sugin].

Ugud dambeyntii, waxaa doonaynaa in aan sheegno in Dowladda Kenya iyo dadka Kenya ay taageersanyihiin sarreynta sharciga, oo aanay fududeysanin xadgudubyada ka dhanka ah Sharciga Caalamiga ah ee Xilliyada Colaadaha iyo Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka meel kasta oo dunida kamid ah, sidaas darteed, warbixintaan waxaan u qaadanaynaa si dhab ah. Eedeymaha ka dhanka ah CDK ayaa saameyn halis ah ku yeelanaya CDK, qoysaskooda iyo dadka Kenya oo iyaga oo u maraya dowladdooda, wax kasta u huray meel marinta iyo fulinta waajibaadka caalamiga ah iyo kuwa

heer gobol. Dowladda Kenya waxaa [mar kasta] ka go'an inay taageerto dadaallada nabadda iyo amniga ee caalamiga ah iyo hay'adaha caalamiga ah ee ku hawlan dadaalladaas sida Qaramada Midoobay iyo hay'adeheeda hawsha wada, gaar ahaan, UNSOM/OHCHR. Sidaas darteed, waxaa la rajeynayaa in si dhakhso leh looga laabto ee deymaha.

Safaaradda Jamhuuriyadda Kenya ee ku taal Muqdisho, Soomaaliya oo fursaddan ka faa'iideysanaysa waxay mar kale qaddarinteyda ugu sarreysa u xaqiijinaysaa Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, gaar ahaan Xafiiska Ergeyga Saree e Xuquuqul Insaanka.

Lucas K. Tumbo, CBS

DANJIRE

Safaaradda Kenya ee Muqdisho-Soomaaliya